# NAXWAHA AF SOOMAALIGA

Qore: Axmed Maxammad Sulaymaan
(Shiraac)

Daabacaaddii 3aad 2012

## Mahadnaq

*Eebbe ayaa is ka leh mahad oo dhan. Dad badan oo Soomaaliyeed baa igu leh abaal, ay ku mutaysteen tabantaabadii iyo dhiirrigelin tii ay i la garab joogeen ee marka aan dakaamo i dardar iyo nashaad gelinayay.*

*Waxa as na qaddarin iyo ammaan iga mudan qof kasta oo akhriya kitaab kan, si cilmi ah u naqdiya oo mooddiisa i soo gaadhsiiya si loo saxo wixii laaxin ah ee aan ka ilduufo oo aakhirka loo helo naxwe ebyiyan oo hufan.*

*Naxwaha Soomaaligu waa hawl u taalla jiilka maanta iyo ka berri. Tu cid gaar ah laga sugayo amma dhawrayo ma aha. Inta la qabyatirayo na, horumar u la' ummadda afka leh, waayo afku waa gacmihii aynnu kaga dhergi lehayn aqoonta iyo teknoolajiyadda casriga ah.*

*Kaatib: Axmed Maxammad Sulaymaan (Shiraac)*





## Arar

Kitaab kani waa labaatan fasal. Toban iyo siddeed naxwe ah, hal dalayn ah iyo hal ku saabsan dhigaalka af Soomaaliga (Somali Orthography). Fasalladu waa kuwo ku kooban hal amma labo bog iyo kuwo aad u dhaadheer.

Dabcan, casharro badan baa loo qaybin karaa fasallada dhaadheer oo ardayda dugsiyadu qaadan karaan. Baraha ayaa aan u dhaafay taas. Nasas danbe oo u gaar ah dugsiygada iyo heerar kooda tacliinta ayaa, mustaqbalka dhow, soo bixi doona Inshaa' Allah. Kuwaas oo laga talo gelin doono manaahiijta.

### Ereybixinta kitaabku waa sidan:

1. Erey hore u jiray oo hirgalay sida:- fal, magac, falkaab, sifo, xidhiidhiye....iwm.
2. Erey an hore u jirin oo aan bixiyay sida: gummud, kuddar, horgelis, dabagelis, kasheeg, dalayn....iwm.
3. Erey Carabi ah oo la yaqaanno sida:- faacil, mafcuul.....iwm.

### Dhigaal (Orthography)

Labo arrimood baa dhigaalka afka lagu qaabeeyaa: **naxwe** iyo **heshiis** (convention). Dhigaalka kitaab kani na waa sidaas uun.

Dhigaalka ku abtirsada naxwe waa qasab. Qofka jabiya waa ku laaxin iyo khalad cad geleya. Sida naxwuhu garto, si an ahayn oo loo qori karaa ma jirto.

Hadda ba, dhigaal an loo nisbayn karin naxwe ayaa jira oo ku qaabaysan heshiis akaademiyadda afka iyo culimada ku takhasusa afku dejiyaan. Kan oo lagu fadhiisiyo xeerar iyo qaacidooyin la raaco.

Nasiibdarro, akaademiyad ma leha afku maanta. Tii hore u jirtay na, dhaxal iftiimiya dhigaalka ka ma tegin. Mar kaa soo ma aha waajibka culimada in ay keenaan daraasad dhigaal oo aakhirka dhalisa ku lagu midaysan yahay.

Dhigaalka kitaab kani ku dhaqmayo, aniga oo keli ah ayaa ka mas'uul ah waxa uu la yimaaddo, sax iyo khalad.

Ugu danbayn, waxa aan ku talinayaa in akhristuhu ku horreeyo fasalka dhigaalka si ay ugu hawl yaraadaan faham kiisa iyo akhris kiisu.

Wa Billaahi Al-Tawfiiq.

Kaatib: Axmed Maxammad Sulaymaan (Shiraac)

# Tusmo


| Fasal | Mawduuc | Bog |
|---|---|---|
| 1. | Xaraf, Erey iyo Weedh | 6-7 |
| 2. | Hawraar | 8-8 |
| 3. | Hawraar Magaceed | 9-9 |
| 4. | Hawraar Faleed | 10-10 |
| 5. | Diiradeeye | 11-11 |
| 6. | Fal Qummane | 12-13 |
| 7. | Fal Maqummane | 14-14 |
| 8. | Meeleeye | 15-16 |
| 9. | Falkaab | 17-21 |
| 10. | Magac | 22-34 |
| 11. | Qodob | 35-38 |
| 12. | Magacuyaal | 39-44 |
| 13. | Sifo | 45-50 |
| 14. | Faacil | 51-57 |
| 15. | Mafcuul | 58-64 |
| 16. | Kaabe Magac | 65-67 |
| 17. | Xidhiidhiye | 68-70 |
| 18. | Fal | 71-113 |
| 19. | Dalayn | 114-118 |
| 20. | Dhigaal (Orthogrphy) | 119-145 |




## Fasalka Kowaad

***Xaraf, erey iyo weedh***

### Xaraf

***Waa maxay xaraf?***

Xaraf waa summad ka mid ah farta Soomaaliga. Xarafku waa labo mid: ***Shibbane*** amma ***Shaqal***. Xarfaha farta Soomaaligu waa kow iyo labaatan shibbane iyo toban shaqal. Kuwaas oo loo yaqaanno xarfaha higaadda.

***Tusaalayaal***

***Shibbane***

*b, t, j, x, kh, d, r, s, sh, dh, c, g, f, q, k, l, m, n, w, h, y.*

***Shaqal gaaban***

*a, e, i, o, u*

***Shaqal dheer***

*Aa, ee, ii, oo, uu*

### Erey

***Waa maxay erey?***

Erey waa xaraf (shibbane amma shaqal) amma xarfo is ku dhigan oo af Soomaaliga macne sugan oo la garanayo ku leh.

***Tusaalayaal***:

*i, af, hoy, geel, abaal, hangool, hangaraarac.*

Tusaalayaashan kore waa ereyo. ***"i"*** waa ereyga ugu yar af

Soomaaliga, waa na magacuyaal. Fasalka magacuyaalka ayaa aynnu ku sii qaadaadhigi doonaa. Ereygu labo xaraf, saddex, afar, shan, lix iyo ka badan ba waa yeelan karaa.

### Weedh

***Waa maxay weedhi?***

Weedhi waa ereyo koox ah oo wada socda qoraal iyo odhaah ahaan, an se lehayn macne buure ah oo qof kii la la hadlayay ka bogan karo. Ku ma qancayo oo bal in wax kale lagu daro ayaa uu sii dhawrayaa.

***Tusaalayaal***

*Oday iyo wiil reer miyi ah.*

*Awr raray ah.*

*Nin gadh leh.*

Tusaalayaashan kore waa weedho. Sida aad u arkaysid, mid wali ba waa koox ereyo ah oo wada socda.





## Fasalka Labaad

***Hawraar***

### Waa maxay hawraari?

Hawraari waa koox ereyo ah oo wada socda qoraal iyo odhaah ahaan oo leh macne faa'iido leh oo la garanayo.

***Tusaalayaal***

*Waa aan raacaa geela.*

*Nin baa gadh leh ragga.*

*Qof baa cunay bariis.*

*Inanka ayaa u weyn qoyska.*

Tusaalayaashanu waa hawraaro, maxaa yeelay:.

1. Waa ereyo dhawr amma koox ah,
2. Giddi waa faa'iidaynayaan macne la garanayo.

Sidaa awgood waa hawraaro.

## Fasalka Saddexaad

### Hawraar magaceed

**Hawraar Magaceed**

Hawraar magaceeddu waa hawraar xoogga saarta magaca oo su'aal iyo jawaab ba magaca siisa mudnaanta.

***Tusaalayaal***

*Inanka ayaa taga dugsiga.*

*Gabadh baa raacda geela.*

Hawraaraha kore waa hawraaro mudnaanta siinaya magaca. Si aynnu taa u caddayno hadda ba, aynnu is weydiinno su'aalahan soo socda:

***Ku*** *ma ayaa taga dugsiga?* iyo
*Ma* ***inanka ayaa*** *taga dugsiga?*

Su'aalahani, waxa ay saaran yihiin magacyada hoos ka xarriiqan ee ***"ku"*** iyo ***"inanka"***. Bal aad u eeg ereyga su'aasha ee ***"ma"***. Magacyada ***"ku"*** iyo ***"inanka"*** ayaa su'aaluhu saaran yihiin.

Bal jawaabahii su'aalaha aynnu eegno:

*Inanka ayaa taga dugsiga.*
***Haa.*** *Gabadh baa raacda geela.*

Jawaabahan, magacyada ***inanka*** iyo ***gabadh*** baa carrabka lagu xejinayaa. Su'aalahooda na waxa lagu raadinayaa cidda tagta dugsiga iyo cidda geela raacda. Falalka tegidda iyo raacidda, wax ba la is ka ma weydiinayo.

Sidaa awgeed, hawraar magaceeddu waa hawraar magacu mudan yahay, su'aal iyo jawaab ba. Waxa la is weydiinayo amma laga jawaabayo ayaa ah wax magaca oo keli ah khuseeya amma ku saabsan.





## *Fasalka Afaraad*

### Hawraar faleed

**Hawraar faleed**

Hawraar faleeddu waa hawraar mudnaanta siisa falka oo xoogga saarta. Oo su'aal iyo jawaab ba falku leh yahay mudnaanta.

***Tusaalayaal:***

*Inanku waa* ***tagaa*** *dugsiga.*

*Gabadhu* waa ***raacdaa*** *geela.*

Hawraarahan, falalku waa ereyada hoos ka xarriiqan ee ***"tagaa"*** iyo ***"raacdaa"***.

Hawraaruhu, falalka ***tagaa*** iyo ***raacdaa*** ayaa ay xoogga saarayaan. Si aynnu u tusno in hawraaruhu yihiin kuwo mudnaanta siinaya falalka, aan is weydiinno su'aalahan soo socda :

*Inanku ma* ***tagaa*** *dugsiga?*
*Gabadhu ma* ***raacdaa*** *geela?*

Ereyga su'aasha ee hawraaruhu waa ***"ma"***.

Hadda ba xaggee ***"ma"*** ka saaran yahay hawraaraha?

Ereyada hoos ka xarriiqan ee ***"tagaa"*** iyo ***"raacdaa"*** ayaa su'aaluhu saaran yihiin, kuwaas oo ah falalka hawraaraha.

Hadda na aan eegno jawaabaha hawraaraha oo sidan ah :

***Haa.*** *Inanku waa tagaa dugsiga.*
***Haa.*** *Gabadhu waa raacdaa geela.*

Sida aad u arkaysid, hawraaruhu waa hawraaro faleedyo. Waayo su'aal iyo jawaab ba, falka ayaa hawraar kas taa mudnaanta siinaysaa. Amma hawraar faleeddu waa hawraar falku leh yahay mudnaanta.





## Fasalka Shanaad

## Diiradeeye

Diiradeeye waa erey diiradda saara in hawraari tahay magaceed amma faleed. Saddex erey uun baa ah diiradeeyayaal, kuwaas oo ah:-

**Baa**, **ayaa** iyo **waa**.

***"Baa"*** iyo ***"ayaa"*** waa ereyo la la xidhiidhiyo amma weheliya hawraar magaceedda. Hawraaraha ay la socdaan na, sidan hoos ku qeexan baa ay ugu sii ka la habboon yihiin:

Magaca ku dhammaada ***"shibbane"*** amma shaqalka ***"i"***, amma '**y**' ***"baa"*** ayaa raacaysa, sida:

*Wiil **baa** raaca geela*
*Cali amma Axmed **baa** na la jooga.*
*U horray baa uu is lehaa.*

Magaca u danbeeyaan shaqallada ***"a, e, o" amma*** *shibbanaha* ***'h'***, ***"ayaa"*** ayaa raacaysa, sida:

*Wiilka **ayaa** raaca geela.*
*Deeqa **ayaa** na la joogta.*
*Jooge **ayaa** wax helay.*
*Roobleh **ayaa** dhibay dadka.*
*Burco **ayaa** aan ka imi.*

Ku, hadda uun, baranaya af Soomaaliga, ayaa loo qaadanayaa, qofka raaci waaya qaacidadaa.

"Waa" waa diiradeeyaha hawraar faleedda. Hawraar tiisu waa tu saaraysa xoogga falka oo keli ah. Eeg tusaalayaasha hawraar faleedda ee fasalka afaraad.

## Fasalka Lixaad

### Fal qummane

**Fal qummane**

Falka hawraar faleeddu waa fal qumman. Waa fal si wacan u xidhiidhiya faacilka oo muujiya qofka, jinsiga iyo tirada.

***Tusaalayaal***

*Waa aan **tagaa** dugsiga.*

*Waa aad **tagtaa** dugsiga.*

*Waa uu **tagaa** dugsiga.*

*Waa ay **tagtaa** dugsiga*

*Waa aannu **tagnaa** dugsiga.*

*Waa aydun **tagtaan** dugsiga.*

*Waa ay **tagaan** dugsiga.*

Falalka hawraaraha kore waa ereyada hoos ka xarriiqan. Dhammaan waa falal leh calaamadihii qofka faacilka ah, jinsi iyo tiro ahaan ba.

Hawraar kasta faacilka iyo falka uu falay waa la is ku soo soocayaa. Faacilka hawraarta afaraad waa ereyga ***ay*** oo ah magacuyaal qofka seddexaad oo dheddig (iyada), falku na waa ereyga ***"tagtaa"***.

Hadda ba ereyga falka ah ee ***tagtaa*** ma muujinayaa qofka?

Waxa uu inoo sheegayaa: in qofku yahay saddexaadka dheddig (iyada). Calaamadda ***"t"*** ayaa muujinaysa dheddigaanta. Mar kaa waa caddaan in faacilka iyo falka hawraartu is leh yihiin.

Hawraarta shanaad, faacilku waa ereyga ***"aannu"*** oo ah magacuyaal qofka kowaad oo wadar ah ***"annaga"***, falku na waa ereyga ***tagnaa***. ***Aannu*** iyo ***tagnaa*** na waa faacil iyo fal is waafaqsan. Is lehaanta na waxa muujinaya ***"n"*** ku jira tagnaa.





Hawraar kasta faacil keeda iyo fal keedu waa is waafaqsan yihiin qof, jinsi iyo tiro ahaan ba. Haddii ay is waafaqi waayaan na, hawraartu, mid qaldan baa ay noqonaysaa.

Sida aynnu kor ku soo aragnay, falka is leh yihiin faacil kiisa amma ay is waafaqsan yihiin qof, jinsi iyo tiro ahaan, baa ah fal qumman. Marka qofka faacilku fardi yahay, falku na waa fardi. Marka qofka faacilku se yahay wadar, falku waa wadar.

## Fasalka Toddobaad

### Fal maqummane

**Fal maqummane**

Falka hawraar magaceeddu waa fal maqummane ah. Waa fal faacil kiisa labo jeer oo keli ah lagu soo sooci karo. Labadaas oo ah qofafka: Saddexaadka dheddig iyo kowaadka wadarta ah. Inta kale se la is ku ma soo sooci karo.

***Tusaalayaal***

*Aniga ayaa **taga** dugsiga.*

*Adiga ayaa **taga** dugsiga.*

*Isaga ayaa **taga** dugsiga.*

*iyada ayaa **tagta** dugsiga.*

*Annaga ayaa **tagna** dugsiga.*

*Idinka ayaa **taga** dugsiga.*

*Iyaga ayaa **taga** dugsiga.*

Falalka hawraaraha kore waa ereyada hoos ka xarriiqan. Falalka toddobada hawraarood, shani waa is ku mid oo waa ereyga ***taga***. Falalka hawraaraha afaraad iyo shanaad baa ka duwan waayo falka waa lagu soo soocayaa faacil kiisa.

Falka hawraarta afaraad waa ereyga ***tagta***. Faacilku na waa ereyga ***iyada*** oo ah magacuyaal qofka saddexaad oo dheddig. Falka waa ka muuqataa in faacilku yahay saddexaadka dheddig, maxaa yeelay calaamadda **"*t*"** ayaa uu leh yahay.

Falka hawraarta shanaad aynnu eegno. Falku waa ereyga ***tagna***. Hadda ba, wax xidhiidh ah ma la leh yahay falku faacil kiisa? Haa. **"*n*"** ku jira falka ayaa ah calaamad ku tusaysa in faacilka falku yahay ***annaga*** oo ah magacuyaal qofka kowaad oo wadar ah.





Sida aynnu hore u soo sheegnay, falalka shanta hawraarood ee kale waa is ku mid in kasta oo leh yihiin faacillo ka la dududwan. Mar kaa falalka ka ma muuqan karaan faacilladu sida labada hawraarood ee kale.

Sidaa awgeed falka an lehayn waxa astaan ah oo lagu garan karo faacilka falka waa fal maqummane ah amma fal hawraar magaceed. Kaas oo an wax xidhiidh ah oo toos ah la lahayn faacilka.

Xataa labadii fal (afaraad iyo shanaad) ee aynnu soo xusnay ee la lahaa faacilka xidhiidh waa falal maqummanayaal ah maxaa yeelay falal kaasi ma aha kuwo tirada faacilka muujinaya in kasta oo ay qofka muujinayaan.

## Fasalka Siddeedaad

### Meeleeye

***Waa maxay meeleeye?***

Meeleeye waa erey ku jira hawraarta, ka horreeya falka oo qeexa meesha falka lagu falayo amma falku ka dhacayo.

Meeleeyaha qummani waa ereyo gaagaaban oo had iyo jeer ku lammaan falalka. Waxaa na ay meeleeyaan amma ku tusaan meesha falku ka dhacayo. Hawl an taa ahayn na loo ma isticmaali karo meeleeyayaasha qumman. Marka uu wax kale ku lammaan yahay baa macnihiisa si fiican loo sii gartaa. Meeleeyayaasha qummani waa:

***ka, ku, u, la, soo*** iyo ***sii***.

***Tusaalayaal***

*Warqad baa* ***ka*** *timid Burco.*

*UL* ***Ku*** *dhufo wiilka.*

*Waa la* ***la*** *tagay Yusur.*

*Reer kii waa* ***soo*** *guuray.*

***Sii*** *dir caruurta inta an aad dhoofin.*

Hawraaraha kore, ereyada hoos ka xarriiqan ee ***ka, ku, la, soo*** iyo ***sii*** waa meeleeyayaal qumman. Dhammaan tood waa ka horreeyaan falalka ay ku lammaan yahiiin ee ay meelaynayaan.

Bal aynnu soo qaadanno ereyada ***ka*** iyo ***ku***. Maxaa ay inoo sheegayaan?

***Ka*** waxa uu sheegayaa in ay tahay Burco meesha laga soo diray warqadda. ***Ku*** na waxa uu sheegayaa in ushu korka wiilka ku dhacayso. Sidaas baa ***la, soo*** iyo ***sii*** na ay u wada meelaynayaan





falalka ay ku lammaan yihiin.

Meeleeyayaasha kale ee an qummanayni waa ereyo mar kooda hore ah magacyo. In ay magacyo yihiin na, waxa ku tusaya; qodobbo ayaa ay qaadan karaan.

Meeleeyayaasha ereyada ahi na waa :

***hor, dhinac, ag, dabo, kor, hoos,*** iyo *...iwm.*

***Tusaalayaal***

*Weli waa la is* ***hor*** *fadhiyaa col kii.*

*Cali baa aan* ***dhinac*** *socday mar kii na la galay.*

*Waa uu na* ***ag*** *fadhiistay.*

*Waa ay na* ***dabo*** *hadaafaysay daal awgii.*

*Aqalka ayaa inanku* ***kor*** *baxay.*

*Miiska* ***hoos*** *gal si an macallinku kuu arkin.*

Hawraaraha danbe, ereyada hoos ka xarriiqani waa meeleeyayaal. Dhammaan waxa ay inoo sheegayaan meelaha falalku ka dhacayaan.

Falalka amma hawlaha ***fadhiga, socokda, fadhiga, hadaafka, bixidda (fuulidda),*** iyo ***galistu*** halka ay ka dhacayaan ayaa ay inoo sheegayaan ereyada ***hor, dhinac, ag, dabo, kor*** iyo ***hoos***. Mar haddii ay inoo sheegayaan meelaha falalku ka dhacayaan, ereyadu waa meeleeyayaal.

## Fasalka Sagaalaad

## Falkaab

### Falkaab

***Waa maxay falkaab?***

Falkaabku waa erey sida magacu tibaaxayo kaaba oo badhitaara falka hawraarta. Waxa kale oo falkaabku kaabi karaa sifo iyo falkaab kale.

**B. Waa immisa, hadda ba, falkaabyadu?**

1. Falkaabka iyo falka,
2. Falkaabka iyo sifada
3. Falkaabka iyo falkaab kale.

### 1. Falkaabka iyo falka

Falkaabku waa kaabaa fal.

***Tusaalayaal***

***Aad*** *baa inanku* ***u*** *ordayay mar kii uu kufay.*

***Hal kan*** *baa aannu fadhiisannaa.*

***Si xun*** *baa Cali* ***u*** *hadlay.*

***Xoog*** *baa ay* ***u*** *qaylisaa.*

***Berri*** *baa Cali iman doonaa, haddii Eebbe Idmo.*

Hawraarahan kore, ereyada waaweynaysan ee ***aad u, hal kan , si xun u*** iyo ***xoog u*** iyo ***berri*** waa ereyo ah falkaabyo. Dhammaan waxa ay kaabayaan amma badhitaarayaan falalka hawraaraha oo ah ereyada ***ordayay, fadhiisannaa, hadlay, qaylisaa*** iyo ***iman doonaa***.





Mar kaa sidaa aad u arkaysid, falkaabku waa erey wax ka sheegaya falka. Waxaa na uu inoo sheegaa sida falku u dhacayo amma u dhacay, meesha uu ka dhacayo, goorta la falayo ...iwm.

### 2. Falkaabka iyo sifada

Falkaabku, sifada tayada ah na waa kaabaa.

***Tusaalayaal:***

*Cunto* ***badan*** *baa Cali loo keenay.*

*Cunto* ***aad u badan*** *baa Cali loo keenay.*

*Inan* ***dheer.***

*Inan* ***aad u dheer.***

Sifada hawraarta kowaad, waa ereyga ***"badan".*** Hawraarta labaad, waxa sifadii xagga hore ka raacay ereyada ***"aad u"*** oo ah falkaab.

Hawraarta saddexaad, sifadu waa ereyga ***"dheer".*** Hawraarta afaraad, waxa xagga hore ka raacay sifada ereyada ***"aad u"*** oo ah falkaab.

Hawraaraha oo dhan, falkaabku waxa uu kaabayaa sifada oo wax inooga sheegaya sida ay u badan tahay cuntadu iyo sida inantu u dheer tahay. Mar kaa falkaabku, sifada na waa kaabaa.

### 3. Falkaabka iyo Falkaab kale

Falkaabku waa kaabaa falkaab kale.

***Tusaalayaal:***

***Si kulul*** *baa Cali u la hadlay wiilka*

***Si aad ugu kulul*** *baa Cali u la hadlay wiilka.*

Ereyada waawaynaysan ee *"**si kulul** "* ee hawraarta hore waa falkaab. Falka uu kaabayaa na waa ereyga *"**hadlay**".*

*Waxa* falkaabku inoo sheegayaa in sida *Cali u la hadlay wiilka* tahay *"**si kulul**".*

Hawraarta danbe, ereyada falkaabka *"**si kulul**",* waxa ku soo kordhay ereyada *"**aad ugu**".* Ereyadan danbe na waa falkaab kale. Falkaab kan danbe, ka hore ayaa uu sii macnaynayaa. In kulaylku ka sii xoog badan yahay sidii hawraarta hore ayaa uu inoo sheegayaa.

Mar kaa waxa hal kaa inooga cad in falkaabku kaabi karo falkaab kale oo wax ka sii sheegi karo sida falkaabku wax uga sheego falka.

**T. Kobta falkaabka**

Falkaabku, meel baa uu ku leh yahay hawraarta oo ka fadhiistaa. Waa uu ka horreeyaa falka iyo sifada uu kaabayo. Falkaabka na waa ay is dhex galaan.

***Tusaalayaal***

***Qun yar u** soco.*

***Xoog** baa Cali **u** shilis yahay.*

***Si aad u fool xun** baa loo caayay inanta.*

Hawraarta u horraysa saddexda hawraarood, falkaabku waa mid fal kaabaya. Falkaabku na waa ka horreeya falka uu kaabayo. Falkaabku waa ereyada **"qun yar u".** Falka la badhitaarayaa na waa ereyga *"**soco**".* Mar kaa falkaabku waa hormaraa falka uu kaabayo.

Hawraarta labaad, falkaabku waa mid sifo kaabaya. Falkaabku na waa ka horreeyaa sifada uu kaabayo. Falkaabku waa ereyada **"xoog, u".** Sifada la kaabayaa na waa ereyga *"**shilis**".*

Hawraarta saddexaad, falkaabku waa mid kaabaya falkaab kale. Labadii falkaab waa is dhex galeen. Falkaabka wax kaabayaa waa ereyada *"**aad u**".* Falkaabka la kaabayaa na waa ereyada *"**si fool xun**".*

Mar kaa labadii falkaab waa is dhex galeen.





**Fiiro gaar ah**

**Falkaabku waa hormaraa falka iyo sifada uu kaabayo, falkaabka na waa is dhex galaan.**

**J. Jaadadka falkaabyada**

Siddeed jaad baa falkaabku u ka la baxaa:

1. Falkaab si
2. Falkaab Baaxad
3. Falkaab ammin
4. Falkaab meel
5. Falkaab hubaal
6. Falkaab shaki
7. Falkaab salbi

**1. Falkaab si**

***Tusaalayaal***

***Si xun** baa ninku wiilka **u** dialy.*

***Si kasta** oo an aan yeelini ma jirto.*

***Si gobonimo leh** ayaa loo qabtay martidii.*

Ereyada *"**si xun, si kasta**"* iyo *"**si gobonimo leh**"* waa falkaabyo. Waxa ay ka la kaabayaan falalka hawraaraha oo ah *"**dilay, yeelini**"* iyo *"**qabtay**"* sida ay u ka la horreeyan. Waa is ku wada jaad oo waxa ugu wacan ereyga *"**si**"* ee ay wadaagaan. *"**Si**"* waa erey inooga warramaya xaaladda amma sida falku u dhacay amma loo falay.

**2. Falkaab Baaxad**

***Tusaalayaal***

***Aad baa uu u** qayliyay si loo maqlo.*

***Xoog** baa uu **u** ordi hayay mar kii uu xanbaarooday.*

***In yar** baa aan ka cunaa bariiska*

Falkaabyada hawraaruhu waa ereyada "***aad u, xoog u,*** iyo ***in yar"*** . Falkaabyadu waxa ay ka siman yihiin xoogga amma yaraanta loo falay falka la kaabayo. Mar kaa waa falkaabyo baaxad.

**3. Falkaab waqti**

***Tusaalayaal***

***Mar kasta** waa aan xasuustaa waalid kay.*

***Goor xun oo la ka la wada** hoyday baa ay gaadhay reer kii.*

***Dorraad** baa laga faraxashay hawshii.*

Falkaabyada hawraaruhu waa ereyada ***mar kasta, goor xun*** iyo ***dorraad*** oo dhammaan waqti sheegaya. Sidaas baa na ay u yihiin falkaabyo waqti.

**4. Falkaab meel**

***Tusaalehyaal***

***Hal kan** baa uu fadhiistaa maalinta Jimcaha.*

***Afgooye** ayaa uu tagay.*

***Meel kasta*** waa aan ka eegay qalinka.

Hawraarahan falkaabyadu waa ereyada ***hal kan , Afgooye,*** iyo ***meel kasta*** oo dhammaan meel sheegaya. Sidaas baa na ay ku yihiin falkaabyo meel.

**5. Falkaab hubaal**

***Tusaalayaal***

***Haa, Cali waa tagaa** dugsiga.*

***Run tii,** waa aan raacaa geela.*

***Been la'aan,** ma aan tago reerka.*





Falkaabyada hawraaraha kore waa ereyada ***haa, run tii, iyo been la'aan*** oo dhammaan sheegaya in hubaashii, falalku dhaceen. Sidaas baa na ay ku noqdayn falkaabyo hubaal.

**6. Falkaab shaki**

***Tusaalayaal***

***Waa laga yaabaa in** Cali tago dugsiga kal danbe.*

***Saa** higaadda kari waayaa marka uu dugsiga tago.*

Ereyada ***Laga yaabaa*** iyo ***saa*** waa falkaabyo. Waa ereyo shaki gelinaya falka. In uu dhici doono iyo in kale ayaa an la hubin. Mar haddii ay falka wax ka sheegayaan na waa falkaabyo. Waa na falkaabyo shaki.

**7. Falkaab nafyiyeed**

***Tusaalayaal***

***Ma uu** tago dugsiga.*

*Cali baa **an** raacin geela.*

Ereyada **ma, *an*** waa falkaabyo wax ka sheegaya falka oo sheegaya nafyinimada falalka.

Dhammaan tood waa falal jira oo la leh yahay: maya, waxaasu ma dhicin. Mar kaa waa falkaabyo nafyiyeed.

**Fiiro gaar ah**

Ereyga "***ma"*** waa nafyiyaha hawraar faleedda, halka "***an"*** yahay ka hawraar magaceedda...

## Fasalka Tobnaad

### Magac

**1. *Waa maxay magacu?***

Magacu waa erey loo bixiyo, lagu aqoonsado, loogu yeedho oo loo yaqaanno noole sida dad, xayawaan iyo geedo amma shay kale oo manoole ah.

***Tusaalayaal***

| | |
|---|---|
| *Cali, Faadumo, wiil* iyo *oday.* | Waa magacyo dad. |
| *Libaax, ey, hal* iyo *goroyo.* | Waa magacyo xayawaan. |
| *Qudhac, maraa* iyo *wancad.* | Waa magacyo geedo. |

*Miis, ardaa, geesinimo* iyo *daal* na waa magacyo waxyaalo (Kuwaas oo ah kuwo la taaban karo iyo kuwo an la taaban karin).

**2. Maxaa lagu gartaa magaca?**

Magaca, saddex wax baa uu leh yahay oo lagu gartaa oo ka la ah :

B. Qodob,
T. Jinsi iyo
J. Tiro.

**B. Qododka magaca**

Qodobku waa xarfo amma xaraf xagga danbe ka raaca magaca oo inoo sheega in waxa magaca lihi yahay macrifo amma mid ay is la garanayaan qofka hadlaya iyo ka la la hadlayaa. Magaca an wadanin qodob waa nakiro amma mid an ay is la garanaynin labadaa qof ee aynnu soo sheegnay.

***Tusaalayaal***

*Macallin iyo macallin**ka**.*





*Inan iyo inan**ta**.*

*Guri iyo guri**ga**.*

Ereyada kore waa ereyo magacyo ah. Saddexda magac ee hore ma leha qodobbo. Saddex danbe se waa leh yihiin oo waa xarfaha ***ka, ta*** iyo ***ga*** ee waaweynaysan. ***Macallin, Inan*** iyo ***guri*** waa magacyo ah nakiro oo an ay is la aqoonin labada qof ee wada hadlayaa.

***Macallinka, inanta*** iyo ***guriga*** se waa magacyo ah macrifo oo ay is la garanayaan qofka hadlaya iyo ka la la hadlayaa.

**Kaalinta qodobku kaga jiro magaca:**

Kaalin weyn baa qodobku kaga jiraa magaca waayo waa waxa keli ah ee ku tusi kara ereyga magaca ah amma noqon kara iyo ka kale. Ereyga qodob qaata waa magac. Ereyga an qodob qaadan karini ma aha magac. ***Dheer*** iyo ***gaaban*** waa labo erey oo an ahayn magacyo.

***Tusaalayaal***

*Dheer iyo dheerka*
*Gaaban iyo gaabanta*

*Geed iyo geedka*
*Ardaa iyo ardaaga*

Si fudud baa uu u garanayaa qofka af Soomaaliga yaqaannaa in ereyada ***dheerka*** iyo ***gaabanta*** ay khalad yihiin. Is ma leha ereyada iyo qodobbadu. Mar haddii ay is yeelan waayaan na, waa caddaan in an ereyadu ahayn magacyo. Sidaa awgeed na an ay u qaadan karin qodobbo.

Labada erey ee danbe ee ***geed*** iyo ***ardaa*** waa labo magac. Sidaa awgeed baa na ay u qaadan karaan qodobbo, sax na u yihiin.

**T. Jinsiga magaca**

Magacu, jinsi baa uu leh yahay. Waa in uu sidiisa ba noqdo ***lab*** amma ***dheddig***.

Hadda ba maxaa lagu garanayaa jinsiga magaca, ayaa is weydiin leh?

Waxa lagu garanayaa jinsiga magaca labada siyood ee soo socda :

1. Magaca qodobka leh (qodobleh),
2. Magaca an qodob lehayn (qodoblaawe)

**1. Jinsiga magaca qodobka leh (qodobleh)**

Magaca qodobka lihi saddex jaad baa uu u sii ka la baxaa :

b. Magac leh qodob qumman (qodob-qummanleh) iyo
t. Magac an lehayn qodob qumman (qodob-maqummanleh).
j. Magac wadar ah

**b. Jinsiga magaca qodobka qumman leh(qodob-qummanleh)**

Jinsiga magaca qodobka qumman leh waxa ku tusaya qodobka laf tiisa. Qodobka ayaa ka la leh ***lab*** iyo ***dheddig***. Mar kaa magaca uu raaco qodob labi waa magac lab. Ka qodob kiisu dheddig yahay na waa magac dheddig.

***Tusaalayaal***

*Inan**ka**, guri**ga**, kaaba**ha**.*

*Inan**ta**, lax**da**, gaba**dha**, us**ha**.*

Xarfaha waawaynaysan ee magacyada kore waa qodobo. Saddexda kore waa magacyo **lab** waayo qodobbada ***ka, ga*** iyo ***ha*** waa qodobbo **lab**. Afarta magac ee hoose na waa magacyo jinsigoodu **dheddig** yahay maxaa yeelay qodobbada ***ta, da, dha*** iyo ***sha*** ayaa **dheddig**.

**t. Jinsiga magaca qodobka maqummanaha ah leh**

Magacyada qaar baa mar na qaata qodob qumman, mar na an qaadanin qodob qumman. Waa magacyada u danbeeyaan xarfaha ***x, c, q*** iyo ***h***.

Marka ay qodob qumman qaataan, magacyadu waa magacyo jinsigoodu dheddig yahay. Marka se ay qaadan waayaan qodob qumman, waa magacyo lab.

***Tusaalayaal***





*Booc**a**, luuq**a**.*

*Booc**da**, luuq**da**.*

Qodabada labada magac ee sare waa xarfaha waaweynaysan ee ***"a"*** ee ereyada u danbeeya. Qodobka ***"a"*** ma aha qodob qumman. Qodobka qummani waxa uu ka kooban yahay labo xaraf. Magacyada ***booca*** iyo ***luuqa*** jinsigoodu waa lab yahay. Mar kaa qodobka, magaca ku dhammaada xarfaha aynnu kor ku soo sheegnay, waa xarafka ***"a"*** marka magacu lab yahay.

Marka magaca ku dhammaada xarfaha kor ku sheegani dheddig yahay, magacu waxa uu qaataa qodob qumman.

Bal eeg magacyada ***boocda*** iyo ***luuqda***. Qodobbada ***"da"*** ayaa labada ba u danbeeya, kuwaas oo ah qodobbo dheddig.

**Fiiro gaar ah**

Magacyada u danbeeyaan xarfaha ***x, c, q*** iyo ***h,*** waa **lab** yihiin haddii xarfka ***"a"*** u danbeeyo magaca. Marka ay **dheddig** yihiin, waxa ay qaataan qodob dhan amma qumman oo ***labo xaraf*** ah.

**j. jinsiga wadarta magacyada**

Jinsiga magaca wadarta ahi waxa uu ku xidhan yahay xarafka had ba magacu ku dhammaado.

***Tusaalayaal***

| **Fardi** | **Wadar** | **Qodob** |
|---|---|---|
| *Inan* | *Innamo* | *Innamada* |
| *Kab* | *Kabo* | *Kabaha* |
| *Tuulo* | *Tuulooyin* | *Tuulooyinka* |
| *Ardaa* | Ardaayo | Ardaayada |

Magacyada bidxdu waa wada **fardi**, kuwa dhexdu na waa wadarahoodii. Mar kaa soo ma arkaysid sida jinsiga wadartu is u la

bedbeddeleyo xarafka u danbeeya ereyga. Ka soo qaad ereyga ardaa. Fardigiisu waa lab yahay inlayn qodobka 'ga' ayaa raacaya ee. Laakiin wadar tiisa qodobka 'da' ee dheddig ayaa raacaya oo sida awgeed ka dhigaya dheddig.

## 2. Jinsiga magaca an qodobka lehayn

Jinsiga magacyada an qodobka lehayn (qodoblaawaha ah) waxa lagu gartaa astaamahan soo socda :

b. Codka ayaa lagu ka la saaraa labka iyo dheddigga,
t. Xarfaha magaca dheddigi ku dhammaado
j. Xarfaha magaca labi ku dhammaado.

### b. Codadka ayaa lagu gartaa jinsiga

Magacyada an qodobka lehayn waxa marar lagu ka la saaraa codka oo lagu gartaa jinsiga magacu leh yahay in uu lab yahay iyo in uu dheddig yahay.

***Tusaalayaal***

*Inan iyo inan.*

*Dameer iyo dameer.*

*Dabbaal iyo dabbaal.*

*Nacas iyo nacas.*

Magacyada ***inan*** iyo ***inan*** waa is ku dhigid, ka la dhihid. Ka hore waa **lab** yahay oo waa wiil. Ka danbe se waa **dheddig** yahay oo waa gabadh. Codka oo keli ah ayaa ka la saara kooda lab iyo ka dheddig. Si kale oo loo ka la garan karaa ma jirto.

Waa la mid labada magac ee danbe na, waa is ku dhigid iyo ka la dhihid. Codka ayaa inoo sheegaya in ka hore yahay lab, ***ka*** danbe na dheddig.

### t. Magaca "e" u danbeeyo waa lab yahay

Magaca, xarafka **"e"** u danbeeyo waa magac jinsigiisu **lab** yahay.

***Tusaalayaal***





*Diiri**ye**, wa**de**, qaa**de**, geelji**re**, ba**re**, abbaanduu**le**, kari**ye**, fu**re**, mar**re**, ...iwm.*

Magacyada kor ku sheegani is ku xaraf baa ay ku dhammaadaan. **"e"** ayaa u wada danbeeya. Mar kaa dhammaan waa **lab** yihiin.

### j. Magaca xarfaha "o" amma "a" u danbeeyaan, waa dheddig yihiin

Magacyada, xarfaha **"o"** amma **"a"** u danbeeyaan waa magacyo dheddig.

***Tusaalayaal***

*Diiris**o**, wadd**o**, qaadd**o**, mar**o**, karis**o**, murdis**o**, Burc**o**, Cadaad**o**, Kismaay**o** ...iwm.*

*Deeq**a**, Saxarl**a**', Hargeys**a**, Beerdhig**a**, Mark**a**, jigjig**a** ........iwm.*

Magacyadani dhammaan waa magacyo **dheddig** maxaa yeelay, waxa u danbeeya xarfaha aynnu kor ku soo xusnay ee **"o"** iyo **"a"**.

### J. Tirada magaca

Tirada magacu qaato waa labo mid :

1. Fardi iyo
2. Wadar.

### 1. Tirada Fardiga ah

Tiradu waa fardi marka tirada magacu hal tahay. Hadda ba tirada fardiga ah lafteeda ayaa labo u sii ka la baxda:

b. Fardi fardi ah iyo
t. Fardi wadar ah.

### b. Fardiga fardi ah

Tirada fardiga, fardi ahi, waa tiro hal uun ah oo an wax ka badan sheegaynin.

***Tusaalayaal***

*Bisad baa joogta aqalka.*

*Tuug baa noo soo dhacay xalay.*

Magacyada u horreeya hawraaraha oo ay ka hadlayaan waa: ***bisad*** iyo ***tuug***. Waa labao magac oo fardi ah maxaa yeelay tiro ahaan waa hal mid wali ba.

**t. Fardiga wadarta ah**

Magacyada qaar baa iyaga oo koox amma wadar ah, hadda na fardi ah. Waa wax badan oo wada socda oo hadda na koox ahaan hal ah.

***Tusaalayaal***

*Geel, adhi* iyo *lo'.*

Magacyadanu waa kuwo tilmaamaya xoolo badan oo wada socda. Hal amma awr keli ah oo meel jooga, ma la odhan karaa waa geel? Maya. La ma odhan karo. Sidaas awgeed geel, adhi iyo lo' waa magacyo fardi ah.

**2. Wadarta magaca**

Marka tirada magacu ka badan tahay hal oo tahay labo iyo wax ka sii badan baa la yidhaahdaa <u>wadar</u>.

Dhigaalka magaca fardiga ahi na waa is beddelaa. Falka na saamayn baa wadartu ku yeelataa haddii magacu mar kaa faacil yahay.

Saamayn taa waxa aynnu ku soo qaadi doonaa fasalka falka.

***Tusaalayaal***

*Bisado ayaa noo jooga aqalka.*

*Waraabayaal baa na soo weeraray xalay.*

Magacyada ***bisado*** iyo ***waraabayaal*** waa magacyo wadar ah. Waa magacyo sheegaya in tirooyinka bisadda iyo waraabuhu ka badan yihiin hal. Magacyadan fardigoodu waa sidan: ***bisad*** iyo ***waraabe***.





Mar kaa soo wax is ka ma beddelin dhigaal kooda? Haa.

***Bisad*** waxa ay noqotay ***bisado***,
***waraabe*** na ***waraabayaal***.

**Wadaraha magacyada**

Wadaraha magacyada af Soomaaligu, afar kooxood oo waaweyn baa ay u ka la baxaan. Xarfaha magacu, marka uu fardiga yahay, ku dhammaado amma xarfaha marka uu wadarta noqdo ku danbeeyo, ayaa na lagu ka la saaraa.

Afar taa kooxood waa ka la siyahan soo socda:

B. Wadarta magaca fardiga ah ee ***shibbane*** u danbeeyo ee hal iskudhawaaq ah,

T. Magacyada fardiga ah ee xarfaha **"*e*"** iyo **"*y*"** u danbeeyaan,

J. Wadarta magacyada fardiga ah ee shaqalka **"*i*"** u danbeeyo iyo

X. Wadarta magacyada fardiga ah ee shaqalka **"*o*"** u danbeeyo.

**B. Wadarta magacyada fardiga ah ee *shibbane* u danbeeyo ee hal iskudhawaaq na ah**

**1. Magaca lab**

Magacyada af Soomaaliga badan koodu jaad kan baa ay soo galaan. Wadarta magacu na waa sidan :

Wadarta magacu

⇩

fardiga magaca **+** **"a"** **+** shibaanaha magaca u danbeeya

***Tusaalayaal***

| | |
|---|---|
| *Fardiga magaca* | *wadarta magaca* |

| | |
|---|---|
| *Dab* | *dab**ab**.* |
| *Taaj* | *taaj**aj**.* |
| *Doox* | *doox**ax**.* |
| *Bookh* | *bookh**akh**.* |
| *Fad* | *fad**ad**.* |
| *Feedh* | *feedh**adh**.* |
| *Mar* | *mar**ar**.* |
| *Raas* | *raas**as**.* |
| *Faash* | *faash**ash*** |
| *Laac* | *laac**ac**.* |
| *Tog* | *tog**ag**.* |
| *Af* | *af**af**.* |
| *Baaq* | *baaq**aq*** |
| *Gal* | *gal**al**.* |
| *Ban* | *ban**an**.* |
| *Kaah* | *kaah**ah**.* |

**Fiiro gaar ah**

Magacyadan kore waa magacyo fardigoodu hal iskudhawaaq yahay. Wadarta magacyada ku dhammaada shibbanayaasha ***t, k*** iyo ***m,*** sidaas magacyada kale ayaa ay noqon lehaayeen haddii ay jiri lehaayeen.

**2. Magaca dheddig**

Wadarta magaca shibbane u danbeeyo ee dheddigi waa sidan :

Wadarta magacu = magaca fardiga ah + **"o"**.

***Tusaalayaal***

| *Fardiga magaca* | *Wadarta magaca* |
|---|---|
| *Kab* | *kab**o*** |
| *Lax* | *lax**o*** |
| *Ood* | *ood**o*** |
| *Beer* | *beer**o*** |





| | |
|---|---|
| *Lug* | *lug**o*** |
| *Oof* | *oof**o*** |
| *Duq* | *duq**o*** |
| *Been* | *been**o*** |
| *Baal* | *baall**o*** |
| *Bah* | *bah**o*** |

Wadarta magaca shibbane u danbeeyo ee dheddigi waa ka duwan tahay ta magaca lab ee aynnu hore u soo aragnay. Sida aad ku arkaysid tusaalayaasha, magaca shibbane u danbeeyo ee dheddig waxa wadar tiisa u danbeeya xarafka ***"o"***.

**3. Magacyo shibbane u danbeeyo oo an labada hore mid na gelin**

**B**. Magacyo shibbane u danbeeyo oo an labada hore mid na gelin baa jira, in kasta oo an ay sida kuwa hore u badnayn.

***Tusaalayaal***

| *Fardiga magaca* | *Wadarta Magaca* |
|---|---|
| *Faras* | *fardo* |
| *Maraq* | *marqo* |
| *Waran* | *warmo* |
| *Garab* | *garbo* |
| *Dalab* | *dalbo* |
| *Harag* | *hargo* |
| *Duufaan* | *duufaanno* |
| *Weerar* | *weerarro* |
| *Farraar* | *farraarro* |
| *Reer* | *reero* |

Wadarta magacyadanu la xeer ma aha kuwii aynnu hore u soo aragnay, in kasta oo shibbane u wada danbeeyo. Kuwani waxa ay ka samaysan yihiin ereyo labo iskudhawaaq ah amma ka badan, halka kuwii hore hal iskudhawaaq keli ah ka ahaayeen.

Labada ***iskudhawaaq*** ee magacyadanu waa :

***Faras*** = ***far*** + ***as***

| | | | |
|---|---|---|---|
| ***Maraq=*** | ***mar*** | + | ***aq*** |
| ***Gar =*** | ***gar*** | + | ***ab*** |
| ***Weerar=*** | ***weer*** | + | ***ar*** |
| ***Farraar =*** | ***far*** | + | ***raar*** |

Kuwan ***iskudhawaaqoodu*** labada yahay amma ka badan yahay, is ku si ayaa ay wadarta u sameeyaan haddii ay lab yihiin iyo haddii ay dheddig yihiin ba. Ka soo qaad labada magac ee ***garab*** iyo ***dalab***. ***Garab*** waa **magac lab**, ***dalab*** na waa **magac dheddig**.

Wadarta magaca leh labo ***iskudhawaaq*** amma ka badan la samays iyo xeer ma aha magacyada shibbane u danbeeyo wax kasta oo jinsigoodu yahay ba.

Sidaa aad u arkaysid, wadarta magacyada jaad kan ah xarafka ***"o"*** ayaa u danbeeya.

Waxa in taa dheer, magaca wadarta ah, xaraf baa xadfama (go'a) amma ku kordha, sida ereyada:

| | |
|---|---|
| ***Garab*** | ***garbo*** |
| ***Duufaan*** | ***duufaanno*** |

Xarafka ***"a"*** ayaa ka go'ay ereyga ***garab,*** halka ***"n"*** ku dheeraad yahay ***duufaan***.

**Fiiro Gaar ah**

Magaca ***reer*** waa magac lab, hal ***iskudhawaaq*** na ah, hadda na kooxdan baa uu ka mid yahay.

Xarafka ***"r"*** ee u horreeya, u na danbeeya ayaa sidaas ugu wacan.

Aqris kiisa ayaa adkaanaya haddii loo cuskado xeerka ereyga shibbane u danbeeyo ee halka iskudhawaaq ah ee lab oo sidaa awgeed ***"reer"*** lagu daro ***"ar"***.

Sidaas baa mar kaa ereygan kooxda labada ***iskudhawaaq*** ah loogu daray.

**T. Magacyada fardiga ah ee xarfaha *"e"* iyo *"y"* u**





**danbeeyaan**

Wadarta magaca fardiga ah ee u danbeeyaan xarfaha ***"e"*** iyo ***"y"*** waa sidan soo socota :

Wadarta magacu = fardiga magaca + ***yaal***

***Tusaalayaal***

| *Fardiga magaca* | *Wadarta magaca* |
|---|---|
| *Wade* | *wade**yaal*** |
| *Tusaaleh* | *tusaala**yaal*** |
| *Oday* | *oda**yaal*** |
| *Kariye* | *kariye**yaal*** |
| *Bare* | *bare**yaal*** |

Ereyga Tusaaleh 'e' u ma danbayso. Hadda na sidaas baa loo la dhaqmayaa maxaa yeelay 'h' waa xadfanta sida hal kan oo qudh ah maahee, aynnu meelo kale na ku arki doonno.

**J. Wadarta magacyada fardiga ah ee shaqalka *"i"* u danbeeyo**

Magaca fardiga ah ee shaqalka ***"i"*** u danbeeyo, wadar tiisu waa sidan :

Wadarta magaca shaqalka ***"i"*** u danbeeyo = magaca + **"yo"**.

***"y"*** waa shibbane, ***"o"*** na waa shaqal.

***Tusaalayaal***

| | |
|---|---|
| *Oori* | *oori**yo*** |
| *Mindi* | *mindi**yo*** |
| *Kaari* | *kaari**yo*** |
| *Gaadhi* | *gaadhi**yo*** |
| *Huuri* | *huuri**yo*** |

**X. Wadarta magacyada fardiga ah ee shaqalka *"o"* u**

**danbeeyo**

Wadarta magacu = fardiga magaca + "***ooyin***".

Marka magaca fardigiisa shaqalka "***o***" u danbeeyo, wadar tiisu waa sidan :

***Tusaalayaal***

| *Magaca fardiga ah* | *Magaca wadarta ah* |
|---|---|
| *Magaalo* | *magaal**ooyin*** |
| *Wareegto* | *wareegt**ooyin*** |
| *Sheeko* | *sheek**ooyin*** |
| *Guuldarro* | *guuldarr**ooyin*** |
| *Tuulo* | *tuul**ooyin*** |
| *Buro* | *bur**ooyin*** |

**3. Jaadadka magacyada**

Magacu waa labo jaad :

B. Magac gaar ah iyo
T. Magac guud.

**B. Magaca gaarka ah**

Magaca gaarka ahi waa magac loo yaqaanno qof, meel amma xayawaan rabbaayad ah oo u gaar ah, loogu na yeedho. Dadka iyo xayawaanku waa is u yaqaannaan oo ku soo jeestaan marka loogu yeedho.

***Maxaa hadda ba lagu gartaa magaca gaarka ah?***

***Tusaalayaal***

*Axmed, Geelleh,* iyo *Wiilo* waa magacyo dad.
*Teeyo, Xiinfiniin,* iyo *Garo* waa magayo hal, faras iyo ri' (sida ay u ka la horreeyan). *Baydhabo, Marka* iyo *Tuuyo* waa magacyo meelo.

Marka dhigaal jiro, waxa magaca gaarka ah u horreeya xaraf





weynaysan :

***Tusaalayaal***

***Aw Dubbad***, ***Mullaaxo*** iyo ***Xaaji Faarax***, maanta ayaa ay gaadhi yar u raaceen ***Jabbuuti***. Caawa, in ay ***Boorame*** ku sii dhaxaan baa la arkaa, oo berri uun ku hoydaan ***Lawyacadde***.

Hawraarahan kore, ereyada hoos ka xarriiqan ee ***Aw Dubbad, Mullaaxo, Xaaji Faarax, Jabuuti, Boorame*** iyo ***Lawyacadde*** , dhammaan waa magacyo gaar ah.

Seddexda hore waa magacyo dad. Seddexda danbe na waa magacyo meelo.

**2. Magacyada gaarka ahi ma leha wadar**

Magacyada gaarka ahi ma noqdaan wadar. Waa jiraan se kuwo mar kooda hore wadar ah oo sidaa loo yaqaanno.

***Tusaalayaal***

*Cali baa reerka u dhaamiya.*
*Caliyo ayaa u dhaamiya reerka.*

*Jigjigo ayaa u weyn Haro Faafan.*
*Jigjigooyin baa u weyn Haro Faafan.*

Afarta hawraarood, ta labaad ma aha sax. Caqligal ma aha in qof keli ahi noqdo dad badan. ***Caliyo*** marka la leh yahay, macnuhu waa rag amma innamo badan oo ka la duduwan , se is ku sammi uun ah. Sidaa awgeed baa magaca gaarka ah ee ***Cali,*** an looga dhigi karin wadar.

Hawraarta afaraad waa sidaas oo kale. ***Jigjigo*** ma noqon karto wadar. Haddii laga dhigo se wadar oo uu noqdo ***Jigjiggooyin***, waxa uu noqonayaa wax an la garanaynin oo kol na ba an xidhiidh la lehayn magaaladii.

**3. Magaca gaarka ahi ma qaato suge**

Magaca gaarka ahi ma qaato qodob maxaa yeelay isaga laf tiisa ayaa keligii la garanayaa oo u ma baahna wax kale oo lagu sii daro si loo aqoonsado amma sugo.

***Tusaalayaal***

*Cali baa taga dugsiga.*

*Caliga ayaa taga dugsiga.*

Labada hawraarood ta hore waa sax. ***Cali*** waa magac gaar ah oo ay is la garanayaan qofka hadlaya iyo ka la la hadlayaa. Maxaa mar kaa looga baahan yahay qodobka sii sugaya si la is u la garto.

Hawraarta danbe waa khalad. Qodobka ayaa na ku ah dheeraad.

## T. Magaca guud

### 1. *Waa maxay magaca guud?*

Magaca guud waa magac ka dhexeeya waxyaalo badan oo ay wadaagaan. Magaca guud wax gaar ah ku ma ega. Waxyaalahaasi, waxa ay noqon karaan kuwo ah noole amma manoole.

***Tusaalayaal***

***Geed*** *dheer baa aan ka koray* ***libaax****.*
***Inanka*** *waa laga eryay* ***dugsiga****.*
***Aqal*** *kayga ayaa u weyn kuwa* ***reerka****.*
***Beer*** *tiisu ma baxdo.*

Hawraaraha kore ereyada ***geed, libaax, inanka, dugsiga, aqal, reer*** iyo ***beer***, dhammaan waa magacyo guud. Geed kasta magaca geed baa loo yaqaannaa. Mid gaar ku ma aha. Magacyada kale na waa sidaas oo kale.

### 2. Magaca guud iyo sugaha

Magaca guud waxa uu qaataa suge si ay is u la gartaan hadlaha iyo lalahadluhu.





Hawraaraha kore magacyada ***inanka, dugsiga, aqal kayga, reerka*** iyo ***beer tiisu***, dhammaan waa magacyo guud oo ay weheliyaan sugayaasha sida ay u ka la horreeyan: ***ka, ga*** (waa ka oo is beddelay), ***kayga, ka*** iyo ***tiisu***. Sugayaashu waxa ay sugayaan magaca la is u sheegayo, oo haddii kale noqonaya mid an la is la garanaynin.

Magaca ***geed*** ee hawraarta u horreeya, ma wato suge. La is la ma garanayo. Haddii uu noqon lehaa ***geed kii*** amma ***geedka***, waxa uu u dhuran lehaa ku la garanayo.

#### Fiiro gaar ah

Suge waa erey ku casri ah naxweha afafka; waxa uu koobaa qodobka, magacuyaalka tilmaanta iyo magacuyaalka lehaanshiiyeha.

***Tusaalehyaal:***

| | | |
|---|---|---|
| *Qodob* | : | *ka, ta,...iwm* |
| *M/tilmaan* | : | *kan, tan ...iwm* |
| *M/lehaanshiiye* | : | *kay, tay...iwm* |

Waa xaqiiq in, in taas oo dhammi sugaan magacyada ay weheliyaan.

Fasalka Kow iyo Tobnaad

Qodob

## Qodob

### 1. *Waa maxay qodobku?*

Qodobku waa xarfo amma xaraf xagga danbe ka raaca magaca oo inoo suga in waxa magaca lihi yahay mid ay is la garanayaan qofka hadlaya iyo ka la la hadlayaa.

Magaca an wadanin qodob waa mid an ay is la garan haynin labadaa qof ee aynnu soo sheegnay.

***Tusaalayaal***

*Macallin iyo macallin**ka**.*
*Inan iyo inan**ta**.*
*Guri iyo guri**ga**.*

Ereyada kor ku taxani waa wada magacyo. Kuwa bidixdu waa magacyo an qodobbo lehayn. Kuwa midigtu na waa magacyo leh qodobbo. Kuwaas oo ah xarfaha waaweynaysan ee: ***ka, ta*** iyo ***ga***.

Qodobku waa suge. Suge na waxa uu sugaa magaca oo tusaa in magacu yahay mid ay is la garanayaan qofka hadlaya iyo ka la la hadlayaa. Suge oo dhammi na xagga danbe ayaa uu ka raacaa magaca uu sugayo.

### 2. Jinsiga qodobka

Qodobku waxa uu leh yahay jinsi. Qaar waa lab yihiin, kuwo na waa dheddig yihiin. Magacyada na sidaas baa ay u ka la raacaan. Qodobka labi, magac lab baa uu raacaa. Ka dheddig na, magac dheddig.

***Tusaalayaal***

| | |
|---|---|
| *Inan* | *inan**ka*** |
| *Guri* | *guri**ga*** |





| | |
|---|---|
| *Kaabe* | *kaaba**ha*** |
| *Inan* | *inan**ta*** |
| *Waddo* | *wadda**da*** |
| *Gabadh* | *gabadh**dha*** |
| *Ul* | *us**ha*** |

Qodobadu waa xarfaha waaweynaysan ee magacyada. Saddexda hore, qodobbadu waa ***ka, ga*** iyo ***ha***. Dhammaan waa qodobbo lab, waayo magacyada ayaa lab.

Qodobbada afarta magac ee danbe waa ***ta, da, dha*** iyo ***sha***. Qodobadani waa dheddig yihiin maxa yeelay magacyada ayaa dheddig.

Mar kaa toddobada qodob, saddexda: ***ka, ga*** iyo ***ha*** waa **lab yihiin**. Afarta ***ta, da, dha*** iyo ***sha*** na waa **dheddig yihiin**.

**Qodobada maqummanaha ah (an qummanayn)**:

Waxa jira qodobbo an sida kuwan hore u caddayn oo shibban. Waxa qaata magacyada ku dhammaada shibbanayaasha : ***x, c, q*** iyo ***h***. Hal kii qodob labo xaraf ahi ka raaci lehaa magacyadan oo ay u noqon lehaayeen ***xa, ca, qa*** iyo ***ha*** ayaa waxa ay qaataan xaraf keli ah oo ah "***a***".

Sababta xaraf kii kale loo liqay waa carrabka oo kari waayay. Mar kaa maxaa uu noqonayaa jinsiga magacyadan soo socda oo kale?

| | |
|---|---|
| *Libaax* | *suuq* |
| *Booc* | *kaah.* |

Marka magacyada jaad kaas ah ee ku dhammaada shibbanayaasha ***x, c, q,*** iyo ***h*** dheddig yihiin, waxa ay qaataan qodobbo hagaagsan oo labo xaraf ah oo dheddig.

***Tusaalayaal***

| | |
|---|---|
| *Dee**x*** | *deexda,* |
| *Boo**c*** | *boocda,* |
| *Luu**q*** | *luuqda,* |

*Bah* *bahda.*

Magacyada ku dhammaada shiibbanayaasha: ***x, c, q*** iyo ***h*** ee labi ma qaataan qodobbo hagaagsan.

***Tusaalehyaal***

*Libaax* *libaaxa*
*Raac* *raaca*
*Baaq* *baaqa*
*Kaah* *kaaha*

***Waa immisa hadda ba qodobbada qummani?***

***Immisaa ayaa lab?***

***Immisa ayaa se dheddig?***

Qodobbada qummani waa is ku toddobo. Saddex lab iyo afar dheddig.

***Tusaalayaal***

*Wanka, dugsiga, kaabaha* ⇨ **waa magacyo lab.**

*Beerta, marada, jidhiidha iyo usha* ⇨ **waa magacyo dheddig**

Mar kaa ***ka, ga,*** iyo ***ha*** waa **qodobbo lab**. ***Ta, da, dha*** iyo ***sha*** na waa **qodobbo dheddig**.

**Jinsiga magacu waxa uu ku xidhan yahay had ba qodobka uu wato.**

**Haddii mid labi raaco, magacu waa lab yahay. Haddii se mid dheddigi raaco, magacu waa dheddig yahay.**

**Magaca iyo qodobka raacaya**

Qodobka raacaya magaca waxa u haya had ba xarafka u danbeeya magaca iyo jinsigiisa.





Shaxdan ka day magacyada iyo qodobbada ku munaasibka ah :

| ka | ga | ha | Ta | da | dha | sha | a |
|---|---|---|---|---|---|---|---|
| b | g | h | B | x | dh | L | X |
| j | w | e | G | d | - | - | C |
| d | y | o | R | c | - | - | Dh |
| dh | aa | | S | Q | - | - | Q |
| r | i | | Sh | w | - | - | L |
| s | - | | F | y | - | - | H |
| sh | - | | M | i | - | - | - |
| f | - | | N | o | - | - | - |
| m | - | | - | u | - | - | - |
| n | - | | - | - | - | - | - |
| l | - | | - | - | - | - | - |

**Qodobbada magacyada wadarta ah**

Magacyada fardiga ahi marka ay is beddelaan ee noqdaan wadar, qodob koodu waa is beddelaa.

***Tusaalayaal***

*Innamo* *innamada,*
*Kabo* *kabaha,*
*Wiilal* *wiilasha,*
*Tuulo* *tuulooyinka.*

Is beddelka, qodobbadu is bedelaan ma leha qaacido fadhida oo la raaci karo.

Ka soo qaad, labada magac ee u horreeya tusaalayaasha. Waa ***innamada*** iyo ***kabaha***. Labadu ba shaqalka **"o"** ayaa ay ku dhammaadaan inta an qodob raacin. Hadda na waxa ay qaataan labo

qodob oo ka la duwan.

Ta xigta, qodobka wadartu ku danbayso ayaa u haya jinsiga, sida ku cad tusaalayaasha kore.





**Fasalka Labo iyo Tobnaad**

**Magacuyaal**

## Magacuyaal

Magacuyaalku waa erey u dhigma magaca oo gala kaalinta magacu hawraarta kaga jiro, qabta na hawsha magacu hawraarta ka hayo.

Magacuyaalku waa afar jaad :

B. Magacuyaal qofeed,
T. Magacuyaal tilmaameed,
J. Magacuyaal lehaanshiiyeed iyo
X. Magacuyaal su'aaleed.

## B. Magacuyaal Qofeed

Magacuyaal qofeedku waa afar jaad oo ka la ah :

1. Madaxbannaane,
2. Faacileed,
3. Mafcuuleed iyo
4. Nisbeed.

### 1. Madaxbannaane

Madaxbannaane waa magacuyaal qofeedka madaxa bannaan, ee keli is u taagi kara isaga oo an wax kale cuskanin, waa na kuwan hoos ku taxan:

| Qofka | Fardi | Wadar |
|---|---|---|
| Qofka 1aad oo ah qofka hadlaya, | ***Aniga*** | ***Annagga*** |
| Qofka 2aad oo ah qofka la la hadlayo, | ***Adiga*** | ***Idinka*** |
| Qofka 3aad oo ah ka laga hadlayo, | ***Isaga, iyada*** | ***Iyaga*** |

### Fiiro gaar ah

Qofka 3aad waa mar uu lab yahay iyo mar uu dheddig yahay.

***Tusaalayaal***

| | |
|---|---|
| ***Aniga*** *ayaa taga dugsiga.* | ***Anigu*** *ma tago dugsiga.* |
| ***Adiga*** *ayaa taga dugsiga.* | ***Adigu*** *ma tagtid dugsiga.* |
| ***Isaga*** *ayaa taga dugsiga.* | ***Isagu*** *ma tago dugsiga.* |
| ***Iyada*** *ayaa tagta dugsiga.* | ***Iyadu*** *ma tagto dugsiga.* |
| ***Annaga*** *ayaa tagna dugsiga.* | ***Annagu*** *ma tagno dugsiga.* |
| ***Idinka*** *ayaa taga dugsiga.* | ***Idinku*** *ma tagtaan dugsiga.* |
| ***Iyaga*** *ayaa taga dugsiga.* | ***Iyagu*** *ma tagaan dugsiga.* |

Hawraarahan kore, ereyada hoos ka xarriiqani waa **magacuyaallo madaxbannaan**.

Magacuyaallada hawraaraha bidixda ***"a"*** ayaa u danbeeya. Kuwa hawraaraha midigta na ***"u"***.

***Maxaa ay taasi ku tusaysaa?***

Waxa ay ku tusaysaa in magacuyaalladu yihiin sidii magaca ee mar noqonaya ***inanka***, mar na ***inanku***.

Mar kaa maadaama magacuyaalka madaxa bannaani is kii is u taagi karo, u na macaamilayo sidii magac qumman, oo qaadanayo dhawaha ka la jaadka ah ee magac qaadan karo, waxa cad in uu madaxbannaan yahay. Hal kasta oo magacu gala ba, waa uu galaa magacuyaalka madaxa bannaani.

## 2. Magacuyaal faacileed

Magacuyaal faacileedku waa magacuyaal qofeed mar kasta faacil ka ah hawraarta uu ku jiro. Qofaf kiisu na waa sidan :

| Qofka | Fardi | Wadar |
|---|---|---|
| *Qofka 1aad* | ***aan*** | ***aannu*** |
| Qofka 2aad | ***aad*** | ***aydun*** |
| *Qofka 3aad* | ***uu*** iyo ***ay*** | ***ay*** |





| | |
|---|---|
| *Qoflaawe* | ***la*** |

***Tusaalayaal***

| | |
|---|---|
| *Waa* ***aan*** *tagaa dugsiga.* | *Waa* ***aannu*** *tagnaa dugsiga.* |
| *Waa* ***aad*** *tagtaa dugsiga.* | *Waa* ***aydun*** *tagtaan dugsiga.* |
| *Waa* ***uu*** *tagaa dugsiga.* | |
| *Waa* ***ay*** *tagtaa dugsiga.* | *Waa* ***ay*** *tagaan dugsiga.* |
| *Waa* ***la*** *tagaa dugsiga.* | |

## 3. Magacuyaal mafcuuleed

Magacuyaal mafcuuleedku waa magacuyaal mar kasta ka ah mafcuul hawraar kasta oo uu ku jiro. Hadda ba mafcuulka ayaa u sii ka la baxa :

b. Mafcuul qumman iyo
t. Mafcuul dadban.

### b. Magacuyaal mafcuuleedka qumman

Magacuyaal mafcuuleedka qummani waa magacuyaal mafcuulku yahay mafcuul qumman oo toos falka faacilku falay u saamaynayo amma u taaban hayo. Waa na kuwan hoos ku taxan:

| Qof | Fardi | Wadar |
|---|---|---|
| *1aad* | ***i*** | ***na*** |
| *2aad* | ***ku*** | ***idin*** |
| *3aad(qoflaawe* | ***la*** | --- |

***Tusaalayaal***

*Waa uu* ***i*** *dilaa.* *Waa uu* ***na*** *dilaa.*
*Waa uu* ***ku*** *dilaa.* *Waa uu* ***idin*** *dilaa.*
*Waa* ***la*** *dilaa.* (qof saddexaad oo kale)

Hawraaraha kore, ereyada hoos ka xarriiqani waa magacuyaallo ah mafcuuleedyo qumman. Ereyada ***"uu"*** waa faacilo. Ereyada hoos ka

xarriiqan ee ***i***, ***ku***, ***na*** iyo ***idin*** waa mafcuuleedyo qumman maxaa yeelay toos baa falka faacilku falay ugu dhacayaa.

**t. Magacuyaal mafcuuleedka dadban**

Magacuyaal mafcuuleedka dadbani waa magacuyaal, mafcuulku dadban yahay oo falka la falay an uu si toos ah u saamaynaynin.

| *Qofka* | *Fardi* | *Wadar* |
|---|---|---|
| *1aad* | ***ii*** | ***noo*** |
| *2aad* | ***kuu*** | ***idiin*** |
| *3aad* | ***u*** | ***u*** |
| *Qoflaawe* | ***loo*** | ***loo*** |

***Tusaalayaal***

***Rar*** *baa awrku* ***ii*** *qaaday.*
***Rar*** *baa awrku* ***noo*** *qaaday.*

***Rar*** *baa awrku* ***kuu*** *qaaday.*
***Rar*** *baa awrku* ***idiin*** *qaaday.*

***Rar*** *baa awrku* ***u*** *qaaday.*
***Rar*** *baa awrku* ***u*** *qaaday.*

***Rar*** *baa* ***loo*** *qaaday.*
***Rar*** *baa* ***loo*** *qaaday.*

Hawraaraha kore, waxa ay leh yihiin labalabo mafcuul oo ka la ah : ereyada ***"rar"*** iyo ereyada kale ee hoos ka xarriiqan ee ***ii***, ***kuu***, ***u***, ***loo***, ***noo***, ***idiin***, ***u*** iyo ***loo***.

Hadda ba kuwa hore waa mafcuullo qumman oo waa ***"rarka"*** waxa la qaaday oo falku ku dhacay. Ereyada hoos ka xarriiqani se waa





magacuyaallo ah mafcuuleedyo dadban. Wixii la qaaday ma aha. Waa dad kii se loo qaaday. Mar kaa waa magacuyaallo ah mafcuuleedyo dadban.

Magacuyaalka ah mafcuuleedka dadban, meeleeyeyaal dahsoon baa ku dhafan. Sidaas baa na lagu gartaa. Haddii la rabo na, meeleeyeyaal kale ayaa dabada lagaga karaa sida :

***Nooga, noogu, kuugu, idiin ka, idiin ku, uga, ugu, looga, loogu...iwm***

**4. Magacuyaal nisbeedka**

Magacuyaal nisbeedku waa magacuyaal ay aad is u la sii og yihiin hadlaha iyo lalahadluhu oo aad mooddo in ay is xusuusinayaan. Waa na kuwan:

***ka, ta, kii, tii iyo kuwii.***

***Tusaalayaal***

*Ha la ganaaxo* ***ka*** *ka soo bixi waaya casharka.*
*Waa la ganaaxayaa* ***ta*** *ka soo bixi weyda casharka.*

***Kii*** *baa raacay wiilka.*
***Tii*** *baa raacday geela.*

***Kuwii*** *baa raacay geela.*

Magacuyaallo nisbeedku waa ereyada hoos ka xarriiqan ee ***ka***, ***ta***, ***kii***, ***tii*** iyo ***kuwii***. Magacuyaalladanu waa kuwo noqda sugayaal oo magaca xagga danbe ka raaca sida magacuyaallada tilmaanta iyo lehaanshiiyaha.

Waxa ay sheegaan in magaca amma qofka laga hadlayaa yahay mid la is la garanayo oo qofka hadlaya iyo ka la la hadlayaa ay is la garanayaan.

### d. Magacuyaal iseed

Magacuyaal iseedku waa magacuyaal ah mafcuul. Sida magacu sheegayo, faacilka iyo mafcuulka hawraartu waa is la qof keli ah. Mafcuulka ayaa falka is ku samaynaya. Sidaas baa na loo leh yahay iseed.

***Tusaalayaal***

*Waa **uu** is qaniinay.*
*Is cun **oo** is claasho.*
*Waa **ay** is dileen.*

### T. Magacuyaal tilmaameed

Magacuyaal tilmaameedku waa magacuyaal wax tilmaama sida magacu tibaaxayo. Tilmaan taasi waa sidii wax far lagu fiiqayo oo kale. Waa na kuwan magacuyaallo tilmaameedyadu :

| Fardi | | Wadar |
|---|---|---|
| Lab | Dheddig | |
| ***Kan*** | ***tan*** | ***kuwan*** |
| ***Kaa(s)*** | ***taa(s)*** | ***kuwaa(s)*** |
| ***Keer*** | ***teer*** | ***kuweer*** |

***Tusaalayaal***

*Kan baa taga dugsiga.*
*Tan baa tagta dugsiga.* *Kuwan baa taga dugsiga.*

*Kaas baa taga dugsiga.*
*Taas baa tagta dugsiga.* *Kuwaas baa taga dugsiga.*

*Keer baa taga dugsiga.*





*Teer baa tagta dugsiga.* *Kuweer baa taga dugsiga.*

### J. Magacuyaal lehaanshiiyeed

Magacuyaal lehaanshiyeedku waa magacuyaal sheegaya lehaanshiiye wax la leh yahay. Magacuyaallo lehaanshiiyeedyadu na waa sidan :

| **Qofka** | **Fardi** | | **Wadar** |
|---|---|---|---|
| | **Lab** | **Dheddig** | |
| *Fardi* | | | |
| *1aad* | ***kayga*** | ***tayda*** | ***kuwayga*** |
| *2aad* | ***kaaga*** | ***taada*** | ***kuwaaga*** |
| *3aad (Lab)* | ***kiisa*** | ***tiisa*** | ***kuwiisa*** |
| *3aad (Dheddig)* | ***keeda*** | ***teeda*** | ***kuweeda*** |
| *Wadar* | | | |
| *1aad (ku jiro)* | ***keena*** | ***teena*** | ***kuweena*** |
| *1aad (ku jirin)* | ***kaayaga*** | ***taayada*** | ***kuwayaga*** |
| *2aad* | ***kiina*** | ***tiina*** | ***kuwiina*** |
| *3aad* | ***kooda*** | ***tooda*** | ***kuwooda*** |

***Tusaalayaal***

1aad lab/fardi: dheddig/fardi

*Aqal **kayga** ayaa aan u socdaa.*

*Beer **tayda** ayaa aan u socdaa.*

### X. Magacuyaal weydiimeed amma su'aaleed

Magacuuyaal weydiimeedku waa magacuyaal u gaar ah weydiinta amma su'aasha, waa na kuwan soo socda :

**Fardi/lab** **Fardi/dheddig** **Wadar**

| | | |
|---|---|---|
| ***Kee*** | ***tee*** | ***kuwee*** |
| ***Ku-ma*** | ***tu-ma*** | ***kuwo-ma*** |

**Fiiro gaar ah**

Magacuyaallo tilmaameedyo, lehaanshiiyeedyo iyo nisbeedyo ka soo jeeda qodobbada : ***ga, ha (lab), da, dha, sha (dheddig),*** ayaa jira. Ayaa an aqristuhu, sidaa awgeed, u daymo la'aanin in ay kuwa ka soo jeeda : ***ka*** iyo ***ta*** ee hal kan ku tusaalaysan, la xeer iyo dhaqan yihiin oo haddii laga tegi waayo, kaga duwan yihiin uun iyaga oo an gaar is u taagi karin oo loo qori karin.





Fasalka Saddex iyo tobnaad

Sifo tayeed

**Sifo tayeed**

***Waa maxay sifo tayeed?***

Sida magacu sheegayo, sifo tayeeddu waa erey qeexaya tilmaanta wax leh yahay amma loo nisbaynayo mar kaa; waxaas oo noqon kara noole amma manoole.

***Tusaalayaal***

*<u>Inantu</u> waa* ***dheer*** *tahay.*
*<u>Orgi</u>* ***shilis*** *baa loo qalay martidii.*
*<u>Reer</u>* ***xun*** *baa na la soo darsay.*
*<u>Odaygu</u> waa* ***cadhaysan*** *yahay.*

Ereyada waawynaysan ee hawraarahan kore waa ereyo sifooyin, tayeedyo ah oo wax ka sheegaya tilmaamo leh yihiin ereyada magacyada ah ee hoos ka xarriiqan ee hawraaraha oo ah: ***inantu***, ***orgi***, ***reer*** iyo ***odaygu***.

Sifo tayeeddu, hadda ba labo mid uun baa ay u dhurataa:

1. sifo tayeed nisbo ah iyo
2. sifo tayeed qumman

**1. <u>Sifo tayeedda nisbada ah</u>**

Sifada tayeeddu waa nisbo haddii ay ka mid tahay koox faleedka hawraarta oo falku yahay fal ka soo jeeda fal xaalka ***"ahaw"*** ee gargaaraha ah. Fal xaalka ayaa na xidhiidhiya sifada iyo faacilka amma magaca ay wax ka sheegayso.

***Tusaalayaal***

*Wiilku waa* ***gaaban*** *yahay.*
*Cadku waa* ***mac*** *yahay.*
*Inanka ayaa* ***doqon*** *ah.*

*Faras baa **caddaa**.*

Magacyada hawraaraha kore waa ereyada: ***wiilku**, **cadku**, **inanka*** iyo ***faras***. Ereyada sifooyinka ahi na waa ereyada waaweynaysan ee ***gaaban**, **mac**, **doqon*** iyo ***cad***. Sifooyin kaas oo ku dhex jira koox faleedyada hawraaraha oo ah sidan :

***Waa gaaban yahay, waa mac yahay, ayaa doqon ah*** iyo ***baa caddaa(cad ahaa)***

Sifooyin kan iyo falalka ay is ku kooxda yihiin la ma ka la saari karo. Haddii la ka la saaro, hawraaraha ayaa an macne yeelanaynin sida tusaalayaasha soo socda :

***Tusaalayaal***

*Wiilku **gaaban***
*Cadku **mac***
*Inanku **doqon***
*Faras **caddaa***

Mar kan sifo tayeedda nisbada ahi waxa ay ka mid tahay koox faleedka hawraarta. Sifada iyo falka na la ma ka la reebi karo.

***Maxaa la gu gartaa sifo tayeedda nisbada ah?***

Sifo tayeedda nisbada ah looga ma maarmo hawraarta oo falka ayaa ay ka mid tahay. Haddii la jaro na, hawraartu waa u naafoobaysaa. Bal eeg tusaalayaashan :

***Tusaalayaal***

| | |
|---|---|
| *Inantu waa gaaban tahay.* | *Inantu waa tahay.* |
| *Geedku ma dheera.* | *Geedku ma aha.* |

- Fal xaalka ***"ahaw"*** (gargaaraha) oo keli ah ayaa na sameeya oo xidhiidhiya sifada iyo waxa amma magaca ay sifaynayso.
- Fal xaalka iyo sifada waa mar ay ka la dhigan yihiin iyo mar ay is ku dhigan yihiin sida tusaalayaasha soo socda :

***Tusaalayaal***





*Inantu waa **gaaban** tahay.*
*Geedku ma **dheera.***
*Farasku waa **cad** yahay.*
*Faraska ayaa **caddaa.***

Hawraaraha kowaad iyo saddexaad, sifada oo ah ereyada ***gaaban, cad*** iyo ***gargaarayaasha fal*** xaalka oo ah ereyada ***tahay, yahay*** ee dabo joogaa waa ka la dhigan yihiin.

Hawraaraha labaad iyo afaraad se waa is ku dhigan yihiin ereyada sifooyin tayeedyada ah iyo gargaarayaasha xaalku, waa na ereyada: ***dheera*** iyo ***caddaa,*** sida ay u ka la horreeyan.

Ereyadaas oo is ugu jirjira labolabadan erey :

| | | | | |
|---|---|---|---|---|
| **Dheera** | = | **dheer** | + | **aha** |
| **Caddaa** | = | **cad** | + | **ahaa** |

**2.Sifo tayeedda qumman**

Sifo tayeeddu waa qumman tahay haddii sifadu ka mid tahay koox magaceedka hawraarta. Mar kan waxa ba u ma dhexeeyaan amma ma xidhiidhiyaan sifada iyo faacilka amma magaca ay wax ka sheegayso.

***Tusaalayaal***

*Wiil **gaaban** baa taga dugsiga.*
*Waa la jecel yahay cadka **mac.***
*Awr **dabran** baa kambalka reerka daaqaya.*
*Ma aan lihi faras **cad.***

Ereyada waaweynaysan ee hawraaraha kore ee ***gaaban**, **mac**, **dabran*** iyo ***cad*** waa sifooyin ah tayeedyo qumman. Magacyada, ay wax ka sheegayaan na waa ereyada ka horreeya sifooyinka ee ***wiil**, **cadka**, **awr*** iyo ***faras***. Magacyada iyo sifooyinku waa is xigaan. Hawraaraha dhinac baa ay kaga wada jiraan oo waa is ku koox magaceed.

***Maxaa lagu gartaa sifo tayeedda qumman?***

Hawraartu waa ka maarantaa sifo tayeedda qumman. Haddii la jaro, hawraartu wax ba u ma noqonayso oo u ma naafoobayso.

***Tusaalayaal***

*Aqal **weyn baa** Faarax ka dhistay buurta.*
*Bisad **cad baa** noo joogta aqalka.*

Sifooyinka hawraaraha kore waa ereyada waaweynaysan ee ***weyn*** iyo ***cad*** oo ah sifooyin tayeedyo. Marka aynnu ka jarno ereyadan hawraaraha, waxa inoo soo baxaya:

***Aqal baa Faarax ka dhistay buurta.***
***Bisad baa noo joogta aqalka.***

Hawraarahan danbe ee soo baxay weli waa leh yihiin macne. Wax ba u ma ay noqonin ereyadii laga jaray ee sifooyinka ahaa. Sidaa awgeed baa sifooyinka ***weyn*** iyo ***cad*** u yihiin sifooyin tayeedyo qumman.

**Sifo tayeedda la socota magaca gaarka ah**

Marka sifo tayeedda qummani raacayso magac gaar ah, waxa qasab ah in magacu qaato qodob.

***Tusaalayaal***

*<u>Caliga</u> weyn baa raaca geela.*
*<u>Soomaaliyada</u> woqooyi ma leha webi.*

Hawraaraha ereyada hoos ka xarriqan ee Caliga iyo Soomaaliyada waa magacyo gaar ah. Qodobbo ayaa na u danbeeya magacyada. Waxa keenay qodobbada sifooyinka qumman ee ku xiga. Haddii an qodob jirin na, sifadu ma raaci karto waayo waa magacyo gaar ah.

**3. Waafaqa sifada guud ahaan**

Sifadu waa waafaqdaa magaca ay had ba wax ka sheegayso. Tirada ayaa na ay ku waafaqdaa.

Marka magacu yahay fardi, sifadu na waa fardi. Marka magacu se yahay wadar, sifadu na waa wadar.





***Tusaalayaal***

*Geed **dheer** baa aan fuulay.*
*Wiil **gaaban** baa uu dhalay.*

*Geedo **dhaadheer** baa aannu fuulnay.*
*Wiilal **gaagaaban** baa ay dhaleen.*

Hawraarahan ereyada waaweynaysan ee ***dheer***, ***gaaban***, ***dhaadheer*** iyo ***gaagaaban*** waa sifooyin ah tayeedyo.

Sifooyinka labada hawraarood ee hore ee ***dheer*** iyo ***gaaban*** waa **<u>fardi</u>**. Waxa ay sifaynayaan magacyada ***geed*** iyo ***wiil*** oo **<u>fardi</u>** ah.

Sifooyinka labada hawraarood ee danbe ee **dhaadheer** iyo **gaagaaban** se waa wadar waayo magacyada ay wax ka sheegayaan ayaa wadar ah.

**Mar kaa sifadu waa ku waafaqdaa magaca ay wax ka sheegayso tirada.**

**4. Muqaaranada sifooyinka tayada ah**

Sidii aynnu hore u soo sheegnay, sifada tayada ahi, waxa ay sheegtaa tilmaanta wax leh yahay. Hadda ba tayadaa amma tilmaan taa, ayaa labo wax, ku ka la badnaan amma yaraan karaan, marka la is barbardhigo. Taas oo loo yaqaanno ***<u>muqaarano</u>*.**

Muqaaranada amma is barbardhigga sifooyinka ayaa labo jaad ah.

b. Muqaaranada sifada labo wax
t. Muqaaranada sifada saddex wax iyo ka badan

**b. Muqaaranada sifada labo wax**

***Tusaalayaal***

*Cali waa **dheer yahay.***
*Axmed baa **ka dheer** Cali.*

*Cali baa* ***ka gaaban Axmed.***

Hawraaraha ta u horraysaa waxa ay noo sheegaysaa in Cali leh yahay amma loo nisbayn hayo dherer. Cid mar kaa la garab dhigayaa ma jirto.

Hawraarta labaad se waxa la is u eegayaa amma foodinayaa dhererka Axmed iyo ka Cali. Dherer kaas oo Axmed badsaday.

Hawraarta saddexaad waxa la is u eegayaa gaabnaanta Cali iyo ta Axmed. Gaabnaan taas oo Cali qaatay.

**Muqaaranada sifada labada wax, waxa lagu garanayaa ereyga "*ka*" ayaa raaca oo weli ba ka horreeya sifada.**

**t. Muqaaranada sifada saddex wax iyo ka badan**

Marka sifada tayada ah ee waaxyaalo saddex ah tiro ahaan amma ka badan la is u qiyaasayo amma la is barbardhigayo, waxa dhacda sida badan in midi kaga badnaato amma yaraato sifadaa kuwa kale oo dhan.

***Tusaalayaal***

*Cali waa* ***dheer yahay.***
*Axmed ba* ***ka dheer*** *Cali.*
*Faarax baa* ***u dheer*** *innamada.*

Hawraarta labaad waa muqaarano labo sifo. Waxa ka dhigay sidaa ereyga "***ka***" ee ka horreeya ereyga sifada ah.

Hawraarta saddexaad waa muqaarano saddex. Waxa calaamad u ah oo lagu garanayaa xarafka **u** ee ka horreeya ereyga sifada ah ee dheer.

Muqaaranada saddexda iyo ka badan waxa sameeya ereyga "***u***" oo ka horraynaya sifada mar kaa la muqaaranaynayo.

**5. Dhigaalka sifo tayeedda**
(fardi iyo wadar ahaan ba)

Sifadu waa labo jaad:





b. Sifo asal ah iyo
t. Sifo samays ah.

**b. Sifada asalka ah**

Sifada asalka ahi waa sifo an samays ahayn ee hore u jirtay oo ay tahay in sideeda lagu barto oo xaffido.

***Tusaalayaal***

*Dheer, shilis, cas, madaw, cad ...iwm*

t. **Sifada samayska ah**

Sifada samayska ahi waa sifo la sameeyay oo an asal ahayn. Waxaa na lagu gaartaa xarfo "***an***" amma "***n***" ayaa u danbeeya oo lagu soo sooci karaa.

***Tusaalayaal***

*Gaaban, wacan, tuman, wanaagsan ...iwm*

**6. Wadarta sifada**

Dhigaalka ereyga sifada ahi waa is bedbeddelaa. Tirada magaca sifo tayada ahi sifaynayso ayaa na uu is la bedbeddelaa.

***Tusaalayaal***

| Fardi | Wadar |
|---|---|
| *Dheer* | *dhaadheer* |
| *Gaaban* | *gaagaaban* |
| *Shilis* | *shilshilis* |
| *Cad* | *cadcad* |
| *Madaw* | *madmadaw* |
| *Fog* | *fogfog* |
| *Daran* | *dardaran* |

*Madhan* *madmadhan*
*Dakhran* *dakhdakhran*





## Fasalka Afar iyo Tobanaad

### Faacil

Faacil

***Waa maxay Faacil?***
Faacilku waa waxa hawraartu ka hadlayso amma wax ka sheegayso.

Labo ayaa hawraarta loo ka la qaadaa: ***Faacil*** iyo ***kasheeg***.

***Faacil*** waa waxa, wax laga sheegayo; ***kasheeggu*** na waa waxa wax ka sheegaya faacilka.

***Tusaalayaal***

***Awrta reerku*** *waa dibjirtay xalay.*
***Cali*** *waa tegey.*
***Cirku*** *waa tusan yahay maanta.*
*Kor kayaga, ayaa* ***xabbado seeraaro ahi,*** *wiifayeen.*

Ereyada waaweynaysan ee hawraaraha kore waa ***faacillo***. Hawraaraha inta kale na waa ***kasheegyo***.

Saddexda hawraarood ee hore, faacilku xagga hore ayaa uu ka galaa, halka ta u danbaysa uu dhexda kaga jiro.

### T. Faacilka iyo hawsha

Faacilka ayaa qabta amma loo nisbeeyaa in uu qabto hawsha falka hawraarta, xataa haddii falku yahay mid an la taaban karin.

***Tusaalayaal***

*Beerta ayaa* ***Caways*** *falaa.*
***Sanqadh*** *baa ii baxday.*
*Abaalgud baa* ***la*** *siiyay ardayga.*

Ereyada waaweynaysan ee hawraaraha ee ***Caways, sanqadh*** iyo ***la*** waa faacillada qabtay hawlaha ay sheegayaan falalka ***falaa, baxday*** iyo ***siiyay***.

Hawraarta u danbaysa faacilku waa magacuyaalka ***"la"*** oo sheega faacil dahsoon amma an la garanaynin.

Faacilka hawraarta dhexe ma aha noole. ***Sanqadh*** waa erey sheegaya wax an la taaban karin. Mar kaa run tii iyada oo sanqadhi an ay ahayn wax hawl qabanaya, baa hadd na, hawsha falka hawraarta loo nisbaynayaa maadaama ay tahay faacilka hawraarta.

### J. Maxaa noqon kara faacil?

Waxa noqon kara faacil :

1. Magacuyaal faacileed iyo
2. Magacuyaal amma magac kale.

### 1. Magacuyaal faacileed

Magacuyaal faacileedku waa magacuyaal mar kasta faacil ah oo an wax kale noqon karin. Waa na kuwan hoos ku taxan magacuyaallo faacileedyadu :

| | |
|---|---|
| Qofafka fardiga ah : | ***Aan, aad, uu, ay.*** |
| Qofafka wadarta ah: | ***Aannu (aynnu), aydun iyo ay.*** |
| Faacilka an la aqoonin: | ***La.*** |

***Tusaalayaal***





*Waa* ***aan*** *cunaa hilibka.*
*Waa* ***aad*** *raacdaa geela.*
*Waa* ***uu*** *tagaa dugsiga*
*Ma* ***ay*** *tagto reerka.*

*Waa* ***aannu*** *cunnaa hilibka. (Waa* ***aynnu*** *cunnaa hilibka.)*
*Waa* ***aydun*** *raacdaan geela.*
*Waa* ***ay*** *tagaan dugsiga.*

*Waa* ***la*** *dilaa inanta.*

Ereyada waaweynaysan ee hawraaraha kore waa magacuyaallo. Waa na faacillo. Wax an faacil ahayn ma ba noqon karaan. Sidaas awgeed, baa magacuyaalka jaad kan ah loo yidhaa magacuyaal faacileed.

### 2. Magac amma magacuyaal kale na waa noqdaa faacil

Magac amma magacuyaal kale na waa noqon karaa faacil.

***Tusaalayaal***

***Inanku*** *waa dhigtaa casharka.*

***Inanka*** *ayaa dhigta casharka.*

***Kanu*** *waa dhigtaa casharka.*
***Kaas*** *baa dhigta casharka.*
***Kaygu*** *waa dhigtaa casahrka.*
***Kiisa*** *ayaa dhigta casharka.*

***Anigu*** *ma dhigto casharka.*
***Aniga*** *ayaa dhigta casharka.*

***Kii*** *waa dhigtaa casharka.*
***Tii*** *ma dhigato casahrka.*

Ereyada waaweynaysan ee hawraaraha kore waa magacyo iyo magacuyaallo.

***Inanku*** iyo ***inanka*** waa magacyo.

***Kanu*** iyo ***kan*** waa magacuyaallo tilmaameedyo.

***Kaygu*** iyo ***kiisa*** na waa magacuyaallo lehaanshiiyeed.

***Anigu*** iyo ***aniga*** waa magacuyaallo madaxbannaan.

***Kii*** iyo ***tii*** na waa magacuyaallo nisbeedyo.

Waxa ay ka siman yihiin, dhammaan tood, faacillo ayaa ay ka yihiin hawraaraha. Mar kaa magac amma magacuyaal waa noqon karaa faacil.

Hadda ba waa aannu garannay magacuyaal faacileedka mar kasta ah faacil ee maxaa lagu garanayaa magaca amma magacuyaalka kale ee faacilka ah?

Waa jiraan summado lagu garto magaca amma magacuyaalka kale ee faacilka ah.

**Faacilka hawraar faleeddu summado gaar ah ayaa uu leh yahay. Faacilka hawraar magaceedku na kuwo u gaar ah ayaa uu leh yahay.**

b. Summadaha faacilka hawraar faleedda iyo
t. Summadaha faacilka hawraar magaceed.

**b. Summadaha faacilka hawraar faleedda**

1. Faacilka hawraar faleedda summadlaha ah
2. Faacilka hawraar faleedda summadlaaweha ah

**1. Faacilka hawraar faleedda summadlaha ah**

Summadaha ***"u"*** amma ***"i"*** ayaa u danbeeya faacilka hawraar faleedda marka:

- **magacu sugan yahay.**
- **magaca an sugnayni dheddig yahay.**
- **magacu ka samaysan yahay koox ereyo ah.**

***Tusaalayaal***





*Inan**ku** waa dhigtaa casharka.*

*Kay**gu** ma tago dugsiga.*

*Kaa**su** waa raacaa geela.*
*Inan**i** waa noo joogtaa reerka.*
*Nin gadh lihi waa na soo siyaartay.*

Ereyada hawraaraha kore ee ***inanku, kaygu*** iyo ***kaasu*** waa magacyo sugan amma la garanayo. Magacyada ***inanku*** iyo ***kaygu*** qodobbo ayaa ay leh yihiin. Ereyga ***kaasu*** na waa suge oo is na waa sugaa magaca uu weheliyo oo waxa uu ka dhigaa mid tilmaaman.

Ereyada **"*k*"** ku bilaabma sida ***kay, kan, kii*** ...***iwm*** waa sugayaal. Mar kaa sugayaasha, summadaha **"*u*"** amma **"*i*"** ayaa u danbeeya marka ay sugayaal yihiin haddii ereyga sugaha ahi shibbane ku dhammaado.

Taas baa ugu wacan in dhammaan ereyada ***inanku, kaygu*** iyo ***kaasu*** wada yeeshaan summadda **"*u*"**.

Magaca dheddigi marka uu faacil yahay na waxa uu qaataa summadda **"i"** sida magaca ***inani*** ee tusaalayaasha ku jira.

Magaca ka samaysan koox ereyo ahi na waa qaataa summadda **"i"** marka uu yahay faacil. Summaddu na ma raacdo magaca laf tiisa ee waxa ay raacdaa ereyga kooxda u danbeeya. Tusaalahan u danbeeya, summaddu waa ta la socota ereyga "*lihi*" ee kooxda ereyada u danbeeya.

**2. Faacilka hawraar faleedda summadlaawaha ah**

Magac an qaadanin summad ayaa jira in kasta oo hadda na uu ka yahay faacil hawraar faleedda.

***Tusaalayaal***

***Cali*** *waa dhigtaa casharka.*
***Inan*** *waa tagaa dugsiga.*
***Tii*** *waa tagtaa dugsiga.*

Ereyada waaweynaysan ee hawraaraha kore, labada hore waa magacyo. Ka danbe se waa magacuyaal. Dhammaan tood hawraaraha faacillo ayaa ay ka yihiin. Hadda na wax summad ah ma leha.

**Waxa cad in faacilka hawraar faleeddu an uu summad lehayn marar kan:**

- **Magaca gaarka ah.**
- **Magaca qodoblaawe ah ee lab.**
- **Magacuyaalka shaqal u danbeeyo.**

## t. Summadaha faacilka hawraar magaceedda

Faacilka hawraar magaceeddu waa leh yahay summad haddii uu qodob leh yahay. Haddii se uu yahay qodoblaawe ma leha summad.

***Tusaalayaal***

***Inanka*** *ayaa dhighta cashar.*
***Kayga*** *ayaa raaca geela.*

***Kaas*** *baa cuna hilibka.*
***Inan*** *baa noo shaqaysa.*
***Wiil*** *baa arooriya xoolaha.*
***Nin*** *gadh leh baa noo raaca adhiga.*
***Cali*** *baa an tagin tuulada.*

Ereyada waaweynaysan ee hawraaruhu waa faacillo hawraaro magaceedyo. Qodobbo ayaa ay leh yihiin magacyada labada hawraarood ee hore. Magacyadaas oo ah: ***inanka*** iyo ***kayga***. Labada erey ba waxa u danbeeya shaqalka **"*a*"**.





Mar kaa faacilka hawraar magaceedda summadda **"*a*"** ayaa u danbeeya oo lagu gartaa haddii magacu qodob leh yahay.

Magacyada hawraaraha danbe oo dhan ee ***kaas, inan, wiil, nin*** iyo ***Cali*** waa magacyo an qodobbo lehayn. Sidaa awgeed na ma leha summad in kasta oo ay faacillo hawraaro magaceedyo yihiin.

## X. Kobta faacilku ka galo hawraarta

- Waa uu u horreeya hawraar magaceedda. Meel kale na ka ma geli karo hawraarta.
- Meel danbe ayaa uu kaga jiraa hawraar magaceedda nasaqan.

***Tusaalayaal***

1. ***Inanka ayaa dila inanta.***
2. ***Inanta waa dilaa inanku.***
3. ***Inanku waa dilaa inanta.***
4. ***Inanku*** ***inanta*** *waa dilaa.*
5. ***Inanta*** ***inanku*** *waa dilaa.*
6. *Waa dilaa* ***inanku*** ***inanta***.
7. *Waa dilaa* ***inanta*** ***inanku***.

Hawraaraha kore ee toddobada ah waa kuwo is ku macne laga wado. Kaas oo ah **inanka oo dila inanta**. Hadda ba, in tee baa sax ka ah

hawraaraha?

Afarta hawraarood ee danbe waa khalad, waayo is ma xigi karaan labo magac. Sidaas baa na ay ku dedefaysan yihiin hawraaruhu. Saddexda hawraarood ee hore ayaa sax ah. Mar kaa aan eegno halka ay kaga jiraan faacilladu:

Hawraarta hore oo ah hawraar magaceed, waa u horreeya faacilku. Si kasta oo la yeelo na meel kale laga ma gelin karo hawraarta. Hawraarta labaad oo ah hawraar magaceed nasaqan, xagga danbe ayaa faacilku kaga jiraa. Xarfad iyo nuuxnuuxsi awgood baa hawraar tan, sidaa loogu dhigay. Hawraarta u danbaysa oo ah hawraar faleed na, faacilku waa u horreeya.

Meelahaa aan kor ku soo xusnay meelo an ahayn ma geli karaan faacilladu, haddii la rabo in hawraaruhu sax noqdaan sida aynnu tusaalayaasha sare ku soo aragnay.

### D. Iswaafaqa faacilka iyo falka

Faacilka hawraartu waa hoggaanka hawraarta. Isaga ayaa haga falka hawraarta oo falku ku waafaqaa jinsiga iyo tirada ba.

***Tusaalayaal***

***Innamadu*** *waa cabbaan shaaha.*
*Waa* ***aydun*** *cabtaan shaaha.*
***Caasha*** *ma cabto shaaha.*

Faacillada hawraaruhu waa ereyada waaweynaysan ee ***innamadu, aydun*** iyo ***Caasha***. Falalka hawraaruhu na waa ereyada kale ee ***cabbaan, cabtaan*** iyo ***cabto***. Faacil kasta iyo fal kiisu waa is





waafaqsan yihiin.

Ka soo qaad hawraarta u horraysa: faacilku waa **innamada** oo ah qofka saddexaad oo wadar ah, falku na waa sidaas oo kale. Wadarta falka na waxa ku tusaya ***"n"*** u danbeeya falka. Hawraarta labaad, faacilku waa ***"aydun"*** oo ah wadarta qofka labaad. Falku na waa wadarta qofka labaad. Waxaa na ku tusaya in qofku sidaas yahay ***'t'*** qofka labaad ee ku jira falka cabtaan iyo ***"n"*** wadarta ee u danbeeya falka. Hawraarta saddexaad na faacilka falku waa fardiga qofka saddexaad oo dheddig. ***Caasha*** waa magac dheddig. Dheddigaanta falka na waxa ku tusaya ***"t"*** falka ***cabto*** ku jira.

## Fasalka Shan iyo Tobnaad

## Mafcuul

### Mafcuul

### *B. Waa maxay mafcuul?*

Mafcuulku waa waxa falka faacilku ku dhaco amma loo nisbeeyo in uu ku dhacayo.

***Tusaalayaal***

*Inantu waa lisi kartaa* ***hasha.***
***Geed*** *baa uu u lulay riyaha.*
*Ayayday baa korisay* ***Cali.***

Falalka hawraaraha kore waa: ***lisi kartaa, lulay*** iyo ***korisay.*** Faacilladu na waa ***inantu, uu*** iyo ***ayayday.***

Hadda ba, ayaa ay ku dhaceen amma lagu sameeyay falal kii. Waxa falaku ku dhaceen ***geela, geed*** iyo ***Cali.*** Kuwan falalku ku dhaceen baa mar kaa ah mafcuullo.

***Hadda ba waa immisa jaad mafcuulku?***

Mafcuulku waa labo jaad :

1. Mafcuul qumman iyo
2. Mafcuul dadban.

### 1. Mafcuulka qumman

Mafcuulka qummani waa mafcuulka toos u taabto amma ugu dhaco falka faacilku. Falka sameeya mafcuulka qumman waxa la yidhaa ***fal gudbe*** oo falka faacilka ayaa toos ugu gudba mafcuulka.

***Tusaalayaal***

*Cali waa dilaa* ***inanta.***
***Awr*** *baa ay rartay.*





Hawraarta hore, ***dilistu*** waa fal ku dhaca inanta. Waa fal toos ugu gudba inanta. Hawraarta labaad na, falka ***rarku*** waa fal ku dhacaya awr. Mar kaa falka rarka ahi waa mid toos ugu gudba awr.

Falka toos ugu gudba mafcuulka waa ***fal gudbe***. Mafcuul kiisu na waa ***mafcuul qumman***.

### 2. Mafcuulka daban

Mafcuulka dadbani waa mafcuul an falka faacilku si toos ah u taabanaynin amma ugu gudbaynin.

***Tusaalayaal***

***Inanka*** *ayaa aan ka qaaday qalin.*
*Geel baa walaal kay ka bixiyay* ***gabadh.***
***Noo*** *wad gaadhiga.*

Ereyada waaweynaysan ee hawraaraha kore ee ***inanka, gabadh,*** iyo ***noo*** waa mafcuullo dadban. Iyaga toos u ma taabanayaan falalka hawraaraha ee ***qaaday, bixiyay*** iyo ***wad.*** Falalka ah qaadista, bixinta iyo wadiddu waxa ay toos u taabanayaan mafcuullada kale ee ***qalin, geel*** iyo ***gaadhiga.*** Hawraarahaa na waxa loo qori karaa sidan soo socota :

***Qalin ayaa aan qaaday.***
***Geel baa walaal kay bixiyay.***
***Gaadhiga wad.***

### T. *Maxaaa lagu gartaa mafcuulka?*

Mafcuulka saddex mid baa uu noqdaa oo lagu gartaa :

1. magac amma magacuyaal madaxbannaan oo shaqalka ***"a",*** ku dhammaada,
2. magac gaar ah, amma
3. magacuyaal qofeed.

## 1. Magaca amma magacuyaalka qodoblaha ah.

Magaca amma magacuyaalka mafcuulka ah waxa u danbeeya **"a"** haddii magacu qodob leh yahay.

***Tusaalayaal***

***Inanka*** *ayaa aan u dhigaa cashar maalin kasta.*
*Cali baa dilay* ***maska.***
***Isaga*** *ayaa la dilaa.*
*Ha dilin* ***kayga.***

Ereyada waaweynaysan ee hawraaraha kore ee ***inanka, maska, isaga*** iyo ***kayga*** waa magacyo iyo magacuyaallo. ***Inanka*** iyo ***maska*** waa magacyo. ***Isaga*** iyo ***kayga*** na waa magacuyaallo.

Ereyada ***inanka, maska, isaga*** iyo ***kayga*** waxa u wada danbeeya **"a"**. Taas oo ku tusaysa in ay yihiin mafcuullo.

## 2. Magac qodoblaawe ah ayaa noqon kara mafcuul

Magac qodoblaawe ah ayaa noqon kara mafcuul. Mar kan magacu ma leha wax calaamad ah oo lagu soo sooci karo.

***Tusaalayaal***

**Cali** baa aan dilaa.
***Inan*** *baa uu dilaa.*

Ereyada hawraaraha kore ee ***Cali*** iyo ***Inan*** waa mafcuullo, waa na magacyo. ***Cali*** waa magac gaar ah, ***inan*** na waa magac guud. Wax calaamado ah oo ay leh yihiin na ma jiraan. Mar kaa hawraarta in teeda kale ee hadhsan waa in laga gartaa mafcuulka.

## 3. Magacuyaal qofeed ayaa noqon kara mafcuul

Magacuyaal qofeed ayaa as na noqda mafcuul. Magacuyaal qofeedka mafcuulka ahi na saddex jaad baa uu u sii ka la baxaa oo ka la ah sidan :





b. Magacuyaal qofeed mafcuuleed
t. Magacuyaal tilmaameed iyo
j. Magacuyaal nisbeed

## b. Magacuyaal qofeed mafcuuleed

Magacuyaal qofeed mafcuuleedku waa magacuyaal qofeed mar kasta ah mafcuul. Waa magacuyaal an mafcuul ma aha ee wax kale ba noqon karin. Hadda ba magacuyaal mafcuuleedku waa:

1. mid qumman iyo
2. mid dadban.

## 1. Magacuyaal mafcuuleedka qumman

Magacuyaal mafcuuleedka qummani waa magacuyaal ah mafcuuleed qumman oo falka faacilku toos u taabanayo amma ugu gudbayo.

Magacuyaal mafcuuleedka qummani labo ayaa uu u sii ka la baxaa:

I. Magacuyaal mafcuuleed kaleed iyo
II. Magacuyaal mafcuuleed iseed

### I. Magacuyaal mafcuuleed kaleed

Magacuyaal mafcuuleed kaleedku waa magacuyaal mafcuuleed, fal kiisa qof an ka mafcuulka ahayni yeelay amma falay.

***Tusaalayaal***

*Waa uu* ***i*** *dilay.*
*Cali baa* ***idin*** *maagay.*
*Lacag baa ay* ***na*** *siisay.*

Mafcuullada hawraaraha kore waa ereyada waaweynaysan ee ***i, idin*** iyo ***na***. Ereyadaas oo wada ah hadda na magacuyaallo. Falka ***dilku***, qofka kowaad oo fardi ah baa uu ku dhacay. Falka ***maagistu***, qofka labaad oo wadar ah ayaa uu ku dhacay, halka falka ***siintu*** ku dhacay qofka kowaad oo wadar ah. Mar kaa ***i, idin*** iyo ***na*** waa magacuyaallo mafcuuleedyo.

Magacuyaallo mafcuuleed kaleedyada qummani waa kuwan soo

socda:

| Qofka | Magacuyaal mafcuuleedka |
|---|---|
| *Fardi* | |
| ***1aad*** | ***i*** |
| ***2aad*** | ***ku*** |
| ***3aad*** | -- |
| *Wadar* | |
| ***1aad*** | ***na*** |
| ***2aad*** | ***idin (idin)*** |
| ***3aad*** | -- |

## II. Magacuyaal iseed

Magacuyaal mafcuuleed iseedku waa magacuyaal mafcuuleed uu fal kiisa qof kii faacilku falay. Faacilka iyo mafcuulku waa is ku qof. Magacuyaal iseedku na wax an mafcuul ahayn ma noqdo.

***Tusaalayaal***

*Waa aan **is** qaniinaa.*

*Waa aad **is** qaniintaa.*

*Waa uu **is** qaniinaa.*
*Waa ay **is** qaniintaa.*
*Waa aannu **is** qaniinnaa..*
*Waa aydun **is** qaniintaan.*
*Waa ay **is** qaniinaan.*

Ereyada waaweynaysan ee ***"is"*** ee hawraaraha kore waa mafcuullo. Faacil **kas taa**, **isaga** ayaa is ku sameeyay falka. Isaga ayaa faacil iyo mafcuul ba ah. Sidaa na waxa u gu wacan ereyga ***"is"*** oo ah magacuyaal iseed mafcuul ah.





## 2. Magacuyaal mafcuuleedka dadban

Magacuyaal mafcuuleedka dadbani waa magacuyaal ah mafcuuleed, an se falka faacilku si toos ah u taabanaynin amma ugu gudbaynin.

***Tusaalayaal***

*Lacag **ii** soo dir.*
*Cashar baa la **idiin** dhigaa maalin kasta.*
*War baa uu **noo** sheegay.*

Hawraaraha kore, ereyada waaweynaysan ee ***ii, idiin*** iyo ***noo*** waa magacuyaallo qofeedyo ka la ah sida ay u ka la horreeyaan: qofka kowaad oo fardi ah, ka labaad oo wadar ah iyo qofka kowaad oo wadar ah.

Waxa kale oo ereyadaasi, hawraarahan ka yihiin mafcuullo dadban maxaa yeelay, iyaga, si dadban baa falalka dirista, dhigista casharka iyo sheegista warku ugu dhacayaan. Toos ugu ma gudbayaan.

Mar kaa ereyada ***ii, idiin*** iyo ***noo*** waa magacuyaallo qofeedyo ah mafcuullo dadban. Magacuyaallo mafcuuleedyada dadbani waa kuwan soo socda:

| Qofka | Magacuyaal mafcuuleedka |
|---|---|
| *Fardi* | |
| ***1aad*** | ***ii*** |
| ***2aad*** | ***kuu*** |
| ***3aad*** | ***u*** |
| *Wadar* | |
| ***1aad*** | ***noo*** |
| ***2aad*** | ***idiin*** |
| ***3aad*** | ***u*** |

Magacuyaal mafcuuleedka dadban waxa ku dhafan amma ku jira meeleeye dahsoon. Taas baa baadisooc u noqonaysa.

## t. Magacuyaal qofeed tilmaameed

Magacuyaal tilmaameed ayaa as na noqon kara mafcuul.

***Tusaalayaal***

***Kan*** *baa aan qaadan hayaa.*
***Kaas*** *baa inanku dilaa goor kasta.*
*Ilaali* ***kuwan****.*

Hawraaraha kore ereyada waaweynaysan ee **kan**, **kaas** iyo **kuwan** waa magacuyaallo tilmaameedyo. Hawraarahan na waxa ay ka yihiin mafcuullo. Sidaas awgeed, magacuyaal tilmaameedku waa noqon karaa mafcuul.

## j. Magacuyaal qofeed nisbeed

Magacuyaal qofeed nisbeed ayaa as na noqon kara mafcuul sida :

***Tusaalayaal***

***Kii*** *baa aan dilay.*
***Tii*** *waa la guursaday.*

Ereyada waaweynaysan ee ***kii*** iyo ***tii*** waa magacuyaallo qofeedyo ah nisbeed. Hawraarahan na mafcuullo ayaa ay ka yihiin.

Mar kaa magacuyaal qofeed nisbeedku waa noqdaa mafcuul.

## J. Falka mafcuullaawaha ah

Falka an qaadanin mafcuul baa la yidhaa mafcuullaawe. Falalka





mafcuullaawaha ahi na waa labo jaad:

1. fal magudbe iyo

2. fal xaal

## 1. Fal magudbe

Falalka qaar baa an qaadanin mafcuul oo ah mafcuullaawe. Falka jaad kan ahi waa fal ah magudbe. Fal kiisu ma gudbo oo cid uu taabanayaa amma ku dhacayaa ma jirto. Waxaa na loo yaqaanno fal **magudbe**.

***Tusaalayaal***

*Cali waa* ***qoslaa****.*
*Wiil baa* ***dhashay*** *xalay.*
*Arday baa* ***taga*** *magaalada.*

Hawraarahan kore ereyada waaweynaysan ee ***qoslaa, dhashay*** iyo ***taga*** waa falal. Hawraaruhu se ma leha mafcuullo. Waxa sidaa wacay, falalka ***qosol, dhal*** iyo ***tag*** baa an ahayn kuwo yeesha mafcuullo.

Falalka ***qosol, dhal*** iyo ***tag*** baa an ahayn kuwo falal koodu gudbaan. Mar kaa waa **magudbayaal** amma **falmagudbe**.

## 2. Fal xaalka ahaw

Fal xaalka ***"ahaw"***, as na ma qaato amma yeesho mafcuul.

***Tusaalayaal***

*Cali waa dheer* ***yahay****.*
*Wiilka ayaa nacas* ***ahaa****.*

Hawraarahan, ereyada waaweynaysan ee ***yahay*** iyo ***ahaa*** waa falal

ah xaal. Sida aad u arkaysid na hawraaruhu ma leha mafcuullo. Mar kaa fal xaalku ma yeesho mafcuul.





## Fasalka Lix iyo Tobnaad

## Kaabe magaceed

### Kaabe magaceed

Kaabe magaceedku waa magac amma koox magaceed kaamil ka dhiga amma ebya macnaha magaca amma koox magaceed kale.

***Tusaalayaal***

*Gaadhigii* ***xammuulka*** *ayaa soo galay.*
*Adeer kay waa wastaadka* ***tuulada****.*
*Wiil baa jarjara ubaxa* ***beerta****.*

Hawraarahan, ereyada hoos ka xarriiqan, ee ***xammuulka, tuulada*** iyo ***beerta*** waa magacyo ebyeya macnaha magacyada ay wax ka sheegayaan ee ***gaadhigii, wastaadka*** iyo ***ubaxa***.

Ereyga ***xammuulka*** waa magac kaabaya ***gaadhigii*** oo inoo sheegayaa in gaadhigu yahay, ku qaada badeecadda. Sidaas baa na uu mar kaa u ebyeyaa gaadhiga. Magaca kale ee ***tuulada*** na waxa uu kaabayaa magaca ***wastaadka*** oo inoo sheegaya meesha adeerku ka yahay wastaad. Ereyga ***beerta*** na waa magac kaabaya magaca ***ubaxa***. Waxa uu sheegaya in ubaxu yahay ka beerta ee an uu ahayn mid kale.

***Hadda ba maxaa noqon kara kaabe magaceed?***

Waxa noqon kara kaabe magaceed :

b. magac kale,
t. koox magaceed iyo
j. fal.

**Magac keli ah ayaa noqon kara kaabe magaceed.**

***Tusaalayaal***

*Ha jajabinin qalinka* ***baraha****.*
*Reerka* ***dariska*** *ayaa ay is ku boodeen.*
*Gaadhiga* ***kuddaafadda*** *ayaa hal kan mara aroorta hore.*

Ereyada hoos ka xarriqan ee ***baraha, dariska*** iyo ***kuddaafadda*** waa magacyo ah kaabayaal; mid wali ba na waa hal erey.

**t. Koox magaceed baa noqon karta kaabe magaceed**

Koox magaceed baa noqon karta kaabe magaceed oo kaabi karta magac kale.

***Tusaalayaal***

*Aqalka, **magaalada u xiga bari**, baa aan ku degey.*
*Daaqad **loox ah** baa tuuggu uga soo dhacay aqalka.*

Ereyada hoos ka xariiqan ee ***magaalada u xiga bari*** waa koox magaceed kaabaysa magaca hawraarta u horreeya ee ***aqalka***. Waxa ay magaca ku kordhiyeen war qeexaya kobta aqalka lagu degey ku yaallo. Ereyada **loox ah** waa koox kaabaysa magaca ka horreeya ee **daaqad**. Sidaas awgeed, baa koox magaceed u noqon kartaa kaabe magaceed.

**j. Fal baa as na noqon kara kaabe magaceed**

Fal baa as na noqon kara kaabe magaceed oo kaabi kara magac.

***Tusaalayaal***

*Awr **luntay** baa la soo sheegay.*
*Nin kii **seexday** baa sacii dhalay dibi.*

Ereyada hoos ka xarriiqan ee ***luntay*** iyo ***seexday*** waa falal. Hadda na waa kaabayaal kaabaya oo wax ka sheegaya magacyada ka horreeya ee ***awr*** iyo ***nin kii***. Mar kaa waa kaabe magaceedyo.

***Maxaa lagu gartaa kaabe magaceedka ?***

Waxa lagu gartaa kaabe magaceedka waxyaalahan soo socda :

1. kaabe magaceedka waa laga jari karaa hawraarta,
2. kaabe magaceedku waa uu ka danbeeyaa magaca uu kaabayo,
3. Ma waafaqo kaabe magaceedku tirada magaca uu kaabayo sida sifada.





**1. Kaabe magaceedka waa la jari karaa**

Hawraartu wax ba u ma noqoto haddii laga jaro kaabe magaceedka. War kii waa ka yaraanayaa in tii uu ahaa, wax kale se ma dhacayaan.

***Tusaalayaal***

*Si wacan baa ubaxa **beer taydu** u baxaa dayr tii.*
*Si wacan baa ubaxu u baxaa dayr tii.*

Ereyada hawraarta hore ee hoos xarriiqani waa ***kaabe magaceed***. Magaca ay kaabayaan na waa ***ubaxa***. Hawraarta xigta, kaabihii magaca waa laga jaray. Hadda na hawraar tii weli macne la garto waa qabtaa. Wax ba u ma noqonin kaabihii laga jaray. Kaabe magaceedka marka la doono waa la is ka dhaafi karaa oo hawraartu wax ba u ma noqoto. Warka ayaa uun ka yaraada in tiisii hore.

**2.Kaabe magaceedku waa ka danbeeyaa magaca uu kaabayo**

Kaabe magaceedku waa ka danbeeyaa magaca uu kaabayo. Si na ba uga ma horrayn karo.

***Tusaaleh***

*Qadada **wiilka** ayaa ay cuntaa.*

Kaabe magaceedka hawraartu waa ereyga hoos xarriiqan ee ***wiilka***. Magaca la kaabayaa na waa ka kaabaha ka horreeya oo ah ***qadada***. Mar kasta waa in kaabaha magacu ka danbeeyo magaca uu kaabayo.

**3.kaabe magaceedku ma waafaqo magaca uu kaabayo sida sifada.**

Kaabe magaceedku ma waafaqo magaca uu kaabayo sida sifada . Tirada kaabuhu is la ma bedbedesho tirada magaca la kaabayo.

***Tusaalayaal***

*Wiilka **jaarka** ayaa noo dhiga cashar habeen kii.*
*Wiilasha **jaarka** ayaa noo dhiga casharro habeen kii.*

Kaabayaasha hawraaraha kore waa ereyada hoos ka xarriiqan. Magaca hawraarta hore ee la kaabayaa waa magac fardi ah. Tiro hal ah ayaa uu leh yahay. Kaabaha magaca ee hawraarta labaad is ma beddelin in kasta oo tirada magaca uu kaabayaa ka badan tahay hal oo tahay wadar.

**Run tii, tani waa astaan ka la saarta kaabe magaceedka iyo sifada. Maxaa yeelay, sifadu waa ay is la bedbedshaa tirada magaca ay sifaynayso, halka kaabuhu an uu is la bedbeddelin.**

**4. Xidhiidhinta kaabayaasha magaca.**

Hawraar keli ah ayaa yeelan karta kaabe magaceedyo labo iyo saddex ba ah. Waa se in ay xidhiidhsanaadaan.

***Tusaaleh***

*Gaadhiga **kuddaafadda** ee **dawladda hoose** ee **Burco**.*

Kaabayaal (kaabe magaceedyo) saddex ah ayaa ku jira hawraarta kore oo ka la ah: ***kuddaafadda***, ***dawladda hoose*** iyo ***Burco***. Saddexda waxa is ku xidha xidhiidhiyaha ***"ee"***.

Mar kaa waa ku jiri karaan labo iyo saddex kaabe magaceedyo hawraar. Waa se in xidhiidhiye is ku wada xidhayo.





**Fasalka Toddobo iyo Tobnaad**

**Xidhiidhiye**

**Xidhiidhiye**

***Waa maxay xidhiidhiye?***

Xidhiidhiye waa erey is ku xidhiidhiya hadal ka kooban ereyo amma hawraaro.

Ereyada la is ku xidhiidhinayaa, waxa ay noqon karaan magacyo amma magacuyaallo, sifooyin iyo falal.

Waxa xidhiidhiyayaashu xidhiidhin karaan :

B. Waxyaalo hawraar gudaheed ku jira.
T. Labo hawraarood.

**B. Hawraar gudaheed**

Ereyada hawraarta gudaheeda xidhiidhiyaa waa ereyadan:

***Amma, iyo, na, ba, se, mise, oo*** iyo ***ee.***

Ereyadaas baa hadda ba u ka la baxa:

1. Kuwo is ku xidhiidhiya labo magac amma labo fal iyo
2. Kuwo is ku xidhiidhiya labo sifo amma labo fal.

**1.Xidhiidhiyayaasha is ku xidhiidhiya labo magac amma labo fal :**

Bal eeg hawraaraha hoose ee labalabada ah:

***Tusaalayaal***

*Cali **amma** Faarax baa taga dugsiga.*
*Tag **amma** joog.*

*Roobleh waa nin caqli bada, Axmed **na** ma aha.*
*Ma hurdo wiilku, ma **na** soo jeedo.*

*Cige iyo Wiilo **ba** waa raacaan xoolaha.*
*U hoyo daa oo bal aan tago **ba**!*

*Axmed ma joogo, Cali **se** waa joogaa.*
*Waa uu tagay, waa **se** uu soo noqday mar kii ba.*

*Ma Axmed baa aad rabtaa **mise** Cali?*
*Faatumo ma joogtaa **mise** waa maqan tahay?*

*Aamina **iyo** Sahra waa walaalo.*
*Ma aan ogi in uu tagay **iyo** in uu joogo.*

Waa hawraaro leh xidhiidhiyayaasha: ***amma, iyo, na, ba, se*** iyo ***mise***. Xidhiidhiyeyaashu waxa ay xidhiidhinayaan **Labo magac** amma **labo fal**.

Labolabada hawraarood, kuwa hore (1, 3, 5, 7, 9, 11), magacyo ayaa ay xidhiidhinayaan. Kuwo danbe na (2, 4, 6, 8, 10, 12) falal.

**2.Xidhiidhiyayaasha is ku xidhiidhinaya labo sifo amma labo fal.**

Xidhiidhiyayaasha hawraaraha hoose waa ereyada: ***"oo"*** iyo ***"ee"***. Kuwaas oo is ku xidhaya **labo sifo** sida hawraaraha kowaad iyo seddexaad amma **labo fal** sida hawraaraha labaad iyo afaraad.

*Nin cad **oo** shilis baa yimid.*
*Isaga **oo** hurda **oo** khuurinaya ayaa aan u galay.*

*Wiilka buuran **ee** cad baa u gaabiya innamada.*
*Cali ma joogin **ee** waa maqnaa ogaal kay.*

## T. Xidhiidhiyayaasha is ku xidha labo hawraarood

Xidhiidhiyayaasha is ku xidha labo hawraarood waa kuwan soo socda :





***Tusaalayaal***

*Ma aan tago Kismaayo **waayo** cid baa an aan ka aqoonin.*
*Ma ay jecla Muuse **maxaa yeelay** waa nin xun.*

*Qafalxumo **darteed** baa uu afka la buuraa.*
*Gobonimada **awgeed** baa dad badani u dhinteen.*

Xidhiidhiyayaasha kore waa ereyada ***waayo, maxaa yeelay, darteed*** iyo ***awgeed***. Xidhiidhiyayaashu waa kuwo is ku xidhaya labo hawraarood amma hawraar iyo koox ereyo ah.

Hawraaraha ay is ku xidhaan, waayo iyo maxa yeelay, waa kuwan :

***Ma aan tago Kismaayo . Cid baa an aan ka aqoonin.***
***Ma ay jecla Muuse. Waa nin xun.***

Xidhiidhiyayaasha labada hawraarood ee danbe se waa **darteed** iyo **awgeed**. Kooxaha ereyada ah iyo hawraaraha ay xidhiidhinayaan na waa sidan :

***Qafalxumo. Afka ayaa uu la buurayaa.***
***Gobonimo. Dad badan baa u dhintay.***

Fasalka Siddeed iyo Tobnaad

Fal

Fal

Falku waa erey ku jira hawraarta oo sheega hawsha faacilka hawraartu qabanayo. Qaab lagu garto na waa leh yahay.

# 1. Qaabka Falka

Qaabka falku waa samayska falka asal ahaan oo lagu daray kuddarro sida qofka, amminta, sarfiga iyo nafyinimada.

1. Samayska Falka.
2. Qofka Falka.
3. Amminta Falka.
4. Saha Falka
4. Sarfiga Falka.
5. Nafyinimada Falka.

**1. Samayska Falka**

Falku waxa uu ka kooban yahay amma ka samaysan yahay labo qaybood :

B. Gummud iyo
T. Kuddar.

**B. Gummudka**

Gummudku waa inta u yar ee falku dhigaal ahaan noqon karo isaga oo macnihiisii weli qaba oo an luminin.

Waxa kale oo la odhan karaa waa inta soo hadha marka wax kasta oo falka ka go'i kara laga gooyo. Gummudku waa asalka falka ee macnaha falka xambaarsan.

***Tusaalayal***

*Waddadan baa ay u **maraan** dugsiga.*





*Qayd baa uu **martaa**.*
*Xinne ayaa uu gadhka **marsadaa**.*

Falalka hawraaruhu waa ereyada waaweynaysan ee : ***maraan***, ***martaa*** iyo ***marsadaa***.

Marka la yareeyo falal kaa oo mid wal ba laga jaro wixii ka go'i kara, waxa soo hadhaya oo an hoos loo sii dhaafi karin: ***Mar***, ***maro*** iyo ***marso***.

Ereyadaas oo ah gummudyada falalk tusaalayaasha, sida ay u ka la horreeyan. Gummudku waa asal kii falku ka soo jeeday.

**T. Kuddarka**

Kuddarku waa wax an falka marka hore ka mid ahayn oo hore amma gadaal lagaga daray, waxaas oo u jooga : **qof** (1aad, 2aad iyo 3aad oo fardi iyo wadar ba leh), ***ammin***, ***sii-ammin*** iyo ***sah***.

***Tusaalayaal:***

*Cad baa ay cun**taa**.*
*Dugsiga ayaa aydun tag**taan**.*

Falalka hawraaruhu waa ereyada ***cuntaa*** iyo ***tagtaan***. Aan u eegno labada fal, mid wal ba gaar kii.

Falka kowaad ee, ***cuntaa*** = ***cun*** + ***taa***.
***Cun*** waa gummud, ***taa*** waa kuddar.

Falka labaad ee, ***cuntaan*** = ***cun*** + ***taan***.
***Cun*** waa gummud, ***taan*** waa kuddar.

Mar kaa, sida aynun soo aragnay, falku waa labo qaybood. ***Gummud*** oo ah qaybta hore iyo ***Kuddar*** oo ah qaybta danbe. ***Gummudku***, macnaha falka ayaa uu xambaarsan yahay. Meel ka sii yar oo loo sii dhaafaa ma jirto. ***Kuddarku*** se waa wax lagu daray oo u haya amma u muujiya falka: qofka, jinsiga iyo tirada, amminta iyo waxyaalo kale oo fasallada soo socda aynnu ku arki doonno.

# 2. Qofka falka

Falka Soomaaliga ahi waxa uu leh yahay summado ku yaal, ka muuqda oo u gaar ah :

b. Qofka,
t. Jinsiga iyo
j. Tirada.

**b. Qofka**

**I. Qofafka**

Qofku waa xubin ka mid ah kuddarka falka oo faacilku ku dhigo falka. Qof wali ba summad baa uu leh yahay oo lagu soo soocaa. Inta an aynnu u gelin qofka falka, aan is tusno waxa qofku marka hore yahay.

Sidooda ba qofafku tiro ahaan waa saddex. Saddexda qof baa hadda ba labo mid ah:

- fardi,
- wadar amma jamac.

Waa na kuwan soo socda :

**Saddexda qof ee fardiga ah.**

| | |
|---|---|
| *Qofka 1aad amma hadlaha,* | *(aniga)* |
| *Qofka 2aad amma lalhadlaha,* | *(adiga)* |
| *Qofka 3aad amma maqanaha,* | *(isaga amma iyada)* |

**Saddexda qof ee wadarta ah.**

| | |
|---|---|
| *Qofka 1aad amma hadlaha,* | *(Annaga amma innaga)* |
| *Qofka labaad amma lalahadlaha,* | *(Idinka)* |
| *Qofka seddexaad amma maqanaha,* | *(Iyaga)* |

Qofka 1aad waa qofka hadlaya. Qofka 2aad, waa ka la la hadlayo. Qofka saddexaad na waa ka laga hadlayo amma **maqane**.

***Falku ma muujiyaa qofka faacilka ah ee falay falka?***

Haa. Falku waa muujiyaa qofka. Kuddarka ayaa uu ku muujiyaa.





*Tusaalayaal*

*Waa **aad** tag**t**aa dugsiga.*
*Waa **ay** tag**t**aa dugsiga.*
***Annaga** ayaa tag**n**a dugsiga.*

Faacillada hawraaruhu waa ereyada waaweynaysan ee ***aad, ay,*** iyo ***annaga*** Kuwaas oo ka la ah sidan:

- ***qofka labaad oo ah fardi,***
- ***qofka saddexaad oo dheddig iyo***
- ***qofka kowaad oo wadar ah.***

Falalka hawraaruhu waa ereyada ***tagtaa, tagtaa*** iyo ***tagna.***

***Hadda ba ma ka muuqdaan qofafka aynnu kor ku soo sheegnay falal kan?***

Haa, oo faacil wal ba iyo qofka fal kiisu waa is ku bannaan yihiin; waa la is ku soo soocayaa oo waa is waafaqsan yihiin.

Falka hawraarta kowaad waa ereyga *tagtaa*, faacilka falku waa ereyga ***aad***. Summadda qofka ee falku waa shibbanaha ***"t"*** ee weynaysan oo sheegaya in faacilka falku yahay **qofka labaad**, lalahadlaha amma ***aad.***

Falka hawraarta labaad waa ereyga *tagtaa*. Faacilka falku waa ereyga ***ay***. Summadda qofka ee falku waa shibbanaha ***"t"*** ee weynaysan oo sheegaya in faacilka falku yahay qofka seddexaad oo dheddig amma ***ay***. Mar kaa waa is waafaqsan yihiin qofka falka iyo faacilku.

Falka hawraarta saddexaad waa ereyga *tagna*. Faacilka falku waa ereyga ***annaga***. Sumadda qofka falku na waa shibbanaha ***"n"*** ee weynaysan oo tusaya in faacilka falku yahay qofka **kowaad oo wadar** ah amma ***annaga***. Mar kaa waa is leh yihiin faacilka iyo qofka falku.

**Mar kaa sida aynnu ku soo aragnay tusaalayaasha, qofka oo ah xubin ka mid ah kuddarka falka, waxa uu u joogaa faacilka falka.**

**II. *Xaggee qofku ka galaa falka?***

Waxa aynnu soo sheegnay in falku leh yahay qof. Qof kaa na uu weli ba muujiyo. Xaggee baa hadda ba falku ku muujiyaa qofka amma qofku ka galaa falka?

Af Soomaaliga, qofku labo meelood baa uu ka galaa falka oo ah xagga hore iyo xagga danbe. Falka qofku xagga hore ka galo waa fal ah **horgelis**. Ka uu xagga danbe ka galo waa fal ah **dabagelis**.

### b. Fal horgeliska

Fal horgelisyadu waa falal aad u tiro yar oo qofka xagga hore ku qaata, waa na kuwan soo socda:

***imaw*, *aqoon*, *aal*** iyo ***dheh***.

**Hawraar faleedda**

***Tusaalayaal***

*Waa aan imaaddaa.*
*Waa aad **t**imaaddaa.*
*Waa uu **y**imaaddaa.* *Waa ay **t**imaaddaa.*

*Waa aannu **n**imaadnaa.*
*Waa aydun **t**imaaddaan.*
*Waa ay **y**imaaddaan.*

Falalka hawraaraha kore oo ah hawraaro faleedyo waa ereyada : ***imaaddaa*, *timaaddaa*, *yimaaddaa*, *timaaddaa*** iyo ***nimaadnaa*, *timaaddaan*** iyo ***yimaaddaan***.

Xarfaha u horreeya hawraaraha ayaa u jooga qofafka, waa na sidan :

| | |
|---|---|
| **,** | qofka 1aad oo fardi ah (aan), |
| ***t*,** | qofka 2aad oo fardi ah (aad), |
| ***y*,** | qofka 3aad oo fardi iyo lab ah (uu), |
| ***t*,** | qofka 3aad oo fardi iyo dheddig ah (ay). |
| ***n*,** | qofka 1aad oo wadar ah (aannu), |





| | |
|---|---|
| ***t*,** | qofka 2aad oo wadar ah (aydun), |
| ***y*,** | qofka 3aad oo wadar ah (ay). |

**Hawraar Magaceedda**

***Tusaalayaal***

*Aniga ayaa imaadda.*
*Adiga ayaa **y**imaadda.*
*Isaga ayaa **y**imaadda.* *Iyada ayaa **t**imaadda.*

*Annaga ayaa **n**imaadna.*
*Idinka ayaa **y**imaaadda.*
*Iyaga ayaa **y**imaadda.*

Falalka hawraarahan danbe oo ah hawraaro magaceedyo waa ereyada:

***imaadda*, *yimaadda*, *yimaadda*, *timaadda*** iyo ***nimaadna*, *yimaadda*, *yimaadda***.

Qofaf kii falalka waxa u jooga xarfaha u horreeya falalka, waa na sidan :

| | |
|---|---|
| **—,** | qofka 1aad oo fardi ah (aniga). |
| ***y*,** | qofka 2aad oo fardi ah (adiga). |
| ***y*,** | qofka saddexaad ee lab oo fardi ah (isaga). |
| ***t*,** | qofka saddexaad ee dheddig oo ah (iyada). |
| ***n*,** | qofka 1aad oo wadar ah (annaga). |
| ***y*,** | qofka 2aad oo wadar ah (idinka). |
| ***y*,** | qofka 3aad oo wadar ah (iyaga). |

Sidaa aad ku arkaysid falal kan xarfaha summadda u ah qofka, xagga hore ayaa ay kaga jiraan falalka. Fal kasta oo xagga hore qofku ka galo waa fal ah **horgelis**.

**Fiiro gaar ah**

Falalka horgeliska ah ee hawraar faleedda iyo hawraar magaceeddu, waxa ay ku ka la duwan yihiin qofka labaad. Hawraar faleedda,

xarafka "*t*" ayaa u jooga qofka labaad (fardi iyo wadar ba). Halka hawraar magaceedda xarafka "*y*" u joogo qofka labaad (fardi iyo wadar ba).

### t. Falka dabageliska ah

Falka dabagaliska ahi waa falka, qofku xagga danbe ka galo. Falalku waa wada jaad kan marka laga reebo dhawr kii horgeliska ahaa ee aynnu hore u soo aragnay.

**Hawraar faleedda**

***Tusaalayaal***

*Waa aan tagaa.*
*Waa aad tagtaa.*
*Waa uu tagaa.*
*Waa ay tagtaa.*

*Waa aannu tagnaa.*
*Waa aydun tagtaan.*
*Waa ay tagaan.*

Falalka hawraaraha kore oo ah hawraaro faleedyo waa ereyada: *tagaa, tagtaa, tagaa, tagtaa, tagnaa, tagtaan, tagaan.*

Qofafka falalku waa xarfaha xagga danbe kaga jira falalka ee waaweynaysan. Waa na sidan hoos ku taxan :

—, qofka 1aad oo fardi ah (aniga).
***t***, qofka 2aad oo fardi ah (adiga).
—, qofka saddexaad ee lab oo fardi ah (isaga).
***t***, qofka saddexaad ee dheddig oo ah (iyada).

***n***, qofka 1aad oo wadar ah (annaga).
***t***, qofka 2aad oo wadar ah (idinka).
—, qofka 3aad oo wadar ah (iyaga).

Qofka kowaad ee fardiga ah, saddexaadka lab ee fardiga iyo qofka saddexaad ee wadarta ahi ma leha summado. Qofka labaad ee fardiga ah, qofka saddexaad ee dheddig ee fardiga ah, qofka kowaad





ee wadarta ah iyo qofka labaad ee wadarta ah ayaa leh summado. Shibbanaha "*t*" ayaa u summad ah qofka saddexaad ee dheddig ee fardiga ah iyo qofka labaad, fardi iyo wadar ba. Xagga danbe ayaa na xarfaha "*t*" kaga jiraan falalka oo ku tusaya in ay yihiin falal ah **dabagelisyo**. Qofka kowaad ee wadarta ah na shibbanaha "*n*" ee xagga danbe kaga jira ayaa ku tusaya.

**Hawraar magaceedda**

***Tusaalayaal***

*Aniga ayaa taga.*
*Adiga ayaa taga.*
*Isaga ayaa taga*
*Iyada ayaa tag**ta***

*Annaga ayaa tag**na***
*Idinka ayaa taga.*
*Iyaga ayaa taga.*

Falalka hawraarahan danbe oo ah hawraaro magaceedyo waa ereyada: *taga, taga, taga, tag**ta**, tag**na**, taga* iyo *taga.*

Qofafka hawraaraha waxa u jooga xarfaha waaweynaysan ee xagga danbe ka ga jira falalka, waa na sidan:

—,
—,
—,
***t***,
***n***,
—,
—.

Qofafka kowaad, labaad iyo saddexaadka lab ee fardiga ah, wadarta labaadka iyo wadarta saddexaadku ma leha summado. Qofafka, saddexaadka dheddig ee fardiga ah iyo kowaadka wadarta ah ayaa leh summado. Summadda qofka saddexaad ee dheddigi waa xarafka "*t*" ee xagga danbe kaga jira falka *tagta*. Summadda qofka kowaad ee wadarta ahi na waa xarafka "*n*" ee xagga danbe kaga jira falka *tagna*. Sidaas baa mar kaa falalku u yihiin falal dabagelisyo ah.

### Fiiro gaar ah

Falka hawraar magaceedda ee dabageliska ahi, labo qof uun baa uu muujiyaa. Kuwaas oo ah:

**Saddexaadka dheddig ee fardiga ah iyo kowaadka wadarta ah.**

Qofafka kale oo dhan, waxa uu u la dhaqmaa sidii oo ay yihiin qofka saddexaad ee lab ee fardiga ah.

### j. Falka jirjirroolaha ah

Fal keli ah ayaa jira oo mar noqda horgelis, mar na noqda dabagelis.

Fal kaasi na waa falka ***"ahaw"*** ee gargaaraha ah. Isbedbeddal kaa ayaa uu magaca jirjirrooleh ku la baxay.

**Marka amminta falka *"ahaw"* tahay joogto, falku waa horgelis.**

**Hawraar faleedda**

***Tusaalayaal***

*Waa aan ahay.*
*Waa aad tahay.*
*Waa uu yahay.*
*Waa ay tahay.*

*Waa aannu nahay.*
*Waa aydun **tihiin**.*
*Waa ay **yihiin**.*

Falalka hawraarahan kore oo ah hawraaro faleedyo waa ereyada : *ahay, **tahay**, yahay, **tahay**, **nahay**, **tihiin*** iyo ***yihiin***. Xarfaha qofafka u ah summadaha waa kuwa u horreeya falalka ee waaweynaysan. Waxaa na ay yihiin :

| | |
|---|---|
| -,. | qofka 1aad oo fardi ah |
| **t,** | qofka 2aad oo fardi ah. |
| **y,** | qofka 3aad, lab oo fardi ah. |





| | |
|---|---|
| **t,** | qofka 3aad, dheddig oo fardi ah. |
| **n,** | qofka 1aad oo wadar ah. |
| **t,** | qofka labaad oo wadar ah. |
| **y,** | qofka saddexaad oo wadar ah. |

Falka qofku xagga hore ka galaa waa fal ah horgelis. Mar kaa falal kanu waa falal ah horgelis.

**Hawraar magaceedda**

***Tusaalayaal***

*Aniga ayaa **ah**.*
*Adiga ayaa **ah**.*
*Isaga ayaa **ah**.*
*Iyada ayaa **ah**.*

*Annaga ayaa **ah**.*
*Idinka ayaa **ah**.*
*Iyaga ayaa **ah**.*

Falalka hawraaraha danbe oo ah hawraaro magaceedyo waa eryada: ***ah**, **ah**, ah, ah, **ah**, **ah*** iyo *ah*. Falalka oo dhammi wax ba ku ma ka la duwana. Mid na ma leha summad qofeed u gaar ah. Mar haddii an qof ka muuqanin na, wax la odhan karaa ma jiraan. **Horgelis iyo dabagelis mid na ma aha.**

**Marka se amminta falka *"ahaw"* tahay tagto, falaku waa dabagelis.**

**Hawraar faleedda**

***Tusaalayaal***

*Waa aan ahaa.*
*Waa aad ahayd.*
*Waa uu ahaa.*
*Waa ay ahayd.*

*Waa aannu ahay<u>**n**</u>.*
*Waa aydun ahay<u>**d**</u>een.*
*Waa ay ahaa<u>**y**</u>een.*

Falalka hawraaraha kore oo ah hawraaro faleedyo waa ereyada: *ahaa, ahay**d**, ahaa, ahay**d**, ahay**n**, ahay**d**een* iyo *ahaa**y**een*.

Qofafka kowaad iyo saddexaadka labi, ma leha summado qofeedyo. Waxa se leh summado qofafka, labaadka fardiga ah, qofka saddexaad ee dheddig, qofka kowaad ee wadarta ah, qofka labaad ee wadarta ah iyo qofka saddexaad ee wadarta ah. Summaduhu na waa xarfaha waaweynaysan ee xagga danbe ka gala falalka, waa na kuwan :

| | |
|---|---|
| **—**, | qofka kowaad ee fardiga ah. |
| **d**, | qofka labaad ee fardia ah. |
| **—**, | qofka saddexaad ee lab ee fardiga ah. |
| **d**, | qofka saddexaad ee dheddig ee fardiga ah. |
| **n**, | qofka kowaad ee wadarta ah. |
| **d**, | qofka labaad ee wadarta ah. |
| **y**, | qofka saddexaad ee wadarta ah. |

## <u>Hawraar magaceedda</u>

***Tusaalayaal***

*Aniga ayaa ahaa.*
*Adiga ayaa ahaa.*
*Adiga ayaa ahaa.*
*Iyada ayaa ahay<u>**d**</u>.*

*Annaga ayaa ahay<u>**n**</u>.*
*Idinka ayaa ahaa.*
*Iyaga ayaa ahaa.*

Falalka hawraaro magaceedyada danbe waa ereyada: *ahaa, ahaa, ahaa, ahay**d**, ahay**n**, ahaa* iyo *ahaa*.

Qofafka kowaad, labaad iyo saddexaadka lab, labaadka iyo saddexaadka wadarta ahi ma leha summado qofeedyo. Qofka





saddexaad ee dheddig iyo qofka kowaad ee wadarta ah ayaa se leh summado. Summaduhu na waa xarfaha waaweynaysan ee xagga danbe kaga jira falalka. Waa na kuwan soo socda:

| | |
|---|---|
| ***d*,** | qofka saddexaad ee dheddig. |
| ***n*,** | qofka kowaad ee wadarta ah. |

Falalka inta kale waxa ay u dhaqmayaan sidii oo ay yihiin qofka saddexaad ee lab ee fardiga ah. Tan oo ah caado lagu yaqaanno falka hawraar magaceedda.

### Fiiro gaar ah

Falka hawraar magaceedda ee dabagaliska ahi waxa uu muujiyaa labo qof, sidii aynnu hore ugu soo aragnay. Kuwaas oo ah:

- qofka saddexaad ee dhehddig iyo
- qofka kowaad ee wadarta ah.

Xarfaha ***"d"*** iyo ***"n"*** ayaa na u ka la jooga labada qof.

## T. JINSIGA FALKA

Af Soomaaliga, falku waxa uu ku muujiya jinsiga qof keli ah. Qof kaas oo ah qofka saddexaad. Isaga ayaa mar ah lab, mar na ah dheddig.

Hadda ba si uu labadaa u ka la saaro falku, qofka saddexaad ee dheddig waxa uu ku dhigaa xarafka ***"t"***. Summaddaas oo loo yaqaanno ***"t"*** dheddigaanta.

Falka ah horgelis, ***"t"*** dheddigeeddu xagga hore ayaa uu ka dhigaa. Falka ah dabagelis na xagga danbe. Hore ayaa aynnu xeer kan u soo aragnay.

## <u>Hawraar faleedda</u>

***Tusaalayaal***

*Inanku waa tagaa dugsiga.*

*Inantu waa tag<u>t</u>aa dugsiga*

Falalka labada hawraarood ee kore oo ah hawraaro faleedyo waa ereyada *tagaa* iyo *tag**t**aa*. Labada hawraarood ba qofaf koodu waa saddexaad. Maxaa hadda ba ay ku ka la duwan yihiin?

Qofka falka hawraarta hore oo ah ***inanku*** waa lab yahay. Qofka falka hawraarta labaad oo ah ***inanta*** na waa dheddig yahay. Dheddigaan taa na waxa muujiya oo summad u ah xarafka ***"t"*** ee weynaysan ee ku jira falka *tag**t**aa*.

<u>**Hawraar magaceedda**</u>

***Tusaalayaal***

*Cali baa tagay dugsiga.*
*Deeqa ayaa tag<u>t</u>ay dugsiga.*

Falalka hawraaraha danbe oo ah hawraaro magaceedyo waa ereyada *tagay* iyo *tag**t**ay*. Labada faacil amma qof ee hawraaruhu waa ereyada ***Cali*** iyo ***Deeqa***. Cali waa qof lab, Deeqa na waa qof dheddig. In ay sidaas ka la yihiin waa laga garanayaa falalka.

Summadda dheddigaanta ee ***Deeqa*** waa in ay ka muuqataa falka *tag**t**ay*. Waa na ku taal oo waa shibbanaha ***"t"*** ee ku jira falka *tag**t**ay*.

**Fiiro gaar ah**

**Falku waxa uu ku muujiyaa dheddigaanta qofka shibbanaha *"t"*.**

Summaddaas oo loo yaqaanno ***"t"*** dheddigaanta. Fal kas taa na waa muujiyaa jinsiga, haddii falku yahay fal hawraar faleed iyo haddii uu yahay fal hawraar magaceed ba.

Sumadda jinsiga na, qofka seddexaad oo keli ah ayaa laga helayaa oo leh. Meel kale mar na laga ma raadin karo.

Xarfaha ***"d"*** iyo ***"s"*** ayaa ayo na ku dhiga falalka oo beddela ***"t"*** dheddigaanta mararka qaar. Waa meelaha ay xarfaha falalka u danbeeya, iyo ***"t"*** dheddigaantu is qaban waayaan dhawaaq ahaan





sida falalka ***"waydaa"*** iyo ***"haysaa"*** iyo kuwo kale oo badan oo fasalka sarfiga aynnu ku arki doono.

Lehjadaha Soomaaliga, qaar ba xaraf baa ay badanaa qaataan oo lagu sii ka la sooci karaa.

## J. WADARTA FALKA

Tirada qofka falku, mar waa hal keli ah oo waa fardi, mar na waa tiro hal ka badan oo waa wadar.

Hadda ba maxaa lagu ka la gartaa oo u dhexeeya qofka fardiga ah iyo ka wadarta ah?

Qofka wadarta ahi summad baa uu leh yahay oo lagu gartaa oo falka ku taal. Summaddaasi waa xarafka ***"n"*** oo halka u danbaysa ka gala falka.

Fal kasta, hadda ba, wadartu ku ma dhigto. Waxa ay ku dhigtaa falalka labo qof oo keli ah:

**Qofka labaad iyo qofka saddexaad.**

<u>**Hawraar faleedda**</u>

***Tusaalayaal***

*Waa aan tagaa.*
*Waa aad tagtaa.*
*Waa uu tagaa.*
*Waa ay tagtaa.*

*Waa aannu tagnaa.*
*Waa aydun tagtaa<u>n</u>.*
*Waa ay tagaa<u>n</u>.*

Falalka afarta hawraarood ee kore oo ah hawraaro faleedyo waa ereyada: *tagaa*, *tagtaa, tagaa* iyo *tagtaa*. Saddexda qof ee falalku waa ***"aan"*** oo ah qofka kowaad, *aad* oo ah qofka labaad, ***"uu"*** oo ah saddexaadka lab iyo ***"ay"*** oo ah qofka saddexaad ee dheddig.

Tiradoodu mar kan, waa halhal qof. Marka tirada qofku tahay hal na, qofku waa **fardi**.

Falalka saddexda hawraarood ee danbe waa ereyada: *tagnaa, tagtaan* iyo *tagaan*. Saddexda qof ee falalku waa ***"aannu"*** oo ah qofka kowaad, ***"aydun"*** oo ah qofka labaad iyo ***"ay"*** oo ah qofka saddexaad.

Mar kan tirada qofafku waa ka badan tahay halhal. Tirada hal ka badani na waa **wadar** amma **jamac**.

Hadda ba falka, ma laga garanayaa in qofku yahay ***fardi*** iyo in uu ***wadar*** yahay?

Haa. Waa laga garanayaa oo falka hawraar faleedda ***wadarta*** ah, xaggiisa danbe waxa ku dhiga amma ka muuqda xarafka ***"n"***. Kaas oo loo yaqaannono ***"n"*** da ***wadarta*** amma ***jamaca***.

Wadarta labo qof uun baa sameeya. Kuwaas oo ah qofafka labaad iyo saddexaad. Falalka hawraar faleedda ee labadaa qof na waxa xagga u danbaysa kaga dhiga ***"n"*** wadarta.

Qofka kowaad waa leh yahay wadar sida aynnu ku soo aragnay tusaalayaasha. Ma se leha ***"n"*** wadarta. ***"n"*** uu leh yahay waa summad qofeed. ***"n"*** wadartu waa in u danbeeyo falka sida ka ku yaal falalka qofafka labaad iyo saddexaad ee wadarta ah.

**<u>Hawraar magaceedda</u>**

***Tusaalayaal***

*Aniga ayaa taga.*
*Adiga ayaa taga.*
*Isaga ayaa taga.*
*Iyada ayaa tagta.*

*Annaga ayaa tagna.*
*Idinka ayaa taga.*
*Iyaga ayaa taga.*





Falalka afarta hawraarood ee hore oo ah hawraaro magaceedyo waa ereyada: ***taga, taga, taga, tagta***. Qofafka falalku na waa ereyada ***aniga, adiga, isaga*** iyo ***iyada***. Tirada qofafka falalka oo dhammi na waa halhal amma fardi. Falal koodu na waa fardi.

Hawraarahan danbe ee hoose oo ah hawraaro magaceedyo waa ereyada: ***tagna***, ***taga*** iyo ***taga***. Qofafka falalku na waa ereyada ***annaga***, ***idinka*** iyo ***iyaga***. Tirada qofaf kanu waa ka badan tahay halhal mar kan. Waa wadar.

Hadda ba wadarta qofafku ma ka muuqataa falalka?

Maya, ka ma muuqato maxaa yeelay waa hawraaro magaceedyo. Falka hawraar magaceeddu ma xidhiidhiyo faacilka tiro ahaan. Sidaas awgeed na ma leha summad wadareed.

**Fiiro gaar ah**

**Hawraar magaceedda, magacuyaalka ayaa muujiya wadarta.**

Ka soo qaad, ***adi*** waa magacuyaalka qofka labaad oo fardi ah. Wadarta is la magacuyaal kaasi waa ***idin.*** ***"n"*** u danbeeya ***idin,*** mar kaa waa ***"n"*** wadareed.

## 3. Amminta Falka

**<u>Amminta</u>**

Ammintu waa xubin ka mid ah kuddarka falka. Waa summad ku tusta goorta falka la falay. Waxa ay ku tustaa in goorta falka la falay ka horraysay, weli taagan tahay amma ka danbayso mar kan hadalka la hayo.

Ammintu hadda ba waa labo jaad :

I. Ammin qumman iyo
II. Sii-ammin.

**I. Amminta qumman**

Amminta qumman ee falku waa amminta saaran falka muhiimka ah iyo keli ah ee hawraarta oo ah falka hawsha mar kaa la hayo. Si kale haddii loo yidhaahdo, waa is ku fal keli ah hawsha iyo ammintu. Hawraartu na ma ba leha fal kale oo an kaas uun ahayn.

Amminta qummani na waa labo mid :

b. Tagto iyo
j. Joogto.

**b. Tagto (maadi)**

Tagto waa ammin tagtay oo la soo dhaafay oo hawsheedii faraha laga qaaday oo ay dhammaatay mar kan hadalka la hayo. Fal kii leh ammin tagto ahi waa **fal tage** ah oo fal kiisu ammin taa tagtay dhacay.

**Hawraar faleedda**

***Tusaalayaal***

*Cali waa ka dhoofay dalka.*
*Waa aan aaday dugsiga shalay iyo dorraad ba.*
*Hilib kii waa bislaaday.*

Falalka hawraarahan kore oo ah hawraaro faleedyo waa ereyada: ***dhoofay, aaday*** iyo ***bislaaday***. Waa falal dhammaan tood leh **ammin tagtay** oo la soo dhaafay mar kan hadalka la hayo. Sidaa awgeed waa falal **tageyaal** ah.

Falka tage ahi summad baa uu leh yahay. Xarfaha ***"ay"*** ayaa u danbeeya falka hawraar faleedda ee tagaha ah.

**Hawraar magaceedda**

***Tusaalayaal***

*Cali baa u dhoof**ay** gacanka.*
*Aniga ayaa Shalay aad**ay** magaalada.*
*Inan baa goor dhowayd ka kac**ay** kursigan.*





Falalka hawraarahan danbe oo ah hawraaro magaceedyo waa ereyada: ***dhoofay, aaday*** iyo ***kacay.*** Waa falal ah tagayaal, maxaa yeelay xarfaha ***"ay"*** ayaa u danbeeya falalka oo dhan oo u summad ah.

**Falka tagaha ah,** xarfaha ***"ay"*** ayaa u danbeeya, haddii uu yahay fal hawraar faleed ah iyo haddii uu yahay fal hawraar magaceed ba.

**Falka tagaha ah ee gaaban**

Falka tagaha ah ee gaabani, waa fal tage ah oo gaaban. Fal kii iyo faacil kii baa is ku jira. Fal kanu ma aha mid aad loo isticmaalo. Inta badan adabka iyo hadalka ayaa lagu isticmaalaa.

***Tusaalayaal***

| | |
|---|---|
| *Tagay.* | *(anigu tagay)* |
| *Tagtay.* | *(Adigu tagtay)* |
| *Teg.* | *(Cali teg)* |
| *Tagtay.* | *(Deeqa tagtay)* |
| *Tagnay.* | *(annagu tagnay)* |
| *Tagte.* | *(idinku tagte)* |
| *Tage.* | *(ayagu tage)* |

Ereyadan kor ku taxani waa falal dhammaan tood. Waa na falal ***tagayaal*** ah. Afar ka mid ahi waa leh yihiin summaddii falka tagaha ah ee ***"ay"*** oo waa kuwa qofafka kowaad, labaad, iyo saddexaadka dheddig oo wada fardi ah iyo kowaadka wadarta ah.

Seddexda qof ee saddexaadka lab, wadarta qofka labaad iyo wadarta qofka saddexaad ma leha summaddii tagaha.

Waxa la moodaa in la gaabiyay falalka. Sidaas baa loo leh yahay, tage gaaban.

Ma wacna in fal kan qoraal ahaan loo isticmaalo. Adabka waa lagu istcimaalaa, weli ba meelaha qaafiyaddu ku toosi hayso iyo maahmaahaha la soo gaabinayo, sida :

*Ayax **teg** eel na **reeb**.*

*Gorey god **gel**, god diin **gel**.*
*Geelii la **qaad**.*

Ereyada waaweynaysan ee hawraaraha kore ee ***teg***, ***reeb***, ***gel***, ***gel*** iyo ***qaad*** waa falal ah tagayaal gaagaaban.

**t. Joogto (xaadir)**

Joogto waa ammin joogta oo hawsha fal keedu si joogtaysan u socdo mar kan hadalka la hayo. Falka leh ammin joogto ahi waa **fal jooge** ah oo hawshiisa si joogto ah loo qabto oo u socoto mar kan hadalka la hayo.

**Hawraar faleedda**

***Tusaalayaal***

*Wargeys baa aan akhrist**aa** maalin kasta.*
*Waa aan tag**aa** dugsiga.*
*Duleedka reerka ayaa lagu dabdabr**aa** awrta.*

Falalka hawraaraha kore oo ah hawraaro faleedyo waa ereyada: ***akhristaa, tagaa*** iyo ***dabdabraa***.

Sida aad ka arkaysid hawraaraha, waa falal dhammaan tood leh **ammino joogto** ah oo falal koodu joogtaysan yihiin oo si joogto ah loo qabto.

Falka leh ammin joogto ahi na waa **fal jooge** ah. Summad baa falka hawraar faleedda, ee joogaha ahi leh yahay. Xarfaha ***"aa"*** ayaa u danbeeya falka.

**Hawraar magaceedda**

***Tusaalayaal***

*Isaga ayaa akhrist**a** wargeys.*
*Cali baa tag**a** dugsiga.*
*Reerka ayaa ku dabdabr**a** awrta kanbalka.*





Falalka hawraarahan danbe oo ah hawraaro magaceedyo waa ereyada : ***akhrista, taga*** iyo ***dabdabra***. Dhammaan waa falal leh ammino joogto ah oo hawlaha falal kooda loo guto si joogto ah. Falka leh ammin joogto ahi na waa **fal jooge** ah.

Summad baa falka hawraar magaceedda ee joogaha ahi leh yahay. xarafka ***"a"*** ayaa u danbeeya falka.

Summadda falka joogaha ah ee hawraar faleeddu waa : xarfaha ***"aa"*** ayaa u danbeeya falka. Summadda falka hawraar magaceedda ee joogaha ahi na waa: xarafka ***"a"*** ayaa u danbeeya falka.

Mar kaa falka leh labadaa summadood mid ahaani waa fal jooge ah.

**II. Sii-amminta**

Sii-ammintu waa ammin an saarnayn falka muhiimka ah ee hawraarta oo saaran falka kale amma labaad ee hawraarta ee gargaaraha ah, sheegaysana ammin si gaar ah u sii tilmaaman amma qeexan. Sii-ammintu waa ammin gargaaran. Amminta gargaarani waa la summad amminta qumman. Waa se ka duwan tahay. Waa nasaqan tahay oo waxa beddela, had ba gargaaraha ay saaran tahay.

Falalka gargaarayaasha ahi waa badan yihiin sida aynnu ku arki doonno tusaalayaasha.

**Hawraar faleedda**

***Tusaalayaal***

*Waa aan cuni hay**aa**.*
*Waa aan cuni doon**aa**.*
*Waa aan cuni hay**ay**.*
*Waa aan cuni jir**ay**.*
*Waa aan cuni gaadh**ay**.*

Falalka hawraaraha kore waa ereyada: ***cuni hayaa, cuni doonaa, cuni hayay, cuni jiray*** iyo ***cuni gaadhay***. Dhammaan falalku labolabo erey baa ay ka samaysan yihiin. Labadu ba waa falal.

Ka hore waa fal hawleed. Hawshii la hayay baa uu hayaa amma qeexayaa. Waa na falka muhiimka ah ee hawraarta. Falka danbe na

waa fal gargaare ah oo ka hore gargaaraya. Oo maxaa gargaarahu qabanayaa? Kuddar kii falka muhiimka ah ku darmi lehaa ayaa hadda gargaaraha ku darsan amma raacsan. Mar kaa qof kii (qof, jinsi iyo tiro ba) iyo ammin tii ba waxa haya gargaaraha.

Aynnu u soo noqonno hadda ba amminta.

Ma ka la duwan yihiin ammin tii aynnu soo aragnay ee falka muhiimka ah iyo tan falka gargaaruhu? Maxaa ay se ku ka la duwan yihiin?

Xagga summadda, labadu waa is kaga mid. Bal dib u eeg tusaalehyaasha kore. Falalka labada hawraarood ee hore waa: ***cuni hayaa*** iyo ***cuni doonaa***. Labada ba waxa u danbeeya ***"aa"*** oo ah summadda lagu yaqaanno falka hawraar faleedda ee joogaha ah.

In kasta oo sidaasi jirto, hadda na amminta falka ***cuni hayaa*** waa mid ka duwan ammin tii joogtada ahayd ee hore. Fal kan waa mid ammin tiisu weli taagan tahay oo lagu gudo jiro oo an ay weli dhammaanin hawshiisu oo weli faraha lagu hayo mar kan hadalka la hayo. Cunistu waa fal ammin tiisu tahay **joogto dhiman**.

Falka xiga ee ***cuni doonaa*** waxa ka muuqda ***"aa"*** oo ah summad fal jooge ah, haseyeesho ee leh ammin mustaqbal oo mar kaa ah **fal mustaqbal** ah. Falka ***cunista*** waqti an weli la gaadhin baa la qaban doonaa.

Falalka kale ee ***cuni hayay, cuni jiray*** iyo ***cuni gaadhay*** waa falal ay ka muuqato xaggooda danbe ***"ay"*** oo ah summad lagu yaqaanno falka tagaha ah. Hadda na run ahaan tii falalku waxa ay leh yihiin amminahan soo socda: ***tagto dhiman***, ***tagto caado*** iyo ***tagto sigasho*** sida ay u ka la horreeyan.

Murtidu, waxa weeye, sii-ammintu, in kasta oo ay tahay joogto amma tagto oo summaduhu sidaa ugu wacan yihiin, hadd na se waa ammin nasaqan oo ku xidhan garggaaraha. Gargaare wali ba na sii-ammin u gaar ah ayaa uu leh yahay.

Gargaarayaasha sii-ammintu waa: ***hay, doon, kar, rab, gaadh, jir, waa, diid, ahaw*** iyo ***leh***. ***Ahaw*** waa gargaaraha fal xaalka, ***lehaa*** na waa gargaaraha shardiilaha.





**Muqaaranada amminta iyo sii-amminta**

| Amminta | Sii-amminta |
|---|---|
| 1. Fal keli ah leh. | Labo fal leh. |
| 2. Is ku summad | is ku summad. |
| 3.Waa ammin qumman. | Waa ammin nasaqan. |

**Hadda ba aan eegno sida amminaha gargaarani ka la yihiin. Bal si wacan u dhugo shaxdan soo socota ee ku tusasya sida ammin weli ba ugu xidhan tahay gargaaraha.**

| Amminta Falka | Gargaaraha | Sii-amminta |
|---|---|---|
| Joogto | hay | jooge dhiman |
| Joogto | doon, kar, rab | jooge mustaqbal |
| Joogto | gaadh | jooge sigasho |
| Joogto | waa, diid | jooge dayro |
| Joogto | jir | jooge caado |
| Joogto (ahaw) | ahay, ah | jooge xaal |
| Tagto | hay | tage dhiman |
| Tagto | jir | tage caado |
| Tagto | gaadh | tage sigasho |
| Tagto | waa,diid | tage dayro |
| Tagto | lehaa, la'aa | tage shardi |
| Tagto | ahaa | tage xaal |

## 4.Saha

Sahu waa qaab falku u dhigan yahay dowliil ahaan, waa na dhowr kan jaad ee soo socda:-

1. Amar
2. Maxaddane
3. Tusane

4. Falxaal
5. Shardiileh

**1. Amarku**

Amarku waa fal qofeed dir ah oo cid lagu siinayo amar amma la is kaga difaacayo. Waa sarfiyaa.

**Tusaalayaal**

Cab biyaha.
Dhigo cashar.
Fadhiiso.

Falalka hawraaruhu waa : *cab, dhigo, fadhiiso*. Dhammaan waa falal dir amma amar ah. *Fal amarka waxa lagu garanayaa waa fal gummud; taas macnaheeda oo ah waa seeska falku ka unkamo sida aynnu ku arki doonno sarfiga.*

**2. Maxaddane**

Maxaddane waa sah an fal kiisu, waqti ahaan, xaddanayn oo sugnayn goorta falka la falayo amma uu dhacayo. Waa maqofeed, sidaa awgeed ma sarfiyo. Xuruuf baa se ku darsanta fal amarka uu ka soo jeedo.

**Tusaalayaal**

*Waa aannu sii mari Mooyaaleh.*
*Waa ay dhigan cashar.*

Waxa lagu gartaa maxaddanaha, waa falka wax ka sameeya sii-amminaha tusanaha iyo shardiilaha, kuwaas oo uu ka yahay fal hawleed uun sida:-

*Waa aan tegi hayaa*

'*Tegi*' waa fal ah maxaddane; '*hayaa*' na waa sii-ammineeye ah tusane.

**3. Tusane**





Tusanuhu waa sah qofeed iyo doodeed, u dhigan sidii su'aalo iyo jawaabo, is dhaafsanayaan labada qof ee wada hadlayaa oo macquul ah. Waa sah sarfiya.

**Tusaalayaal**

*Waa aan cunaa hilibka.*
*Cashar baa Raxma dhiganaysa.*
*Dikhil baa aan tegi doonaa berri, haddii Eebbe Idmo.*
*Wiil baa raacay odayga.*
*Adhi baa ay raaci jirtay yaraan tii.*

Falalka hawraaruhu waa: *cunaa, dhiganaysaa, tegi doonaa, raacay* iyo *raaci jirtay*. Dhammaan tood waa falal leh ammino sugan oo cad amma tusan. Hawraarahoodu na waa kuwo u dhigan sidii jawaabo laga celinayo su'aalo hore, sida:-

Ma cuntaa hilibka? Iyo hal kee baa aad tegi doontaa berri, haddii Eebbe Idmo? Ta kale, hawraaruhu waa wada macquul. Sababahaas awgood, mar kaa waa tusane. Waxa u summad ah sahan summadda amminta.

**4. Falxaal**

Falxaalku waa sah qofeed, fal kiisu sheegayo uun xaalad amma nisbo uun. Waa sah ku salaysan sifo iyo fal asalka 'ahaw'. Waa na sarfiyaa.

**Tusaalayaal**

| | |
|---|---|
| *Waa aan dheer ahay.* | *Waa aan dheeraa.* |
| *Waa aydun maqan tihiin.* | *Waa aydun maqnaydeen.* |
| *Innamada ayaa gaagaaban.* | *Innamada ayaa gaagaabnaa.* |

Hawraaraha kore, '*dheer ahay, dheeraa, maqan tihiin, maqnaydeen, gaagaaban, gaagaabnaa*' waa sifooyin iyo falal, sida ay u ka la horreeyaan, sheegaya xaalad amma nisbo.

Falxaalka waxa lagu gartaa fal asalka '*ahaw*' ee xaalka ah oo weheliya sifo.

**5. Shardiileh**

Shardiileh waa sah qofeed, oo sidaa awgeed waa sarfiyaa. Waa sah fal kiisu ku xidhan yahay shardi oo an macquul ahayn.

**Tusaalayaal**

*Tag baa aan is leh ahay haddii fasax la helo.*
*Nooli la'aan baa xayirtay ee shalay baa uu tegi lehaa.*

'Is leh ahay' iyo 'tegi lehaa' waa falalka hawraaraha kore, waa na shardiilayaal. Shardiyada hawraaruhu waa 'fasax' iyo 'nooli la'aan'; oo heliddoodu suuragelin lehayd tegidda.

Waxa summad u ah sahan:- ereyga 'leh' oo weheliya falxaalka 'ahaw'.

## 5.Sarfiga falka

Falka ah qofeedka ayaa sarfiya amma leh sarfi. Hadda ba, waa maxay sarfigu?

Sarfigu waa is bedbeddelka falku is la bedbeddelo qof (qof, jinsi, tiro) iyo ammin, kuwaas oo ka dhiga qaab kiisa kol ba si. Guud ahaan na leh qaacidadan:-

**Falgummud+ kuddar (qof (qof, jinsi, tiro) ammin)**

Falalku sarfi ahaan waa labo jaad:-

1. **Sarfiileh caadi ah**
   Falka ah sarfiileh caadi ahi waa ku sarfigiisu leh yahay qaacido cad amma waadix ah oo la raaci karo.
2. **Sarfiileh macaadi ah**
   Falka ah sarfiileh macaadi ahi waa ku sarfigiisu an uu lehayn qaacio sugan oo la raaci karo. Bilcakis, sarfigiisu waa isqaqayirayaa.

1. **Sarfiileha caadiga ahi waa saddexdan jaad mid kood:-**

   **i) Amar**





   **ii) Maxaddane**
   iii) **Tusane**

**i) Sarfiga Amarka**

Amarku waa fal sarfiya, laakiin ku sarfiya hal qof oo keli ah. Kaas oo ah labaad, fardi iyo wadar ba.

**Tusaalayaal**:-

| | |
|---|---|
| *Adigu tag* | *Idinku taga* |
| *Waar soco* | *Waar socda* |
| *Casharka dhigo* | *Casharka dhigta* |

'Tag, soco, dhigo' waa falal amar iyo fardi ah. Waa na fardigan ka ah asalka ee falal oo dhammi ka sii farcamaan, ku dar xattaa wadar tiisa oo.

'Taga, socda, dhigta' waa falal amar iyo wadar ah. Waa asal kii iyo kuddar fal kas taa.

Taga= tag + a; socda= soco + da; dhigo= dhigo + ta.

Mar kaa amarka wadarta ahi waa fardigii amarka oo kuddar raacay.

**ii) Maxaddane**

Maxaddanuhu ma sarfiyo, hadda na waxa uu leh yahay qaacido la garan karo oo ku salaysan amarka sida sarfiilayaasha kale.

Tusaaalayaal:-

| | |
|---|---|
| Qaad | qaadi |
| Cun | cuni |
| Mar | mari |
| Mari | marin |
| Dhigo | dhigan |

Soco socon

Falka maxaddanaha ahi labo qaab oo keli ah baa uu qaataa. Tusaalyaasha kore saddexda hore, kuwooda bidixdu waa falal amar ah oo ku dhammaada shibbanayaal. 'I' ayaa ku darsamay kuwooda midig, kuwaas oo kuddarro ah.

Saddexdda tusaaleh ee hoose waa falal amar ah oo ku dhammaada shaqallo. 'N' ayaa ku darsamay kuwooda midig, kuwaas oo kuddarro ah.

Qaacido ahaan waa sidan:-

Haddii amarku ku dhammaado shibbane waa:-

**Maxaddane= fal amar + i, sida:**

**Mar= mari; qaad= qaadi; sooc=sooci.**

Haddii se amarku ku dhammaado shaqal waa:-

**Maxaddane= fal amar + n, sida:**

**Dhigo= dhigan; mari= marin; wadho= wadhan.**

**iii)Tusane**

Tusanuhu, waa fal qofeed sarfiya. Labo qaybood baa na uu u ka la baxaa:-

a) Tusane Dabagelis: Qayb tan baa falalka badan koodu hoos tagaan iyo
b) Tusane Horgelis: Falal naadir ah oo afar fal ah.

**a) Tusane Dabagelis**

Tusanaha dabageliska ah, kuddarku waa dabagelis dhammaan tii. Sarfiga qayb tan, saddex kooxood baa ku aroorta:-

**<u>Kooxda</u> I**





**<u>Sarfiga Qaybta 1aad ee Kooxda 1aad</u>**

Falalka qayb tani waa falal amar koodu ku dhammaado shibbanayaasha: ***b, r, s, sh, g, f*** iyo ***n***.

Sarfigoodu na waa sidan soo socota:

***Tusaalayaal***

*Fal gummudka qayb tani waa:* ***mar***

**Sarfiga Hawraar Faleedda Qaybta 1aad**

| <u>Qofka</u> | | <u>Amminta</u> | |
|---|---|---|---|
| | | ***<u>Joogto</u>*** | ***<u>tagto</u>*** |
| | 1aad | *maraa* | *maray* |
| Fardi | 2aad | *martaa* | *martay* |
| | 3aad lab | *maraa* | *maray* |
| | 3aad dh. | *martaa* | *martay* |
| | 1aad | *marnaa* | *marnay* |
| Wadar | 2aad | *martaan* | *marteen* |
| | 3aad | *maraan* | *mareen* |

Kooxdan, kuddarka (oo ah inta gummudka dheer) falka joogaha ahi waa : ***aa, taa, aa, taa, naa, taan, aan***.

Waxa u summad ah ***"t"*** qofka labaad, fardi iyo wadar ba iyo saddexaadka dheddig.

Kuddarka falka tagaha ahi na waa : ***ay, tay, ay, tay, nay, teen, een***.

***"t"*** qofafka labaad, fardi iyo wadar, iyo saddexaadka dheddig baa u summad ah.

***Sarfiga hawraar magaceedda qaybta 1aad ee kooxda kowaad***

***waa sidan :***

| **Qofka** | **Amminta** | |
|---|---|---|
| | ***Joogto*** | ***Tagto*** |
| 1aad | *aniga ayaa mara* | *aniga ayaa maray* |
| Fardi 2aad | *adiga ayaa mara* | *adiga ayaa maray* |
| 3aad lab | *isaga ayaa mara* | *isaga ayaa maray* |
| dh. | *iyada ayaa marta* | *iyada ayaa martay* |
| 1aad | *annaga ayaa marna* | *annga ayaa marnay* |
| Wadar 2aad | *idinka ayaa mara* | *idinka ayaa maray* |
| 3aad | *iyaga ayaa mara* | *iyaga ayaa maray* |

Kuddarka falka joogaha ah ee hawraar magaceedda qaybta 1aad waa: ***a, a, a, ta, na, a*** iyo ***a***.

Labo qof ayaa si gaar ah u suntan hawraar magaceedda. Waa qofka saddexaad ee dheddig iyo qofka kowaadka ee wadarta ah, summadahaas oo ka la ah sidan:

"***t***" oo ah summadda qofka saddexaad ee dheddig iyo "***n***" oo ah summadda qofka kowaad ee wadarta ah. Summaddii kooxda ee "***t***" na waa ku taal.

Kuddarka falka tagaha ah ee hawraar magaceedda qaybta 1aad waa: ***ay, ay, ay, tay, nay, ay***, iyo ***ay***.

Labadii qof ee hore ayaa hadda na ka suntan hawraar magaceedda, kuwaas oo ah qofafka, saddexaadka dheddig iyo kowaadka wadarta ah.

Xarfaha "***t***" iyo "***n***" ayaa na, sida ay u ka la horreeyan, u ka la sunta labada. Summaddii kooxda ee "***t***" na waa ku taal.

**Fiiro gaar ah**

Ha u qaadanin in ay is ku summado yihiin falka hawraar faleedda iyo





falka hawraar magaceeddu. Waa ka la jaad sida ku cad tusaalayaasha aynnu soo dhaafnay.

## Sarfiga Qaybta 2aad ee Kooxda 1aad

Falalka qayb tan labaad waa falal amar koodu ku dhammaado shibbanayaasha : ***x, d, c, q, w, h*** iyo ***y***.

Sarfigoodu na waa sidan:

Fal gummudka qayb tan labaad waa : ***raac***

***Sarfiga hawraar faleedda qaybta 2aad waa sidan soo socota :***

| **Qofka** | **Amminta** | |
|---|---|---|
| | ***Joogto*** | ***tagto*** |
| 1aad | *raacaa* | *raacay* |
| Fardi 2aad | *raacdaa* | *raacday* |
| 3aad lab | *raacaa* | *raacay* |
| dh. | *raacdaa* | *raacday* |
| 1aad | *raacnaa* | *raacnay* |
| Wadar 2aad | *raacdaan* | *raacdeen* |
| 3aad | *raacaan* | *raaceen* |

Kuddarka falka joogaha ah ee hawraar faleedda qayb tani na waa : ***aa, daa, aa, daa, naa, daan*** iyo ***aan***. Waxaa summad u ah "***d***" qofka labaad iyo saddexaadka dheddig.

Kaddarka falka tagaha ah ee qayb tani na waa: ***ay, day, ay, day, nay, deen*** iyo ***een***. Summaddi qaybta ee "***d***"' na waa ta ku taalla qofafka labaad iyo saddexaadka dheddig.

***Sarfiga hawraar magaceedda qaybta 2aad waa sidan soo socota :***

| **Qofka** | **Amminta** | |
|---|---|---|
| | ***joogto*** | ***tagto*** |

| | | |
|---|---|---|
| 1aad | *aniga ayaa raaca* | *aniga ayaa raacay* |
| Fardi 2aad | *adiga ayaa raaca* | *adiga ayaa raaca* |
| 3aad lab | *isaga ayaa raaca* | *isaga ayaa raacay* |
| dh. | *iyada ayaa raacda* | *iyada ayaa raacday* |
| 1aad | *annaga ayaa raacna* | *annga ayaa raacnay* |
| Wadar 2aad | *idinka ayaa raaca* | *idinka ayaa raacay* |
| 3aad | *iyaga ayaa raaca* | *iyaga ayaa raacay* |

Kuddarka falka joogaha ah ee hawraar magaceedda qayb tani waa sidan soo socota : ***a, a, a, da, na, a*** iyo ***a***.

Labadii qof ee kowaadka wadarta ah iyo saddexaadka dheddig baa uun gaar u suntan. Summaddii qaybta ee ***"d"*** na waa ku taal.

Kuddarka falka tagaha ah ee hawraar magaceedda qayb tani waa : ***ay, ay, ay, day, nay, ay*** iyo ***ay***.

Labadii qof ee falka joogaha suntanaa ayaa mar kan na suntan. Summaddii ***"d"*** ee qaybtu na waa ta ku taal qofka saddexaad ee dheddig.

## Qaybta 3aad ee Kooxda 1aad

Falalka qayb tan saddexaad waa falal amar koodu ku dhammaado shibbanaha ***"ℓ"***. Sarfigoodu na waa sidan:

Fal gummudka qayb tani na waa : ***fal***

***Sarfiga hawraar faleedda qaybta 3aad waa sidan soo socota :***

**Qofka** **Amminta**

| | ***Joogto*** | ***tagto*** |
|---|---|---|
| 1aad | *falaa* | *falay* |
| Fardi 2aad | *fashaa* | *fashay* |
| 3aad lab | *falaa* | *falay* |
| dh. | *fashaa* | *fashay* |
| 1aad | *falnaa* | *falnay* |
| Wadar 2aad | *fashaan* | *fasheen* |
| 3aad | *falaan* | *faleen* |





Kuddarka falka joogaha ah ee hawraar faleedda qaybtu waa : ***aa, shaa, aa, shaa, naa, shaan***, iyo ***aan***.

Qayb tan waxaa u summad ah ***"sh"*** qofka labaad iyo saddexaadka dheddig ee ka gaarka ah inta kale.

Kuddarka falka tagaha ah ee hawraar faleedda qaybtu waa : ***ay, shay, ay, shay, nay, sheen*** iyo ee***n***.

Summaddii qaybta oo ah ***"sh"*** waa ta ka muuqata qofafka labaad (fardi iyo wadar ba) iyo saddexaadka dheddig.

## Sarfiga Hawraar Magaceedda Qaybta 3aad

**Qofka** **Amminta**

| | ***Joogto*** | ***tagto*** |
|---|---|---|
| 1aad | *aniga ayaa fala* | *aniga ayaa falay* |
| Fardi 2aad | *adiga ayaa fala* | *adiga ayaa falay* |
| 3aad lab | *isaga ayaa fala* | *isaga ayaa falay* |
| dh. | *iyada ayaa fasha* | *iyada ayaa fashay* |
| 1aad | *annaga ayaa falna* | *annga ayaa falnay* |
| Wadar 2aad | *idinka ayaa fala* | *idinka ayaa falay* |
| 3aad | *iyaga ayaa fala* | *iyaga ayaa falay* |

Kuddarka falka joogaha ah ee hawraar magaceedda qayb tanu waa sidan soo socota : ***a, a, a, sha, na, a*** iyo ***a***.

Qofafka saddexaad ee dheddig iyo kowaadka wadarta ah oo keli ah ayaa ka gaar ah inta kale. Summaddii kooxda ee ***"sh"*** waa ku taal.

Kuddarka falka tagaha ah ee hawraar magaceedda qaybtu waa : ***ay, ay, ay, shay, nay, ay*** iyo ***ay***.

Qofafka saddexaad ee dheddig iyo kowaadka wadarta ah ayaa ka duwan inta kale. Summaddii kooxda ee ***"sh"*** waa ku jirtaa falka

tagaha ah.

Saddexda qaybood ee aynnu soo aragnay, waxa ay is kaga mid yihiin kuddarka. Waa is ku qaacido. Dhammaan waa wada sidan soo socota :

Falalka hawraar faleedda ee qofka labaad iyo saddexaadka dheddig waa is ku samays waa na sidan :

Falka joogaha ah:

**Gummud + *taa* amma *daa* amma *shaa*.**

Falka tagaha ah:

**Gummud + *tay* amma *day* amma *shay*.**

Waxa ay ku ka la duwan yihiin waa ***"t"***, ***"d"*** iyo ***"sh"*** oo keli ah. Sida kale oo dhan waa is kaga mid. Waa na sidaa sababta ay is ku qaybta u yihiin.

***Tusaalayaal***

Gummud koodu waa : ***mar, raac*** iyo ***fal.***

Kuddarku na waa : ***taa, daa*** iyo ***shaa*** sida ay u ka la horreeyan marka amminta falku joogto tahay.

Haddii falku se yahay tage, kuddarku waa sidan : ***tay***, ***day*** iyo ***shay***.

**Kooxda II**

**Sarfiga Qaybta 1aad ee Kooxda 2aad**

Falal kanu waa kuwo amar koodu ku dhammaado shaqallada: ***y, a,*** iyo ***i***. Fal gummudyada falalka qayb tani waa sidan: ***samee, daa*** iyo ***mari*** sida ay u ka la horreeyan. Sarfiga falalku na waa sidan soo socota:

Fal gummudka qayb tani waa : ***mari***.

**Sarfiga Hawraar Faleedda Qaybta 1aad ee Kooxda 2aad;**





| Qofka | | Amminta | |
|---|---|---|---|
| | | **Joogto** | **tagto** |
| Fardi | 1aad | *mariyaa* | *mariyay* |
| | 2aad | *marisaa* | *marisay* |
| | 3aad lab | *mariyaa* | *mariyay* |
| | dh. | *marisaa* | *marisay* |
| Wadar | 1aad | *marinaa* | *marinay* |
| | 2aad | *marisaan* | *mariseen* |
| | 3aad | *mariyaan* | *mariyeen* |

kuddarka falka joogaha ah ee qaybta 1aad ee kooxda 2aad waa sidan: ***yaa, saa, yaa, saa, naa, saan,*** iyo ***yaan***.

Kuddarka falka tagaha ahi na waa sidan: ***yay, say, yay, say, nay, seen,*** iyo ***yeen***.

Summadda kooxdan lagu gartaa na waa ***"s"*** qofka labaad (fardi iyo wadar ba) iyo saddexaadka dheddig.

**Sarfiga Hawraar Magaceedda Qaybta 1aad ee Kooxda 2aad:**

| Qofka | | Amminta | |
|---|---|---|---|
| | | **Joogto** | **tagto** |
| Fardi | 1aad | *aniga ayaa mariya* | *aniga ayaa mariyay* |
| | 2aad | *adiga ayaa mariya* | *adiga ayaa mariyay* |
| | 3aad lab | *isaga ayaa mariya* | *isaga ayaa mariyay* |
| | dh. | *iyada ayaa marisa* | *iyada ayaa marisay* |
| Wadar | 1aad | *annaga ayaa marina* | *annga ayaa marinay* |
| | 2aad | *idinka ayaa mariya* | *idinka ayaa mariyay* |
| | 3aad | *iyaga ayaa mariya* | *iyaga ayaa mariyay* |

Kuddarka falka joogaha ah ee hawraar magaceedda qaybta 1aad ee kooxda 2aad waa : ***ya, ya, ya, sa, na, ya*** iyo ***ya***.

Kuddarka falka tagaha ahi na waa sidan : ***yay, yay, yay, say, nay,***

***yay***, iyo ***yay***.

Falka hawraar magaceedda ee qayb tan waxa u summad ah "***s***" qofka saddexaad ee dheddig.

**Fiiro gaar ah**

Sida falka "***mari***" ayaa falka "***samee***" u sarfiya. "***ee***" u danbeeyaa waa shaqal la mid ah "***i***" u danbeeya falka "***mari***".

## Sarfiga Qaybta 2aad ee Kooxda 2aad

Qayb tan waxa soo gala falalka ku dhammaadaa shaqalka "***o***".

Fal gummud koodu na waa : ***maro***.

**Sarfiga Hawraar Faleedda Qaybta 2aad ee Kooxda 2aad :**

| Qofka | | Amminta | |
|---|---|---|---|
| | | **Joogto** | **tagto** |
| | 1aad | *martaa* | *martay* |
| Fardi | 2aad | *maratаа* | *maratay* |
| | 3aad lab | *martaa* | *martay* |
| | dh. | *maratаа* | *maratay* |
| | 1aad | *maranaa* | *maranay* |
| Wadar | 2aad | *marataan* | *marateen* |
| | 3aad | *martaan* | *marteen* |

Kuddarka falka joogaha ah ee hawraar faleedda qaybta labaad ee kooxda labaad waa : ***taa, taa, taa, taa, naa, taan, taan***.

Qayb tan qofka kowaad, saddexaadka lab iyo wadarta saddexaadku waxa ay xadfeen "***o***" ku jirtay fal gummudka.

Kuddarka falka tagaha ah ee hawraar faleedda qaybtu waa : ***tay, tay, tay, tay, nay, teen*** iyo ***teen***. Sidii falka joogaha ah ayaa qofafka kowaad, seddexaadka lab iyo wadarta qofka saddexaad u xadfeen "***o***" ku jirtay falka gummudka ah.





Waxa qayb tanu kaga duwan tahay kuwii hore : "***t***" baa ku wada jirta qofafka wadarta kowaad maahee, hal kii kuwii hore "***t***" summad u ahayd qofafka labaad iyo saddexaadka dheddig uun.

Summadda falka qayb tani na waa : "***o***".

**Sarfiga Hawraar Magaceedda Qaybta 2aad ee Kooxda 2aad:**

| Qofka | | Amminta | |
|---|---|---|---|
| | | **Joogto** | **tagto** |
| | 1aad | *aniga ayaa marta* | *aniga ayaa martay* |
| Fardi | 2aad | *adiga ayaa marta* | *adiga ayaa martay* |
| | 3aad lab | *isaga ayaa marta* | *isaga ayaa martay* |
| | dh. | *iyada ayaa marata* | *iyada ayaa maratay* |
| | 1aad | *annaga ayaa marana* | *annga ayaa maranay* |
| Wadar | 2aad | *idinka ayaa marta* | *idinka ayaa martay* |
| | 3aad | *iyaga ayaa marta* | *iyaga ayaa martay* |

Kuddarka falka joogaha ah ee hawraar magaceedda qayb tan labaad ee kooxda labaad waa : ***ta, ta, ta, ta, na, ta*** iyo ***ta***.

Labada qof ee saddexaadka dheddig iyo kowaadka wadarta ah ayaa gummud kii oo dhammi ku jiraa. Inta kale waxa ay jaraan "***o***" gummudka u danbeeya.

Kuddarka falka tagaha ah ee qaybtu waa : ***tay, tay, tay, tay, nay, tay*** iyo ***tay***.

Sidii falka joogaha ah ayaa fal gummud kii oo dhami ugu jiraa seddexaadka dheddig iyo kowaadka wadarta ah oo keli ah. Inta kale "***o***" waa xadfeen.

## Sarfiga Qaybta 3aad ee Kooxda 2aad

Qayb tan waxa soo gala falal kale oo ayo na ku dhammaada shaqalka "***o***".

Fal gummudka qaybtu waa: ***soco***.

**Sarfiga Hawraar Faleedda Qaybta 3aad ee Kooxda 2aad**

| Qofka | | Amminta | |
|---|---|---|---|
| | | Joogto | tagto |
| Fardi | 1aad | *socdaa* | *socday* |
| | 2aad | *socotaa* | *socotay* |
| | 3aad lab | *socdaa* | *socday* |
| | dh. | *socotaa* | *socotay* |
| Wadar | 1aad | *soconaa* | *soconay* |
| | 2aad | *socotaan* | *socoteen* |
| | 3aad | *socdaan* | *socdeen* |

Kuddarka falalka joogaha ah ee hawraar faleedda qayb tan saddexaad ee kooxda labaad waa : ***daa, taa, daa, taa, naa, taan*** iyo ***daan***.

Qofafka, fardiga kowaad, seddexaadka lab iyo seddexaadka wadarta ah waxa ay xadfeen ***"o"*** gummudka u danbeeyay. Inta kale se waa ay ku jirtaa.

Kuddarka falka tagaha ah ee qaybtu waa : ***day, tay, day, tay, nay, teen*** iyo ***deen***.

Sidii falka joogaha ah ayaa qofafka kowaad, seddexaadka lab iyo seddexaadka wadarta ahi u xadfeen ***"o"*** gummudka.

Mar kaa qayb tani waa la mid tii 2aad, waxa se ay ku ka la duwan yihiin, ***"d"*** ayaa beddelay ***"t"*** qaybta hore (3,2).

**Sarfiga Hawraar Magaceedda Qaybta 3aad ee Kooxda 2aad**:

| Qofka | | Amminta | |
|---|---|---|---|
| | | Joogto | tagto |
| | 1aad | *aniga ayaa socda* | *aniga ayaa socday* |





| | | | |
|---|---|---|---|
| Fardi | 2aad | *adiga ayaa socda* | *adiga ayaa socday* |
| | 3aad lab | *isaga ayaa socda* | *isaga ayaa socday* |
| | Dh | *iyada ayaa socota* | *iyada ayaa socotay* |
| Wadar | 1aad | *annaga ayaa socona* | *annga ayaa soconay* |
| | 2aad | *idinka ayaa socda* | *idinka ayaa socday* |
| | 3aad | *iyaga ayaa socda* | *iyaga ayaa socday* |

Kuddarka falalka hawraar magaceedda falka joogaha ah ee qayb tan 3aad ee kooxda 2aad waa : ***da, da, da, ta, na, da*** iyo ***da***.

***"o"*** gummudku, labo qof uun baa uu ku jiraa oo ah qofka seddexaad ee dheddig iyo qofka kowaad ee wadarta ah.

Kuddarka falalka hawraar magaceedda falka tagaha ah ee qayb tan seddexaad ee kooxda labaad waa : ***day, day, day, tay, nay, day*** iyo ***day***.

Sidii falka joogaha ah, ***"o"*** gummudku labo qof uun baa uu ku jiraa. Kuwaas oo ah seddexaadka dheddig iyo wadarta qofka kowaad.

Summadda qaybtu waa ***"o"***.

**Sarfiga Qaybta 4aad ee kooxda 2aad**

Falalka qayb tani waa kuwo ku dhammaada shaqalka ***"o"***.

Fal gummud koodu na waa : ***marso***.

***Sarfiga Hawraar Faleedda Qaybta 4aad ee Kooxda 2aad***

| Qofka | | Amminta | |
|---|---|---|---|
| | | Joogto | tagto |
| Fardi | 1aad | *marsadaa* | *marsaday* |
| | 2aad | *marsataa* | *marsatay* |
| | 3aad lab | *marsadaa* | *marsaday* |
| | dh. | *marsataa* | *marsatay* |
| Wadar | 1aad | *marsanaa* | *marsanay* |
| | 2aad | *marsataan* | *marsateen* |

| | | |
|---|---|---|
| 3aad | *marsadaan* | *marsadeen* |

Kuddarka falka joogaha ah ee hawraar faleedda qayb tani waa : ***daa, taa, daa, taa, naa, taan*** iyo ***daan***.

Sida falalka ku cad, qayb tan **"o"** falka gummudku waa ku wada jiraa. Qayb tii labaad ee is la kooxdan hal kaas baa ay ku ka la duwan yihiin.

Kuddarka falka tagaha ah ee hawraar faleedda qayb tani na waa : ***day, tay, day, tay, nay, teen*** iyo ***deen***. Sidii falka joogaha ah **"o"** waa ku wada jiraa.

Summadda qaybtu waa sidii kuwa hore oo waa **"o".**

**Sarfiga Hawraar Magaceedda Qaybta 4aad ee Kooxda 2aad**

| **Qofka** | **Amminta** | |
|---|---|---|
| | **Joogto** | **tagto** |
| Fardi 1aad | marsada | marsaday |
| Fardi 2aad | marsada | marsaday |
| 3aad lab | marsada | marsaday |
| 3aad dh. | marsata | marsatay |
| wadar | | |
| 1aad | marsana | marsanay |
| *2aad* | marsada | marsaday |
| 3aad | marsada | marsaday |

Kuddarka falka joogaha ah ee hawraar faleedda qaybtu waa: ***da, da, da, ta, na, da*** iyo ***da***.

Falalka qayb tan waa ku wada jiraa **"o"** gummdku.

Kuddarka falka tagaha ah ee qayb tani na waa : ***day, day, day, tay, nay, day*** iyo ***day***. **"o"** gummudku kuwan na waa ku wada jiraa.

Summadda qaybtu na waa **"o".**





**1. Sarfiileha Caadiga Ah**

**b) Tusanaha Horgeliska ah**

Tusanaha horgelis, qofku (qof, jinsi) xagga hore ayaa uu ka galaa falka; kuddarka in tiisii kale na (tiro, ammin) xagga danbe. Sidaas oo jirta ayaa hadda na, sarfiga horgelisku leh yahay qaacido sugan oo la raaci karo; sabab taas baa qayb tan sarfiilaha caadiga ah loo raacinayaa.

**Sarfiga tusanaha horgeliska ah**

Falal afar ah ayaa xagga hore ku qaata qofka. Falal kan, gummudyadoodu waa : ***imaad, aqoon, aal,*** iyo ***dheh.*** Sarfigoodu na waa sidan soo socota:

**Sarfiga Hawraar Faleedda Horgeliska**

| **Qofka** | **Amminta** | |
|---|---|---|
| | **Joogto** | **tagto** |
| Fardi 1aad | *imaaddaa* | *imi* |
| Fardi 2aad | *timaaddaa* | *timi* |
| 3aad lab | *yimaaddaa* | *yimi* |
| dh. | *timaaddaa* | *timi* |
| Wadar 1aad | *nimaadnaa* | *nimi* |
| Wadar 2aad | *timaaddaan* | *timaaddeen* |
| 3aad | *yimaaddaan* | *yimaaddeen* |

Kuddarka falalka joogaha ah waa :

| Xagga hore | xagga danbe |
|---|---|
| -- | ***daa*** |

| | |
|---|---|
| *t* | ***daa*** |
| *y* | ***daa*** |
| *t* | ***daa*** |
| *n* | ***naa*** |
| *t* | ***daan*** |
| *y* | ***daan*** |

Sida aad u arkaysid, xagga hore waxa ka gala falka : ***—, t, y, t, n, t, y*** oo waa qofka. Xagga danbe na waxa ka gala : ***daa, daa, daa, daa, naa, daan, daan*** oo ah kuddarro u jooga amminta iyo tirada qofka.

Kuddarka falalka tagaha ahi na waa: ***—, t, y, t, n, t,*** iyo ***y*** oo xagga hore kaga jira falka, u na jooga qofafka. Xagga danbe labo qof oo keli ah ayaa wax ku muujiya. Kuwaas oo ah wadaraha qofafka labaad iyo saddexaad oo muujiya tiradii qofka iyo amminta tagtada ah. Inta kale ***"i"*** ayaa u wada danbeeya oo an wax ba sheegaynin.

**Sarfiga Hawraar Magaceedda Horgeliska**

| **Qofka** | | **Amminta** | |
|---|---|---|---|
| | | Joogto | tagto |
| Fardi | 1aad | *aniga ayaa imaadda* | *aniga ayaa imi* |
| | 2aad | *adiga ayaa yimaadda* | *adiga ayaa yimi* |
| | 3aad lab | *isaga ayaa yimaadda* | *isaga ayaa yimi* |
| | " dh. | iyada ayaa timaadda | iyada ayaa timi |
| Wadar | 1aad | *annaga ayaa nimaadna* | *annga ayaa nimi* |
| | 2aad | *idinka ayaa yimaadda* | *idinka ayaa yimi* |
| | 3aad | *iyaga ayaa yimaadda* | *iyaga ayaa yimi* |

Kuddarka falka joogaha ah ee tusaalayaashu waa:

| *Xagga hore* | *xagga danbe* |
|---|---|
| - | ***da*** |
| *y* | ***da*** |
| *y* | ***da*** |
| *t* | ***da*** |
| *n* | ***na*** |
| *y* | ***da*** |





| | |
|---|---|
| *y* | ***da*** |

Mar kan kuddarka falalku xagga hore iyo xagga danbe ba waa kaga jiraa. Qofku waa ka xagga hore ka raaca oo waa horgelis. Amminta iyo tirada qofku na waa dabagalis.

Falal kan waxa summad u ah qofka xagga hore ka raacaya. Labada qof ee saddexaadka dheddig iyo kowaadka wadarta ah ayaa ka duwan inta kale ee ***"y"*** u tahay qofka summad.

Falka tagaha ahi, xagga hore, waa ka la mid falka joogaha ah, xagga danbe se waa ku ka la duwan yihiin. Kuwan danbe ***'i'*** ayaa u wada danbeeya oo an wax ba sheegaynin.

Summaddii ***'y'*** waa ay la qabaan falalka hore ee ammin toodu joogtada tahay.

## 2. Sarfiileh Macaadi Ah

Fal macaadigu waa fal an lehayn qaab iyo sarfi qumman oo loogu soo hagaagi karo. Waa fal is bedbeddela, wejiyo badan leh, oo had ba si u qorma amma u dhigma. Sidaas baa na loo yidhi **fal macaadi**.

Sarfiileha macaadiga ahi waa labo:-

i) Falxaal
ii) Shardiileh

### i) Sarfiga Falxaalka

**Sarfiga Falxaalka**

Fal xaalku waa fal macaadi ah oo sarfigiisu kol ba si yahay. Mar waa horgelis, mar waa dabagelis; mar kan danbe weli ba waxa ay is ku dhafmaan sifada amma nisbada faacilka hawraarta. Waa fal ku salaysan falka gargaaraha ***ahaw***. La'aan tii na sifada nisbada ah la ma sheegi karo.

## Falxaalka Hawraar Faleedda iyo Sifada

Falxaalku waa fal ay wada sameeyaan falka **'*ahaw*'** ee gargaaraha ah iyo sifo. labadu mar waa ka la dhigan yihiin ka labo erey ahaan; mar na waa is ku dhigmaan oo waxa ay is ku noqdaan hal erey.

***Tusaalayaal***

| Joogto | Tagto |
|---|---|
| *Waa aan dheer **ahay**.* | *Waa aan dheer**aa**.* |
| *Waa aad dheer **tahay**.* | *Waa aad dheer**ayd**.* |
| *Waa uu dheer **yahay**.* | *Waa uu dheer**aa**.* |
| *Waa ay dheer **tahay**.* | *Waa ay dheer**ayd**.* |
| *Waa aannu dhaadheer **nahay**.* | *Waa aannu dhaadheer**ayn**.* |
| *Waa aydun dhaadheer **tihiin**.* | *Waa aydun dhaadheer**aydeen**.* |
| *Waa ay dhaadheer **yihiin**.* | *Waa ay dhaadheer**aayeen**.* |

Hawraaraha kor ku taxan waa hawraaro sifooyin nisbo ah oo sheegaya in qofka amma faacilka hawraartu leh yahay amma loo nisbayn hayo ***"dherer"***. Bal si wacan u dhuux hawraaraha. Dhammaan falka ***ahaw*** ayaa ku wada jira oo fal u ah.

Hadda na hawraaraha bidixdu si ayaa ay u dhigan yihiin, kuwa midigtu na si kale ayaa ay u dhigan yihiin.

Falalka hawraaraha bidixdu waa ereyada waaweynaysan ee ***ahay, tahay, yahay, tahay, nahay, tihiin*** iyo ***yihiin*** oo mid kas taa is kii u dhigan yahay. Falal kaasi sida aad u arkaysid waa falal joogayaal ah oo leh ammin joogto ah.

Falalka hawraaraha midigtu, is kood u ma dhigna. Waxa ay is ku dhafan yihiin sifooyinka ka horreeya oo ah ereyada ***dheer***. In tii an ay is ku darsamin sifooyinka, falalku waxa ay ahaayeen ereyada : ***ahaa, ahayd, ahaa, ahayd, ahayn, ahaydeen,*** iyo ***ahaayeen***.

Ereyadaasi waa falal tagayaal ah oo dhammaan tood ka soo jeeda fal asalka ***ahaw***. Hadda ba, mar kii falal kanu ku darsamayeen sifooyinka, waxa la liqay oo tirmay xarfaha ***"ah"*** ee u horreeya falalka. Inta soo hadhay na, waxa ay ku darsantay sifada ka





horraysa.

Marka ereyada : ***dheeraa, dheerayd, dheeraa, dheerayd, dhaadheerayn, dheerayadeen, dheeraayeen*** laga wada jaro ereyga sifada ah ee dheer, waxa soo hadhaya inta waaweynaysan ee ereyga sifada ah ee ***dheer*** ee xagga danbe kaga darsan, oo ah : ***aa, ayd, aa, ayd, ayn, aydeen, aayeen.***

Kuwaas oo ah intii ka soo hadhay falalkii : ***ahaa, ahayd, ahaa, ahayd, ahayn, ahaydeen*** iyo ***ahaayeen*** mar kii xarfaha hore ee ***"ah"*** la liqay amma ee ay lumeen.

Waxa inoo caddaatay in marka falka ***ahaw*** jooge yahay, falka iyo sifadu ka la dhigan yihiin, marar yar oo dhif ah mooyaan ee. Marka se falaka ahaw tage yahay sifada iyo falku waa is ku dhafan yihiin. Mar kaa na labada xaraf ee falka u horreeya ayaa la liqaa amma waa lumaan.

## *Sarfiga Falka Gargaaraha Ahaw ee Hawraar Magaceedda iyo Sifada*

Falka gargaaraha ***ahaw*** ee hawraar magaceedda iyo sifadu waa is ku dhigmaan oo erey keli ah ayaa ay is la noqdaan marka falku tage yahay.

***Tusaalayaal***

| *Joogto* | *Tagto* |
|---|---|
| *Aniga ayaa dheer.* | *Aniga ayaa dheer**aa**.* |
| *Adiga ayaa dheer.* | *Adiga ayaa dheer**aa**.* |
| *Isaga ayaa dheer.* | *Isaga ayaa dheer**aa**.* |
| *Iyada ayaa dheer.* | *iyada ayaa dheer**ayd**.* |
| *Annaga ayaa dhaadheer.* | *Annaga ayaa dhaadheer**ayn**.* |
| *Idinka yaa dhaadheer.* | *Idinka ayaa dhaadheer**aa**.* |
| *Iyaga ayaa dhaadheer.* | *Iyaga ayaa dhaadheer**aa**.* |

Hawraaraha bidixda xigaa, ma leha falal. Waa hawraaro magaceedyo an falal lahayn. Kuwa xiga midigta waa sifada oo ah ereyga ***dheer*** iyo falalkii oo is ku dhigmay. Si aynnu u ka la gurno sifooyinka iyo falalka is ku dhigan, aynnu raadinno waxa ay ahaayeen falalku ka hor in tii

an ay is ku darmin sifooyinka.

Waxa keli ah ee dhacay waa xarfaha **"ah"** ee u horreeya falalka ayaa la liqay oo lumay mar kii iskuddarku dhacay.

ii) shardiileh

**Sarfiga Shardiileha**

**3. Shardiileh**

Shardiileh waa sah qofeed ah oo sidaa awgeed sarfiya. Waa na fal xaal ah. Waa sah an suurtagal amma macquul ahayn ilaa la oofiyo amma la helo shardiga ku xidhan. Waxaa summad u ah ereyga sifada ee **"leh"** iyo amminaha fal xaalka **"ahaw"** ee tagaha iyo joogaha ah.

Is ku dhafka ereyga **"leh"** iyo falalka tagaha iyo joogaha ah ee ka soo jeeda fal xaalka **"ahaw"** ayaa gargaare u ah shardiilaha.

***Tusaalayaal***

*Hargeysa ayaa aan tagi **lehaa** haddii aan lacag haysto.*
*Wax baa aan baran **lehaa** haddii dugsi la i gu daro.*
*In aan wasiirka arko ayaa aan jeclaan **lehaa**.*

Falalka hawraaraha waa ereyada: *tagi* ***lehaa**, dhigan* ***lehaa*** iyo *jeclaan* ***lehaa***.

Waa na falal leh sah ***shardi*** ah. Waxa u summad ah falal kan: Gargaaraha **"lehaa".** Isaga oo keli ah ayaa na falka shardiga ahi qaataa. Mid kale ma qaadan karo.

## 6. Nafyiyánta Falka

Falku waxa uu qaadan karaa nafyinimo. Waa astaan ka mid ah kuwa lagu garto falka. Waxaa na keena ereyo gaar ah, hormara falka oo beddela qaabka falka.

Ereyadaas oo ah kuwan soo socda :





***Ha,*** marka falku yahay amar.

Haddii falku yahay jooge amma tage na :

***Ma,*** haddii hawraartu tahay hawraar faleed; amma ***"an",*** haddii hawraartu tahay hawraar magaceed.

Aan eegno hadda ba falalka : ***amarka***, ***joogaha*** iyo ***tagaha***.

**i) Falka Amarka Ah**

***Tusaalayaal***

| | |
|---|---|
| *Cab biyaha.* | ***Ha** cabbin biyaha.* |
| *Taga dugsiga.* | ***Ha** tagina dugsiga.* |
| *Sheeg warka.* | ***Ha** sheegin warka.* |

Hawraaraha bidixda ee tusaalayaashu waa hawraaro iijaabi ah oo falal koodu amar yihiin. Hawraaraha midigtu se waa is la hawraarihii oo nafyiyan. Ereyada waaweynaysan ee **"ha"** ayaa na nafyi ka dhigay.

**ii). Falka Joogaha ah ee Hawraar Faleedda**

Hawraar faleedda, ereyga **"ma"** ayaa guud ahaan nafyi ka dhiga falka. In taa waxa u dheer is ku si baa uu ka dhigaa dhammaadka falalka joogaha ah ee qofafka kowaad iyo saddexaad ee fardiga ah (lab iyo dheddig ba) iyo kowaadka wadarta ah.

<u>**Hawraar Faleedda**</u>

***Tusaalayaal***

| | |
|---|---|
| *Waa aan **tagaa** dugsiga.* | *Ma aan **tago** dugsiga.* |
| *Waa aad **tagtaa** dugsiga.* | *Ma aad **tagtid** dugsiga.* |
| *Waa uu **tagaa** dugsiga.* | *Ma uu **tago** dugsiga.* |
| *Waa ay **tagtaa** dugsiga.* | *Ma aÿ **tagto** dugsiga.* |
| *Waa aannu **tagnaa** dugsiga.* | *Ma aannu **tagno** dugsiga.* |

*Waa aydun* ***tagtaan*** *dugisga.* *Ma aydun* ***tagtaan*** *dugsiga.*
*Waa ay* ***tagaan*** *dugsiga.* *Ma ay* ***tagaan*** *dugsiga.*

Falalka hawraaraha bidixdu, oo ah ereyada waaweynaysan ee ***tagaa, tagtaa, tagaa, tagtaa, tagnaa, tagtaan,*** iyo ***tagaan,*** waa falal iijaabi ah. Ereyga ***"waa"*** ayaa na lagu garanayaa.

Falalka hawraaraha midigtu na waa ereyada waaweynaysan ee ***tago, tagtid, tago, tagto, tagno, tagtaan*** iyo ***tagaan*** oo ah falal nafyan. Ereyga ***"ma"*** oo nafyiyeeye ah ayaa na sidaa u dhigaya.

Falalka qofafka kowaad ee fardiga ah, qofka seddexaad ee fardiga ah ( lab iyo dheddig ba), kowaadka wadarta ah, waxa u wada danbeeya shaqalka amma dhawda ***"o"***.

Dhawdaa waxa ku dhigay amma ku keenay falalka ereyga ***"ma"***. Falalku mar kaa waa falal ah hawraaro faleedyo ***nafyiyan***.

Falka qofka labaad waxa u danbeeya ***"id"***. Asagu waa qilaafsan yahay falalka kale oo ku ma dhammaado ***"o"***, in kasta oo uu jooge yahay, nafyiyan yahay oo ereyga ***"ma"*** sida kuwa kale u beddelay.

Falka qofka labaad ee wadarta ahi na waa qilaafsan yahay falalka waayo fardigiisii ayaa hore u qilaafay. Waxa kale oo wax ka sii beddelay wadarta. ***"n"*** oo ayo na liqday shaqal kii iman kari lahaa.

Falka qofka saddexaad ee wadarta ah, waxa beddelay wadarta laf teeda. Fal kii fardiga ahaa, caadi baa uu ahaa oo ***"o"*** ayaa u danbeeyay. Wadarta ma aha ee, meel kale ayo na looga ma imanin.

Waxa ayo na ku dhiga falka hawraar faleedda joogaha ah dhawdan oo kale, ereyadan kale ee soo socda : ***in, si, ha.......iwm.***

***Tusaalayaal***

*In aan* ***tago*** *ayaa aan dooni hayaa.*
*In aad* ***tagtid*** *laga ma yaabo.*
*Si uu u* ***tago*** *dugsiga ayaa aan falawgeed wadaa.*
*Ha u* ***tagto*** *si dhaqso leh.*
*In aannu* ***tagno*** *ayaa aan qabaa.*
*Si aad u* ***tagtaan*** *ba ma dhalan.*
*Si ay u* ***tagaan*** *u yeel.*





Falalka hawraaraha kore waa ereyada waaweynaysan ee ***tago, tagtid, tago, tagto, tagno, tagtaan*** iyo ***tagaan***.

Maxaa u dhaxeeya kuwan iyo kuwii hawraaraha bogga hore aynnu ku soo dhaafnay. Is ku dhaw amma shaqal ayaa ay ku dhammaadaan, oo ah ***"o"***. Kaas oo ereyga ***"ma"*** ku dhigo falalka joogaha ah, ayaa ereyadan kale (oo ayana ah falal joogayaal ah) na ku dhigan. Ereyadaasi na sidii aynnu hore u soo sheegnay waa : ***in, si*** iyo ***ha***.

Waxa ayana ku dhiga dhawdaa falka, ereyada : ***haddii, marka, goorta, halka, inta, meesha****...iwm*.

***Tusaalayaal***

*Haddii aan* ***tago*** *magaaladii, dhar baa aan soo iibin doonaa.*
*U sheeg Cali farriinta marka aad* ***tagtid*** *Burco.*
*Halka uu* ***tago,*** *waa ba la arki doonaa.*
*Ma aan ogi, goorta ay* ***tagto****.*
*Mar aannu* ***tagno*** *ba, waa aannu tegi doonaa.*
*Inta aad* ***tagtaan****, lacagtii daaska is ka dhiga.*
*Meesha ay tagaan ba, khayr Alleh ha ku siiyo.*

Falalka joogaha ah ee hawraarahan danbe waa ereyada waaeynaysan ***tago, tagtid, tago, tagto, tagno, tagtaan*** iyo ***tagaan***. Iyo na dhawda ***"o"*** waa kuwa ku dhigtay falalka ***tago, tago, tagto*** iyo ***tagno***.

Xataa falalka an lehayn ***"o"*** ee ***tagtid, tagtaan*** iyo ***tagaan*** waa is ka ga mid.

***Maxaa, hadda ba, ku dhigay dhawaha falal kan?***

Waxa ku dhigay dhowahan falalka ereyada : ***haddii, marka, halka, goorta, inta, meesha****...iwm* ayaa ku dhigay.

Mar kaa waxa dhawda ***"o"*** ku dhiga falka joogaha ahi waa ereyada ***"ma"*** iyo walaalaheed oo ah : ***in, si,*** iyo ***ha*** iyo weli ba ereyada sida, ***haddii, marka, halka, goorta, sida*** iyo ...iwm.

**Fiiro gaar ah**

Hawraaraha u horreeya tusaalayaasha waa hawraaro faleedyo maxaa yeelay ereyada **"ma"** ayaa ku jira. Su'aasha hawraar faleeddu waxa ay saaran tahay falka. Jawaabta su'aashu na waxa ay gaar ku tahay falka. Sidaas baa mar kaa hawraaruhu u yihiin **hawraaro faleedyo**.

Hawraaraha dhexe iyo kuwo danbe ba se waa hawraaro magaceedyo maxaa yeelay ereyada ***in, si, ha*** iyo ***haddii, marka, halka*** iyo ***goorta*** waa magacyo waayo waxa ay qaadan karaan qodobbo. Su'aalaha hawraaruhu na magacyada ayaa ay saaran yihiin. Mar kaa sidaa awgeed baa hawraaruhu u noqonayaan **hawraaro magaceedyo**.

Hal kaa, waxa aynnu ka aragnaa in ereyada ***ma, in, si, ha*** iyo ereyada kale ee ***haddii, marka, halka*** iyo ***goorta***...iwm ay is ku dhaw ku sameeyaan falalka joogaha ah, haddii ay hawraarto faleed tahay iyo haddii ay hawraar magaceed tahay ba. Dhammaan ereyadaasi labo mid ayaa ay sheegayaan: nafyi amma **shaki.**

**iii) Falka Tagaha Ah**

Falka tagaha ah iyo ***"ma"*** iyo ***"an"***

***"ma"*** waa erey nafyi ka dhiga hawraar faleedda. nafyinimada waxa u dheer, ereyga ***"ma"*** dhaw is ku mid ah, ayaa uu xagga danbe kaga dhigaa falka tagaha ah ee hawraar faleedda.

**Hawraaro Faleedyo**

***Tusaalayaal***

*Ma aan **tagin** dugsiga.*
*Ma aad **tagin** dugsiga.*
*Ma uu **tagin** dugsiga.*
*Ma ay **tagin** dugsiga.*
*Ma aannu **tagin** dugsiga.*
*Ma aydun **tagin** dugsiga.*
*Ma ay **tagin** dugsiga.*

Falalka hawraaraha kore oo ah hawraaro faleedyo waa ereyada waaweynaysan. Dhawda falalka ku taal xaggooda danbe waa is ku mid. Xarfaha ***"in"*** ayaa u wada danbeeya.





**Falka Hawraar Magaceedda**

***Tusaalayaal***

*Aniga ayaa an **tagin** dugsiga.*
*Adiga ayaa an **tagin** dugsiga.*
*Isaga ayaa an **tagin** dugsiga.*
*Iyada ayaa an **tagin** dugsiga.*
*Annaga ayaa an **tagin** dugsiga.*
*Idinka ayaa an **tagin** dugsiga.*
*Iyaga ayaa an **tagin** dugsiga.*

Falalka hawraarahan oo ah hawraaro magaceedyo waa ereyada waaweynaysan. Iyagu na is ku dhawda ***"in"*** ayaa u wada danbeeya. Waxa kuwan na dhawda ugu wacani waa ereyga ***"an"*** oo ah erey nafyiyaha hawraar magaceedda.

Mar kaa ereyada ***"ma"*** iyo ***"an"*** is ku si ayaa ay ka dhigaan falka tagaha ah.

Labadu ba waxa ay ku sameeyaan dhawda ***'in"*** ee xagga danbe kaga taal falka tagaha ah, haddii uu hawraar faleed ku jiro iyo haddii uu hawraar magaceed ku jiro ba.

**Qaacidada Falka Tagaha Ah ee Nefyiyan**

Falka maxaddanaha ah ayaa u sees ah falka nafyiyan, qaacido ahaan. Marka falalka maxaddanayaashoodu yihiin : ***mari, marin*** iyo ***maran***, aan eegno sida nafyigoodu noqon hayo.

| **Maxaddane** | **Nafyiyan** |
|---|---|
| *Mari* | *Mari**n**,* |
| *Marin* | *Mari**nin**,* |
| *Maran* | *Mara**nin*** |

Hal kaa waxa ka cad in falka nafyiyani yahay sidan soo socota :

Falka nafyiyani = fal maxaddane + ***n***,
marka maxaddanaha shaqalka ***"i"*** u danbeeyo sida :

*mari* + *n* = *marin*

Falka nafyiyani = fal maxaddane + ***in***,
marka maxaddanaha, shibbanaha **"*n*"** u danbeeyo.

***marin* + *in* = *marinin***
***maran* + *in* = *maranin***

**iv) Fal Xaalka**

**b. Fal xaalka joogaha ah ee nafyiyan**

| | |
|---|---|
| *Waa aan dheer ahay.* | *Ma aan dheeri.* |
| *Waa aad dheer tahay.* | *Ma aad dheer**id**.* |
| *Waa uu dheer yahay.* | *Ma uu dheer**a**.* |
| *Waa ay dheer tahay.* | *Ma ay dheer**a**.* |
| *Waa aannu dhaadheer nahay.* | *Ma annu dhaadheer**in**.* |
| *Waa aydun dhaadheer tihiin.* | *Ma aydun dhaadheer**idin**.* |
| *Waa ay dhaadheer yihiin.* | *Ma ay dhaadheer**a**.* |

Hawraaraha bidixdu waa hawraaro iijaabi ah. Ereyga u horreeya ee **"*waa*"** ayaa sidaa ina tusaya. Hawraaraha midigtu se waa hawraaro nafyiyan oo sifaynaya in faacilku an uu lehayn oo an loo nisbayn karin dherer. Falal kii hawraaruhu waxa ay ku dasameen amma ku dhafmayn ereyada sifooyinka oo wada ah ereyga ***dheer***.

Hadda ba, aynnu doono ereyadii sifooyinka iyo falalka ee is ku darsamay. Sifadu waxa ay tahay ereyga ***dheer***. Ereygaas oo sidiisii ah oo an wax na ku kordhin, wax na ka dhicin. Falalka hawraaruhu na waa kuwo ka soo jeeda fal asalka ***ahaw***. Waxa in taa dheer, ereyga **"*ma*"** ayaa ku jira hawraaraha. Ereygaas oo nafyi ka dhiga falka. Falalka hawraaruhu na waa joogayaal. Sifadii na waa haynaa ee aan baadi doonno falalka ku darsamay sifada. Waa na kuwan :

*Ma aan* ***ahi,***
*Ma aad* ***tihid,***
*Ma uu* ***aha,***
*Ma ay* ***aha,***
*Ma aannu* ***nihin,***
*Ma aydun* ***tihidin,***
*Ma ay* ***aha.***





Waxa aynnu helnay ereyga sifada, oo ah *dheer* oo aynnu hubinnay in an uu is beddelin iyo ereyadii falalka ahaa. Mar kaa aynnu is ku darno labada oo soo saarno waxa ay is la noqdeen :

| | | | | |
|---|---|---|---|---|
| *Dheer* | + | ***ahi*** | = | *dheer**i**,* |
| *Dheer* | + | ***tahid (ahid)*** | = | *dheer**id**,* |
| *Dheer* | + | ***aha*** | = | *dheer**a**,* |
| *Dheer* | + | ***aha*** | = | *dheer**a**,* |
| *Dhadheer* | + | ***ahin*** | = | *dhaadheer**in**,* |
| *Dhaadheer* | + | ***ahidin*** | = | *dhaadheer**idin**,* |
| *Dhaadheer* | + | ***aha*** | = | *dhaadheer**a**.* |

Ereyada soo baxay iyo kuwa hawraaraha tusaalayaasha waa is ku mid. Mar kaa ereyada hawraaraha waa kuwo is ku jir ah, oo ay is ku darsameen ereyo sifo ah iyo falal. Iskudar kii na waxa lagu liqay amma lumay xarfaha **"*ah*"** ee u horreeya falal ka soo jeeda ***ahaw***.

Qofka labaad waxa kale oo lumay xarafka **"*t*"** ee u horreeya falka ***tihid***.

**t. Fal Xaalka Tagaha Ah**

**Hawraar Faleedda**

***Tusaalayaal***

*Ma aan dheer**ayn**,*
*Ma aad dheer**ayn**,*
*Ma uu dheer**ayn**,*
*Ma ay dheer**ayn**,*

*Ma aannu dhaadheer**ayn**,*
*Ma aydun dhaadheer**ayn**,*
*Ma ay dhaadheer**ayn**.*

Aan eegno hadda na hawraaraha danbe oo ah hawraaro faleedyo. Ereyada ***dheerayn***, ***dheerayn***, ***dheerayn***, ***dheerayn***, ***dhaadheerayn***, ***dhaadheerayn*** iyo ***dhaadheeerayn*** waa ereyo is ugu jira sifada *dheer* iyo falal ka soo jeeda fal asalka ***ahaw***.

Ereyadan marka laga jaro sifada oo aynnu og nahay in an ay is beddelin oo cayn keedii tahay, waxa soo hadhaya: ***ayn, ayn, ayn,***

***ayn, ayn, ayn*** iyo ***ayn***.

***Xaggee hadda ba ay ka yimaaddayn hadhaayadanu?***

Marka amminta falka *ahaw* tahay tagto ee falku nafyiyan yahay, waxa falku u dhigmayaa sidan soo socota :

*Ma aan* ***ahayn,***
*Ma aad* ***ahayn,***
*Ma uu* ***ahayn,***
*Ma ay* ***ahayn,***
*Ma aannu* ***ahayn,***
*Ma aydun* ***ahayn,***
*Ma ay* ***ahayn.***

Ereyada sifada ee *dheer* iyo falka ***ahayn*** marka la is ku daro, maxaa soo baxaya?

Waxa soo baxaya :

| | | | | |
|---|---|---|---|---|
| *Dheer* | + | ***ahayn*** | = | *dheer**ayn*** |
| *Dhaadheer* | + | ***ahayn*** | = | *dhaadheer**ayn*** |

Waxa kale oo inoo caddaatay in marka falka ***ahaw*** nafyiyan yahay, sifada iyo falku mar kasta is ku dhigmaan, haddii ammintu tahay joogto iyo haddii tahay tagto ba.

**Fal Xaalka ee Hawraar Magaceedda**

Falka gargaaraha ***ahaw*** ee hawraar magaceedda iyo sifadu waa is ku dhigmaan oo erey keli ah ayaa is la noqdaan marka falku nafyiyan yahay ee ammin tiisu na tahay tagto.

***Tusaalayaal***

*Aniga ayaa an dheer* ***ayn,***
*Adiga ayaa an deer* ***ayn,***
*Isaga ayaa an deer* ***ayn,***
*Iyada ayaa an dheer* ***ayn,***

*Annaga ayaa an dhaadheer* ***ayn,***
*Idinka ayaa an dhaadheer* ***ayn,***





*Iyaga ayaa an dhaadheer* ***ayn***.

Hawraaraha kor ku taxan waa sifada oo ah ereyga ***dheer*** iyo falal ka soo jeeda fal asalka *ahaw* oo is ku dhigmay. Si aynnu u ka la gurno sifooyinka iyo falalka is ku dhigan, aynnu raadinno wixii falalku ahaayeen ka hor intii an ay is ku darmin sifooyinka.

Falka ka soo jeeda fal asalka ***ahaw***, marka uu taban yahay ee ammin tiisu na tahay tagto sidan soo socota ayaa uu noqon hayaa:

*an aan* ***ahayn,***
*an aad* ***ahayn,***
*an uu* ***ahayn,***
*an ay* ***ahayn,***
*an aannu* ***ahayn,***
*an aydun* ***ahayn,***
*an ay* ***ahayn.***

Aan hadda ba is ku darno ereyga sifada ah ee dheer iyo falalka ***ahayn*** oo erey keli ah is kaga dhigno. Ogow se, xarfaha *"ah"* ee u horreeya falka waa go'ayaan. Ereyadii is-ku-darka ahaa na waa sidan:

| | | | | |
|---|---|---|---|---|
| *Dheer* | + | ***ahayn*** | = | *dheer**ayn,*** |
| *Dheer* | + | ***ahayn*** | = | *dheer**ayn,*** |
| *Dheer* | + | ***ahayn*** | = | *dheer**ayn,*** |
| *Dheer* | + | ***ahayn*** | = | *dheer**ayn,*** |
| *Dhaadheer* | + | ***ahayn*** | = | *dhaadheer**ayn,*** |
| *Dhaadheer* | + | ***ahayn*** | = | *dhaadheer**ayn,*** |
| *Dhaadheer* | + | ***ahayn*** | = | *dhaadheer**ayn.*** |

Sidaa aad ka arkaysid hawraaraha, marka labada erey la is ku daro, waxa la liqayaa oo lumaya labada xaraf ee ***"ah"*** ee u horreeya falalka ka soo jeeda falka ***ahaw***.

**Marka hadda ba falka *"ahaw"* ee hawraar magaceeddu tage yahay, ee falku na nafyiyan yahay, ereyga sifada iyo falku waa is ku darsamaan oo hal erey baa ay is ku noqdaan; xarfaha *"ah"* ee u horreeya falka na waa la liqaa oo waa lumaan.**

## Fasalka Sagaal iyo Tobnaad

### Dalayn

**Dalayn**

Dalayntu waa banbannayn hadalka qoran loo yeelo si macnaha waxa qoran si wacan loogu sii fahmo. Summado ayaa lagu calaamadiyaa banbannaynaha sida :

***Faasilo, shumme-faasilo, shumme, labo shumme oo isa saaran, bilo, kolmo,.........iwm.***

### 1. Faasilo

Faasilo waa calaamadda " , ". Waxaa na loo isticmaalaa si loo ka la saaro xubnaha ka la duduwan ee hawraarta. Waa astaan hakad ah, iyada oo an hadda na codka hoos loo dhigaynin.

Siyaalaha loo isticmaali karo waa kuwan hoos ku taxan :

b. Koox Gudaheed
t. Hawraar Gudaheed

### b. Koox Gudaheed

Waxa ay naga furataa in an xidhiidhiye lagu celcelin koox gudaheed, kaas oo marka u danbaysa uun la qoro sida :

***Tusaalayaal***

*Axmed, Cali iyo Weris'ba waa joogaan.*

*Nin dheer, maarriin ah oo shilis baa ku raadinayay.*

*Waa aan qaaday, dhigay, jimicsaday oo hadda na qaaday.*

Sida aad ku arkaysid tusaalayaasha kore, faasilooyinka waxa loo isticmaalay mar kan si an loogu celcelin xidhiidhiyayaasha ***"iyo"*** iyo ***"oo"*** ee kooxaha magacyada, sifooyinka iyo falalka ah ee tusaalayaasha kore gudahooda. Hawl yaraan iyo qurux ba waa tartay





taasi.

Faasilada hawraarta kowaad waxa ay beddeshay ***"iyo"***; hawraar taas oo noqon lehayd : *Axmed **iyo** Cali **iyo** Weris.* Labada hawraarood ee danbe na ***"oo"*** ayaa faasiladu beddeshay.

### t. Hawraar Gudaheed

Waxa la ka la dhex gelin karaa faacil iyo fal, haddii la sheegayo waxyaalo kale oo ku saabsan faacilka. Marka war kii dhammaado se waa in faasiladii mar labaad soo noqoto.

***Tusaalayaal***

*Nin kii, **mar kii uu habeen iyo maalin lug ahaa,** ayaa isaga oo kab lulaya kab na laalaadinaya ku gataati dhacay meel ag tayda ah.*

Hawraarta inta hoos ka xarriiqani waa in, wax ka sheegaysa faacilka hawraarta oo ah ***nin kii***. Faasilo ayaa mar kaa xagga hore iyo xagga danbe ba kaga jirta in taa wax ka sheegaysa faacilka.

### 2. Shumme-faasilo

Shumme-faasilo waa calaamadda " ; ". Waxaa ay ka la saartaa labo hawraarood. Labada hawraarood se, waa in ay leh yihiin xidhiidh macne amma ujeeddo oo is ku dhaw.

***Tusaaleh***

*Xoog baa uu u shaqeeyay; in uu ku guulaysto imtixaanka ayaa uu rabay.*

Xidhiidhka macne ee labada hawraarood sida ay is ugu dhaw yihiin waxa laga garanayaa: xidhiidhiye ayaa is ku xidhi kara labada hawraarood :

*Xoog baa uu u shaqeeyay **waayo** in uu ku guulaysto imtixaanka ayaa uu rabay.*

### 3. Labo shumme

Labo shumme waa calaamadda " : " amma labo shumme oo is kor saaran. Isticmaallo badan baa labo-shummuhu leh yahay :

**b. Inta kooxi ka kooban tahay baa uu sheegi karaa sida:**

*Magaalooyinka u waaweyn Soomaaliya waa : Muqdisho, Hargeysa, Kismaayo...iwm.*

**t. Hadalka weriska ah na waa uu suntaa sida :**

*Dib baa uu u soo jeestay oo yidhi : "Waar ma adiga ayaa ii yeedhay. Maxaa i kaa dabo dhigay."*

**j. In sharrax dheeraad ah wax laga sii bixiyo na waa uu kuu banneeyaa sida:**

*Mararka qaar baa sanqadh yaab lihi baxaysay : dabayl baa babbinaysay bac geed ku laalan .*

### 4. Shumme

Shummuhu waa calaamadda " • ". Waxa uu calaamadiyaa dhammaadka hawraarta. Codka ayaa hal kaa ku go'a, hawraarta danbe ee xigta ayaa mar kaa kaddib bilaabataa.

***Tusaalayaal***

*Mar kaas uun baa geelii soo xerooday. Wiil yar oo jilbo jooga ayaa dab kii ardaaga oo qiiqaya hurinayay inta kol ba indhaha marmarto. Meel ag tiisa ah, oday baa dooyaysnaa oo warsanayay soofka, uraadka deegaanta iyo naqa. Malaha in badan baa uu moogaa xaalka udubka, haddii an uu marti ba ahayn.*

Sida badan shummaha waxa la isticmaalaa marka laga hadlayo wax cusub amma ka duwan oo an xidhiidh la lehayn hawraar tii hore.

### 5. Summadda weydiinta (su'aasha)

Summadda weydiinta amma su'aashu waa calaamadda " ? ". Dhammaadka hawraarta weydiinta ah ayaa la dhigaa oo ay calaamadisaa. Hawraar an weydiin qumman ahayn ma raaci karto:

*Ma tagtaa reerka beryahan danbe ?*





*Midab kee leh yahay qalin kaagu ?*

Hawraarahan, weydiimuhu waa cad yihiin. Mar kaa waa weydiimo qumman. Kuwo an weydiimo qumman ahayn baa jira sida :

*Ma tagtay reerka ayaa la i weydiiyay.*
Ma cad yahay qalin kaagu ayaa Axmed i su'aalay.

Hawraarahan danbe ma aha weydiimo qumman. Sidaa awgeed summadda weydiinta ma qaadan karaan. Mar kaa ayaa an la is ku khaldin warsiga qumman iyo ka kale.

### 6. Summadda yaabka

Summadda yaabku waa " ! ". Dhammaadka hawraarta yaab ku jiro ayaa la dhigaa summadda yaabka. Yaab kaas oo noqon kara: amar, majeerasho, fajac, naxdin, tiiqtiiqsi, dareen...iwm.

***Tusaalayaal***

*Waar bax oo tag !*

*Allaah, qurux badanaa !*

*Caku ! Car ! Wir !*

*Ahay ah !*

*Is ma og haan baa ay aslaysaa !*

### 7. Kolmaha

Summadda kolmuhu waa sidan : " « ... » ". Waxa ay calaamadiyaan hawraar amma koox ereyo ah oo qofka qoraalka, mar kaa qoray, an uu lehayn.

***Tusaaleh***

*« Maxaa aad u waddaa reerka », ayaa odaygu ku yidhi inanka reerka u weyn oo ka yimi qurbaha.*

Hadal kii odaygu yidhi baa lagu calaamadiyay kolmo. Kolmuhu, bidixda waa ka furmaan, midigta na waa ka xidhmaan amma bilawga hadalka waa la furaa, dhamaad kiisa na waa la xidhaa.

**8. Bilaha**

Summadda biluhu waa : " **(...)** ". Marka qayb ka mid ah hawraar la tagoorayo amma gooni laga dhigayo ayaa la isticmaalaa bilaha oo lagu xidhaa. Kooxda ereyo ah ee ku jirta bilo, xidhiidh nuxur ah la ma leha hawraarta inta kale.

***Tusaaleh***

*«Maxaa aad iga soo doontay?»* **(**Oo uu caado u lehaa**)** *ayaa uu ku yidhi wiil kii yaraa ee uu adeerka u ahaa ee wax soo mooday .*





Waa faallo ku saabsan hawraarta amma hadalka soconaya oo uu lel yahay qoruhu.

Hadalka inta ku jirta bilaha waa hadal an ka mid ahayn warka l hayay. Waa faallo qoruhu dhex geliyay. Sidaas baa loo geliyay bilaha.

**9. <u>Jiitimaha</u>**

Summadda jiitintu waa sidan : " **—** " **.** Dhawr siyood baa jiitimah loo isticmaalaa:

**b. Jiitintu waxa ay xidhaa qayb hawraar ka mid ah.**

Hawsha jiitimuhu hayaan waa mid ku dhaw tan bilaha.

Tusaaleh

*Waa uu eegay, ka joogsaday — il fashaq — oo ka jeestay.*

**t. Hadalka ay labo is weydaarsanayso waa lagu suntaa :**

*— Ma noo iman haysa?*

*— Haa, berri, haddii Eebbe idmo.*

*— Waa yahay. Waa inoo berri.*

**10. Shummayaasha laalnaanta**

Summadda, shummayaasha laalnaantu waa sidan : " **...** "

***Tusaaleh***

*Reer kii oo dhan baa joogay: aabbe, hooyo, walaalo, awoowo,***...***iwm.*

Waxa lagu muujiyaa wax sii socda amma la sii wadi karo:

**11. Farqad**

Farqad waa qayb ka mid ah qoraal oo ka kooban tixo hadal ah oo wada socda. Sadar cusub baa na farqadda laga bilaabaa.

Bal eeg qabas gaaban oo labo farqadood ah oo laga soo qaatay sheeko:-

*Dhib tii yaradka, waxa Cabdi kaga sii darnaa jirrabaadaha kale ee laga soo mariyay, halxidhaalayaal iyo duurxullo kale oo badan. Ma xanaaqi jirin ee mid kasta waa furi jiray oo ka bixi jiray. In taas oo dhan oo looga gol lehaa in lagu niyad jabiyo oo lagaga diro gabadha, inlayn si mutuxan loogu ma diidi kari haynin ee.*

*Is la qoyska suldaanka, nin kale oo reermagaal ahaa, baa la xidid ahaa. Qurux badnaa oo aad loo jeclaa oo si weyn loo xurmayn jiray. Geeddiga, marka awrta la furo, aqalka nin kan baa loogu hor taagi jiray.*





**Fasalka labaatanaad**

**DHIGAAL (orthografiyadda)**

# Xeerka I

## *Qodobka 1aad*

Erey kasta oo leh hayb (ku abtirsada qaybaha hadalka) iyo macne la garanayo, ha yaraado amma ha weynaado ee, is kii baa loo qorayaa oo uu is u taagayaa. Ereyada jaad kan ah la is ku ma dardarayo, waa na saddex:

b. Meeleeyayaal iyo magacuyaallo,
t. Magac iyo magacuyaallada tilmaanta iyo lehaanshiiyaha iyo
j. sifada iyo fal xaalka joogaha ah.

**b. Meeleeyayaal iyo magacuyaallo**

Ereyo gaagaaban oo ah meeleeyayaal iyo magacuyaallo ayaa aad la is ugu qasaa oo la is ku dardaraa. Weli ba xeer loo ma cuskado sida la is ugu dardaro. Qof kas taa sida ay la tahay ayaa uu u qoraa.

***Tusaalayaal***

***La i la ma ka la*** *qabanin raggii is dilayay.*

***La*** : waa magacuyaal ah faacil dahsoon
(sida " ***la*** *cun hilib kii* ").

***i*** : waa magacuyaal mafcuul qumman ah oo qofka kowaad ah (sida " ***i*** *daa* ").

***la*** : waa meeleeye (sida " *ka **la** qabta* ").

***ma***: waa falkaab nafyiye ah (sida " ***ma*** *qabanin*").

***ka*** : waa meeleeye (sida " *Wiilka **ka** qabo inanta* ").

***la*** : waa meeleeye (sida " *ka **la** qabta ragga* ").

Mar kaa maadaama erey kasta oo ka mid ah ereyada kor ku xusani leh yahay hayb iyo macne cad oo la garanayo, waa in mid wal ba goonidii loo qoraa. Erey kale lagu ma dari karo.

## t. Magaca iyo Magacuyaallada

Marka ay kulmaan magac iyo magacuyaallada tilmaanta iyo lehaanshiiyaha, labo erey ahaan baa loo ka la qorayaa magaca iyo magacuyaalka haddii mar kaa magacuyaalku ku bilaabmo shibbanayaasha ***"k"*** iyo ***"t"***, waayo magacuyaallada xarfahaasi u horreeyaan hayb iyo macne sugan waa qabaan.

***Tusaalayaal***

*Nin **kan*** *inan **tan***

*Nin **kaa*** *inan **taa***

*Nin **keer*** *inan **teer***

***Kuwan***

***kuwaa***

***Kuweer***

*Inan **kayga*** *inan **tayda***





*Inan **kaaga*** *inan **taada***

*Inan **kiisa*** *inan **tiisa***

*Inan **keeda*** *inan **teeda***

*Inan **keena*** *inan **teena** (inan **kayaga** inan **tayada**)*

*Inan **kiina*** *inan **tiina***

*Inan **kooda*** *inan **tooda**.*

***Kuweenna (kuwayaga)***

***Kuwaaga***

***Kuwiisa***

***Kuweeda***

***Kuweena (kuwayaga)***

***Kuwiina***

***Kuwooda***

Ereyada kor ku taxan ee waaweynaysan ee : ***kan, kaa, keer, kuwan, kuwaa, kuweer*** iyo ***tan, taa***, iyo ***teer.*** Waa magacuyaallo tilmaameedyo. Kuwa xarafka ***"k"*** u horreeyaa waa lab yihiin. Kuwa ***"t"*** u horreeyaa na waa dheddig yihiin. Ereyada ka horreeyaa na waa magacyadii ay tilmaamayeen.

Ereyada kale ee hoos ku taxan ee waaweynaysan ee :

***kayga, kaaga, kiisa, keeda, keena (kaayaga), kiina , kooda*** iyo ***tayda, taada, tiisa, teeda, teena (taayada), tiina*** iyo ***tooda*** waa magacuyaallo lehaanshiiyeedyo. Kuwa xarafka ***"k"*** u horreeyaa waa lab yihiin, kuwa ***"t"*** u horreeyaa na waa dheddig yihiin. Magacyada ka horreeya na waa waxyaalihii la lehaa.

Ereyada kale ee waaweynaysan ee :

***kuwayga, kuwaaga, kuwiisa, kuweeda, kuweena, kuwayaga, kuwiina*** iyo ***kuwooda*** waa magacuyaallo lehaanshiiyeedyo. Kuwani waa wada wadar iyo lab.

Hadda ba, ma la is ku qori karaa magacuyaallo tilmaameedyada, magacuyaallo lehaanshiiyeedyada iyo magacyada ka horreeya ee ay tilmaamayaan amma lehaanshiiyahooda sheegayaan, mise waa la ka la qorayaa?

Magacyada hore iyo magacuyaallada danbe waa la ka la qorayaa waayo :

- Horta waa ka la labo haybood iyo labo erey.
- Waa ta labaad ee, magacuyaallo tilmaameedyada iyo





lehaanshiiyeedyada kor ku xusan, mid wali ba gaar kii macne sugan oo la garanayo ayaa uu u leh yahay. Mar kaa mid wali ba is kii baa uu is u taagayaa oo loo qorayaa.

***Tusaalayaal***

*Aqallada reerku, mid ma aha ee, waa is xigaan.* ***Kayga*** *ayaa midigta u xiga.* ***Kuwa*** *dhexdu waa kiraysan yihiin.* ***Kaasi*** *na waa mid loogu talo galay martida.*

Ereyada tixda ee ***kayga, kuwa*** iyo ***kaas*** waa magacuyaallo. ***Kayga*** waa magacuyaal lehaanshiiyeed. ***Kuwa*** iyo ***kaas*** waa magacuyaallo tilmaameedyo. Dhammaan waa ereyo mid kas taa leh yahay macne buure ah oo la garanayo. Sidaa awgeed mid wali ba gooni baa uu is u taagi karayaa.

### j. Sifada iyo fal xaalka

Ereyada ah sifo iyo fal xaalka joogaha ah, la is ku ma qori karo; marar yar oo gaar ah mooyaan ee.

#### 1. Marka an la is ku qoraynin

***Tusaalayaal***

| | |
|---|---|
| *Waa aan dheer ahay* | *waa aan og ahay.* |
| *Waa aad dheer tahay.* | *waa aad og tahay.* |
| *Waa uu dheer yahay.* | *waa uu og yahay.* |

| | |
|---|---|
| *Waa ay dheer tahay.* | *waa ay og tahay.* |
| *Waa aannu dhaadheer nahay.* | *waa aannu og nahay.* |
| *Waa aydun dhaadheer tihiin.* | *waa aydun og tihiin.* |
| *Waa ay dhaadheer yihiin.* | *waa ay og yihiin.* |

Tusaalayaasha hore waa kuwo ay si cad u ka la dhigan yihiin ereyada sifooyinka ah iyo falalka xaalka ah ee dabo joogaa. Sifadu waa ereyga ***dheer***. Ereyada danbe na waa falal ah xaal oo ah joogayaal, ka na soo jeeda fal xaalka ***ahaw*** ee gargaaraha ah.

## 2. Mararka yar ee la is ku qorayo sifada iyo fal xaalka joogaha ah

| | | |
|---|---|---|
| *Geel baa aan leh ahay.* | | *Waa aan jecel ahay.* |
| *Geel baa aad leh**d**ahay.* | * | *Waa aad jecshahay.* |
| *Geel baa uu leh yahay.* | | *Waa uu jecel yahay.* |
| *Geel baa ay leh**d**ahay.* | * | *Waa ay jeceshahay.* |
| *Geel baa aannu leh nahay.* | | *Waa aannu jecel nahay.* |
| *Geel baa aydun leh**d**ihiin.* | * | *Waa aydun jeceshihiin.* |
| *Geel baa ay leh yihiin.* | | *Waa ay jecel yihiin.* |

Tusaalayaasha danbe ereyga sifada ahi waa ***leh***, falku na waa ereyada ka danbeeya; waa falal ah xaal iyo joogayaal : ***ahay, tahay, yahay, tahay, nahay, tihiin*** iyo ***yihiin***.

Ereyga sifada ah ee ***leh*** iyo fal xaalka joogaha ah ee dabo jooga ee





labada qof ee 2aad, fardi iyo wadar ba iyo 3aad dheddigi, waa is ku darsan yihiin. Fal xaalladii ayaa is dooriyay oo noqday :

| | | |
|---|---|---|
| Qofka 2aad/fardi | ***leh tahay*** | ***leh dahay*** |
| Qofka 2aad/wadar | ***leh tihiin*** | ***leh dihiin*** |
| Qofka 3aad/dheddig | ***leh tahay*** | ***leh dahay*** |

Mar kaa maadaama an ereyada ***dahay*** iyo ***dihiin*** ku lehayn macne sugan af Soomaaliga, gooni loo ma qorayo. Sidaa awgeed, waa in eregya hore lagu xidhiidhiyo sida xeerka, aynnu qodobka 2aad ku soo qaadi doonno dhigayo, loo na qoro sida ku cad tusaalayaasha kore ee ku suntan xiddigga amma *.

## *Qodobka 2aad*

Erey na is kii is u ma taagi karo oo loo ma qori karo haddii an uu lehayn macne la garanayo xattaa haddii uu leh yahay hayb sugan. Ereygaas waa in ereyga ka horreeya lagu daro. Jaad kan wax ka mid ah:

**Meeleeyayaasha** iyo **mafcuullo, magacuyaallada tilmaanta** iyo **lehaanshiiyaha** (an magaca ay weheliyaan lehayn qodob qumman, marka hore ba), **Sifada** iyo **fal xaalka tagaha ah**.

**b. Meeleeyayaasha iyo mafcuullada (magacuyaallo qofeedyo)**

Ereyada ah meeleeyayaasha iyo mafcuullada ayaa is bedbeddela oo taxriifi ku dhacdaa; dabadeed noqda ereyo an lahayn macne la garanayo in kasta oo leh yihiin hayb.

***Tusaalayaal***

***Iga*** *sii qalinka.*

*Xoog baa* ***lagaaga*** *qaaday usha.*

*Sanka ayaa uu* ***kaga*** jiiday *feedh* .

Ereyada ***iga***, ***lagaaga*** iyo ***kaga*** waa ereyo is ku dhafan amma dhafanayaal ah. ***"iga"*** waa labo erey oo ka la ah : ***"i"*** oo ah mafcuul qumman oo qofka kowaad ah iyo ***"ga"*** oo ah meeleeyaha ***"ka"*** oo doorsoon amma beddelan.

Ereyga ***"lagaaga"*** waa saddex erey. ***"La"*** waa magacuyaal ah faacil dahsoon, ***"gaa"*** na waa erey ah mafcuulka qumman ee qofka labaad ee ***"kaa"*** oo doorsoon iyo ***"ga"*** oo ah meeleeyeha ***"ka"*** oo doorsoon.

Ereyga ***kaga*** na waa labo erey. ***"Ka"*** oo ah meeleeye iyo ***"ga"*** oo ah is la meeleeyaha ***"ka"*** oo doorsoon.

Ereyada kore oo dhammi waxa ay ka siman yihiin : ka hore waa erey leh macne la garanayo. Midka amma labada hadhay na waa ereyo la





garanayo meesha ay ka soo jeedaan iyo macnahooda, se is dooriyay oo sidan ay hadda yihiin an gaar kood loogu qori karin.

Ereyada ***"ga"***, ***"gu"***, ***"gaa"*** iyo ***"guu"*** ku ma leha af Soomaaliga hadda macne sugan oo la garanayo. Sidaa awgeed, loo ma qori karo is kood. Mar kaa waa in lagu daro ereyga amma ereyada ka horreeya.

**t. Magacuyaallada tilmaanta iyo lehaanshiiyaha ee an xarfaha *"k"* iyo *"t"* ku bilaabmin**

Ereyada kale ee la is ku qorayo ee an mar na ba la ka la qori karini waa magacuyaallada tilmaanta iyo lehaanshiiyaha ee an xarfaha ***"k"*** iyo ***"t"*** ku bilaabmin. Magaca ay weheliyaan baa lagu darayaa.

***Tusaalayaal***

*Gabadhaa, Gurigan, Innamadan.*

*Hashayda, Dookheeda, Geeliisa.*

Ereyada kor ku taxani waa ereyo dhafanayaal ah oo is ugu jira : **magacyo** iyo **magacuyaallo**. Magacyadu waa kuwa hore ee : ***gabadh, guri, innamo, hal, dookh*** iyo ***geel***. Magacuyaalladu na kuwa danbe ee : ***dhaa, gan, dan, shayda, eeda*** iyo ***iisa***.

Magacuyaallada, saddexda hore waa magacuyaallo tilmaameedyo. Magacuyaallada, saddexda danbe na waa magacuyaallo lehaanshiiyeedyo. Dhammaan tood na waa magacuyaallo an ku bilaabmin xarfaha ***"k"*** iyo ***"t"***.

Gooni haddii loo qoro magacuyaallada kore, waa sidan:-

***Dhaa, gan, dan, shayda, eeda*** iyo ***iisa***.

Mar kaa is kood loo ma qori karo waayo macne sugan oo la garanayo ma yeelanayaan.

**j. Sifada iyo fal xaalka tagaha ah**

Sifada iyo fal xaalka tagaha ah la ma ka la qori karo. Waa la is ku qorayaa.

***Tusaalayaal***

*Waa aan* ***dheeraa***.

*Waa aad* ***dheerayd***.

*Waa uu* ***dheeraa***.

*Waa ay* ***dheerayd***.

*Waa aannu* ***dhaadheerayn***.

*Waa aydun* ***dhaadheeraydeen***.

*Waa ay* ***dhaadheeraayeen***.

Ereyada waaweynaysan ee ***dheeraa, dheerayd, dheeraa, dheerayd, dhaadheerayn, dhaadheeraydeen*** iyo ***dhaadheeraayeen*** waa dhafanayaal ka samaysan labalabada erey ee hoos ku taxan :

| | | | | |
|---|---|---|---|---|
| *Dheeraa* | = | *dheer* | + | ***ahaa***. |





| | | | | |
|---|---|---|---|---|
| *Dheerayd* | = | *dheer* | + | ***ahayd***. |
| *Dheeraa* | = | *dheer* | + | ***ahaa***. |
| *Dheerayd* | = | *dheer* | + | ***ahayd***. |
| *Dhaadheerayn* | = | *dhaadheer* | + | ***ahayn***. |
| *Dhaadheeraydayn* | = | *dhaadheer* | + | ***ahaydeen***. |
| *Dhaadheeraayayn* | = | *dhaadheer* | + | ***ahaayeen***. |

Mar kaa in kasta oo ereyada kore dhafaneyaal yihiin, hadda na waa la is ku qorayaa. La ma ka la saari karo amma qori karo.

## Xeerka II

Waa tii aynnu hore u nidhi erey kasta oo leh hayb iyo macne sugan oo la garanayo, is kii baa uu is u taagayaa oo loo qorayaa. Xeer kaas oo an la burinin baa hadda na xeer kani bannaynayaa sidan :-

- Labo erey amma saddex ba waa la is ku dari karaa haddii sidaa hawl yaraan la bido amma la moodo. Ereyada la is ku dari karaa na waa kuwan soo socda.

**b. Ereyga hore oo ku dhammaada shaqal, ka danbe na shaqal ku bilaabmo.**

***Tusaalayaal***

*i.* *waa, baa, ayaa, ma/aan, aad, uu, ay, aannu, aydun.*

ii. *aniga, adiga, isaga, iyada, annaga, idinka, iyaga/ayaa.*

iii. *haddii, marka, halka, sida, hadma, kuma, tuma , kuwama...*

*Iwm / aan, aad, uu, ay, aannu, aydun* iyo *ay.*

Ereyada kore, kuwa ka horreeya xarriiqda janjeedha, shaqallo ayaa u danbeeya, kuwa ka danbeeya na shaqallo ayaa u horreeya. Ereyada kore marka ay is ku darsamaan waa sidan soo socota :-

| | | | | |
|---|---|---|---|---|
| Waa | + | aan | = | waan |
| Baa | + | aad | = | baad |
| Ayaa | + | uu | = | ayuu |
| Ma | + | ay | = | may |
| Waa | + | aannu | = | waannu |
| Baa | + | aydun | = | baydun |

**t. Marka labada erey, ka hore ku dhammaado shaqal, ka danbe na ku bilaabmo xarfaha "*ha*" amma shibbanaha "*h*".**

***Tusaalayaal***

*Waa aan* ***tegi hayaa.***

*Waa aan* ***tagi hayay.***

*Waa ay* ***qaadan hayeen.***





*Waa aannu* ***qaadan haynay.***

Ereyada waaweynaysani marka ay is ku darsamaan waa sidan soo socota :-

| | | | | |
|---|---|---|---|---|
| *Tagi* | + | *hayaa* | = | *tagayaa.* |
| *Tagi* | + | *hayay* | = | *tagayay.* |
| *Qaadan* | + | *hayaa* | = | *qaadanayaa.* |
| *Qaadan* | + | *hayay* | = | *qaadanayay.* |

**Fiiro gaar ah**

Qof weli ba sida uu jecel yahay ha u qoro ereyadan kor ku xusan. Kii ka la qoraa waa u sax, ka is ku daro na waa u sax.

## J. Xadfanaanta ereyada is ku darsan

**Ereyada marka la is ku daro waxa xadfama shaqallo, iyo "*ha*" amma "*h*" oo ka go'a ereyga hore amma ka danbe.**

Mar kaa waa in xadfanaanta la muujiyo oo lagu muujiyo summadda xadfanaanta ee :'

***Tusaalayaal***

| | | |
|---|---|---|
| *Waa aan* | = | *w'aan* |
| *Tegi hayaa* | = | *teg'ayaa* |
| *Haddii aynnu* | = | *hadd'aynnu* |

Ereyada ***waa*** iyo ***aan***, wax baa ka xadfamay mar kii ay is ku dasameen. ***"aa"*** ayaa ka xadfamay ereyga ***waa***.

Ereyada ***tegi*** iyo ***hayaa*** waxa ka go'ay : ***"i"*** oo ka xadfamay ereyga hore ee ***tegi*** iyo ***"ha"*** oo ka xadfamay ereyga danbe ee ***hayaa***.

Ereyada ***haddii*** iyo ***aynnu*** na waxa ka xadfamay : ***"ii"*** oo ka xadfamay ereyga haddii.

**x. Dhafanayaal hal erey loo isticmaali karo.**

Ereyo gaar ah oo labo, saddex amma ka badan ah, oo erey keli ah laga dhigi karo, oo hal erey ahaan loo isticmaali karo ayaa jira.

***Tusaalehyaal***

*Ma* **+** *aha* **+** *ee* = *maah'ee*

*Ha* **+** *se* **+** *yeesho* **+** *ee* = *haseyeesh'ee*

*Ha* **+** *ba* **+** *yaraato* **+** *ee* = *habayaraat'ee*

Ereyadan kore waxa lagu dhaqayaa qodob kan iyo is la xeer kan. Waa ereyo is ku dhafan oo ka samaysan saddexsaddex erey, oo xarfo na ka xadfameen. In xarfo ka xadfameen se waa in la muujiyaa sida ku tusan tusaalayaasha.

Ereyga hore ***"a"*** ayaa xadfan, ka labaad na ***"o"*** ayaa la xadfay, ka saddexaad na ***"o"***.





# Xeerka IIIaad

**Dhigaalka ereyo qubane ah**

**b. Ereyga *"an"***

Ereyga ***"an"*** waa falkaab nefyiya hawraar magaceedda.

***Tussalayaal***

*Cali baa **an** tagin dugsiga.*

*Ardayga **an** xafidin casharka waa la ganaaxi doonaa.*

Dhawaaq ahaan, waxa ereyga ***"an"*** u dhaw yahay ereyga magacuyaalka ah ee ***"aan"***. Waxa aan sidan ugu qoray si aan u ka la duwo. Sabab kale ma jirto.

**t. Barkinka *'s'***

Barkinka, labo siyood baa af Soomaaligu u isticmaalaa :

**i. iskukicinta ereyga (liaison)**

Marka ereyga ***an*** ka horreeyo, magacuyaal faacileedka ayaa barkinka loo baahdaa, si iskukicintu u hawl yaraato. Haddii uu dabo maro, dhib baa timaadda oo waxa adkaata iskukicinta ereyada.

***Tusaalehyaal***

| | |
|---|---|
| *Qalin **an aan** lehayn* | *Qalin **aan an** lehayn* |
| *Qalin **an aad** lehayn* | *Qalin **aad an** lehayn* |
| *Qalin **an uu** lehayn* | *Qalin **uu an** lehayn* |
| *Qalin a**n ay** lehayn* | *Qalin **ay an** lehayn* |
| *Qalin **an aannu** lehayn* | *Qalin **aannu an** lehayn* |
| *Qalin **an aydun** lehayn* | *Qalin **aydun an** lehayn* |
| *Qalin **an ay** lehayn* | *Qalin **ay an** lehayn* |

Hawraarta bidixda, ereyga ***"an"*** iyo magacuyaallada dabo jooga waa la is ku kicin karayaa waayo : ereyga hore ee ***"an"*** shibbane ayaa u danbeeya, magacuyaallo faacileedyada na shaqallo ayaa u horreeya.

Hawraaraha midigta, magacuyaallada ayaa ka horreeya ereyga ***"an"***, taas oo keentay in ay adkaato iskukicin toodu.

Ka soo qaad magacuyaallada ***"uu"*** iyo ***"ay"***. Shaqal baa u danbeeya, ereyga ***"an"*** na shaqal baa u horreeya. Sidee mar kaa la is ugu kicin karaa ereyada? Waa adag tahay.

Hadda ba si iskukicintu u fududaato, af Soomaaligu waxa uu jideeyaa in xarafka ***"s"*** loo dhaxaysiiyo magacuyaalka hore iyo ereyga ***"an"*** sida :





***Tusaalayaal***

*Qalin **uu (s) an** lehayn*

*Qalin **ay (s) an** lehayn*

***"s"*** lagu darayo si kicintu u fududaato waxa la yidhaa ***barkinka.*** Waa na ta keentay lahjadda lagaga hadlo gobollada qaar kood, sida Nugaal, Sool iyo Sanaang.

**Fiiro gaar ah**

Mar kaa barkinka ***"s"*** ee jaad kan ah waa lagu isticmaali karaa hadalka, waa se reeban tahay in qoraalka lagu isticmaalo. Sidaa awgeed na la is ma weydaarin karo ereyga ***"an"*** iyo magacuyaalka. ***"an"*** ha horreeyo mar kasta.

**ii. Xarako**

Marka magacuyaallo tilmaameedka ***"kaa"*** iyo lehaanshiiyeedka ***"kii"*** qaadanayaan xarako faacileed amma mafcuuleed na waa loo baahdaa.

***Tusaalayaal***

| | | |
|---|---|---|
| *Kaa* | ⇨ | *kaasi waa cunaa hilibka cas.* |
| *Kii* | ⇨ | *kiisii baa lumay.* |

Ereyada ***"kaa"*** iyo ***"kii"***, shaqallo ayaa u danbeeya. Kuwaas oo an

xarakadu qaban karin. Sidaas baa mar kaa *"s"* amma barkinta loogu baahday.

**Xuquuqda nuqulka iyo daabacaadda, ha laga la xidhiidho kaatibka oo keli ah. Ciddii, an fasax ka haysanin, waa ku booli iyo sharcidarro; dacwad na waa lagu oogi doonaa.**

**Wa Billaahi Altawfiiq**



# MAXAA LAGA YIDHI BUUGGA

**Mar kii aan akhriyay kitaab kan 'Naxwaha Af Soomaaliga', waxa aan u arkay tallaabo horumarineed iyo aqooneed oo mudan xurmo iyo dhiirrigelin.**

***Aw Jaamac Cumar Ciise***

**Waa ay habboon tahay in aan dhowr erey oo taageero ah ku xoojiyo kitaab kan 'Naxwaha Af Soomaaliga' ee Axmed Shiraac qoray oo aan u arko sees iyo majare loo raaco dhismaha afka hooyo. Ugu danbayn waa aan ku hanbalyaynayaa qoraha sida uu waqtiga badan u geliyay ee is ugu taxallujiyay hawshan.**

***Maxammad Ibraahim Warsame (Hadraawi)***

**'Naxwaha Af Soomaaligu' waa kitaab ka soo mutay qoruhu halgan iyo dadaal dheer. Sidaa awgeed waa kitaab qiime weyn ugu fadhiya Ummadda Soomaaliyeed oo ay tahay in laga helo aqal kasta iyo maktabad kasta. Waa ku mahadsan yahay walaal keen Axmed Shiraac.**

***Sulaymaan Axmad guuled***
**Madaxa Jaamicadda Cammuud**




IFTIN IFTIN PRINTING PRESS
518885-218111-4711113